Tixraax:XRW/0306/07/2024 Tariikh : 11/07/2024

XAFIISKA RA'IISUL WASAARAHA BIXID 18 JUL 2024 EXIT OFFICE OF THE PRIME MINISTER

Ku: Guddoonka Golaha Shacabka JFS =Muqdisho=

Og: Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya =Muqdisho=

UJEEDDO: SOO GUBIN HINDISE-SHARCIYEEDKA CANSHUURTA DAKHLIGA

Mudane Guddoomiye,

Annaga oo ka anbaqaadeyna Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.22.79.07.24 ee 11/07/2024** , kuna saabsan ansixinta **"Hindise-Sharciyeedka Canshuurta Dakhliga** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

Hindise-sharciyeedka Canshuurta Dakhliga oo muhiim u ah kobcinta dakhliga Dowladda, waxa uu soo maray dhammaan habraacyadii loo asteeyay.

Mudane Guddoomiye, waxa aan halkan idin-kugu soo gudbinaynaa Hindise-sharciyeedka sare ku xusan, si aad uga gudataan waajibaadkiina dastuuriga ah. waxa aan idinka codsanaynaa in aad fududeysaan ansixinta **"Hindise-sharciyeedka Cashuurta Dakhliga".**

Xiriir iyo wada shaqeyn wacan.

XUKUUMADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA XAFIISKA RA'IISUL WASAARAHA OFFICE OF THE PRIME MINISTER FEDERAL GOVERNMENT OF SOMALIA

Mudane, Hamza Cabdi Barre
Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
GOLAHA SHACABKA
TAR: 3-3-2025
TIX: 174
SAXIIX: Xuseen Cali
GELID / ENTRY

Tixraac:XRW/298/07/2024 Tariikh: 11/07/2024

XAFIISKA RA'IISUL WASAARAHA
BIXID
11 JUL 2024
EXIT
OFFICE OF THE PRIME MINISTER

Ku: Wasaaradda Maaliyadda =Muqdisho=
Og: Dhammaan Xubnaha Golaha Wasiirrada =Muqdisho=
Og: Guddoonka Golaha Shacabka =Muqdisho=
Og: Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya =Muqdisho=

UJEEDDO: GO'AAN GOLE, ANSIXINTA HINDISE-SHARCIYEEDKA SHARCIGA CANSHUURTA DAKHLIGA

Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS;

Markuu arkay: Qodobka 99[aad] farqadaha (a), (b) iyo (c) ee Dastuurka KMG.

Markuu arkay: Qodobka 100[aad] farqadaha (a) iyo (d) ee Dastuurka KMG.

Markuu arkay: Warqadda summadeedu tahay Ref **WM/XWD/1172/2024** ee ku taariikheysan **9/07/2024** kuna saabsan codsi soojeedinta Wasaaradda Maaliyadda ee Hindise-sharciyeedka Sharciga Canshuurta Dakhliga

Markuu arkay: Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.22.79.07.24 ee 11/07/2024,** kuna saabsan ansixinta Hindise-sharciyeedka Sharciga Canshuurta Dakhliga oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

Markuu tixgeliyey: Muhiimadda uu leeyahay Hindise-sharciyeedka Sharciga Canshuurta Dakhliga.

Wuxuu Meelmariyay:

Qodobka 1aad

Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.22.79.07.24 ee 11/07/2024,** kuna saabsan ansixinta Hindise-sharciyeedka Sharciga Canshuurta Dakhliga oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

Qodobka 2aad

In si deg deg ah loogu gudbiyo Golaha Shacabka "**Hindise-sharciyeedka Sharciga Canshuurta Dakhliga**" si ay uga gutaan waajibaadkooda dastuuriga ah.

XUKUUMADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA * XAFIISKA RA'IISUL WASAARAHA * OFFICE OF THE PRIME MINISTER * FEDERAL GOVERNMENT OF SOMALIA

Mudane, Hamza Cabdi Barre
Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS

SUMMAD: XGG/204/2024 **10/07/2024**

Ku: Agaasinka Golaha Wasiirradda **Muqdisho**
Ku: Wasaaradda Maaliyadda **Muqdisho**
Og: Xafiiska Ra'iisul-wasaaraha Xukuumadda JFS **Muqdisho**

Ujeeddo: Talo Sharci

Xafiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda oo tiixraacaya warqadda Summaddeedu tahay: **MOF/AG/D-622/24**, ee ku taarikheysan **08 July, 2024** kana soo baxday Wasaaradda Maaliyadda Xukuumadda JFS, ujeedadeeduna ahayd: **Soo gudbin "HINDISE-SHARCIYEEDKA Canshuuraha Dakhliga".**

Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda, asaga oo gudanaya waajibaadkiisa shaqo si waafaqsan Sharci **Lr. 18 ee 29 Jannaayo 1976**, waxa uu halkan idiinkugu soo gudbinayaa **"Hindise-sharciyeedka Sharciga Canshuuraha Dakhliga"** oo ay Wasaaradda Maaliyaddu u soo gudbisay Xafiiska Garyaqaanka Guud, si uu uga guto waajibaadkiisa shaqo, ugana bixiyo Talo Sharci ah.

Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda ka dib markii uu darsay Nuqulka Sharcigan, uuna ku daray Ra'yigiisa iyo taladiisa Sharci. Xafiisku waxa uu ku talinayaa in la horgeeyo golaha Wasiiradda, maadaama aanay ka hor imaanayn dastuurka iyo shuruucda dalka.

FG: Waxa halkan ku lifaaqan Sharciga Sare ku xusan.

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE DAWLADDA ★ OFFICE OF THE STATE ATTORNEY GENERAL ★ مكتب المحامي العام للدولة

Dr: Cabdiraxmaan Maxamuud Xirsi
Ku-Xigeenka Garyaqaanka Guud ee Dawladda

HINDISE SHARCIYEEDKA

SHARCIGA CANSHUURTA DAKHLIGA

CUTUBKA 1-AAD
HORDHAC

Qodobka 1-aad
Baaxadda iyo Dhamaystirnaanta Sharcigan

1) Sharcigani waxa uu soo rogayaa canshuurta dakhliga waxa uuna go'aaminayaa qaddarta canshuurta dakhliga ee laga rabo shakhsiyaadka la qeexay, wakhtiga iyo habraaca loo bixinayo canshuurta dakhliga.

2) Haddii aan si kale oo cad aan loogu sheegin Sharcigan gudihiisa:

(b) Sharcigani waxa uu dejinayaa dhammaan xeerarka ku saabsan canshuurta dakhliga;

(t) Sharci aan ahayn Sharcigan ama Sharciga Maamulka Dakhliga (Sharci Lr. 13 ee 27 Oktoobar 2019), haa ahaado mid hadda jira ama mustaqbalka la dejin doono, ma go'aamin karo qaanta canshuureed ee uu shakhsi ku waajibiyay Sharcigan, marka laga reebo haddii uu sharciga kale si cad wax uga beddelayo Sharcigan ama Sharciga Maamulka Dakhliga, 2019; iyo

(j) Marka la fulinayo Sharcigan, Wasaaraddu waa inay si cad u dabaqdaa Qodobka 74-aad ee Sharciga Maamulka Dakhliga (Sharci Lr. 13 ee 27 Oktoobar 2019).

3) Habraaca Sharcigaan loo dhaqangelinaayo, oo ay ku jirto xiriirka ka dhexeeya canshuurbixiyeyaasha iyo Wasaaradda waxaa hagaaya Sharciga Maamulka Dakhliga (Sharci Lr. 13 ee 27 October 2019) iyo Sharcigan.

Qodobka 2-aad
Qeexitaanno

Sharcigan dhexdiisa, ereyadan soo socda wuxuu mid walba yeelanayaa macnaha ku hor qoran:

1) " Amaano" waxa loola jeedaa macnaha lagu qeexay Qodobka[1] 3-aad.

2) "Amaano-haye" waxa loola jeedaa macnaha lagu qeexay Qodobka 3-aad.

3) "Badeeco ganacsi" waxa loola jeedaa macnaha lagu qeexay Qodobka 6-aad.

4) "Canshuur ka-reebidda kama dambaysta ah" waxa loola jeedaa macnaha lagu qeexay Qodobka 95-aad.

5) "Canshuur laga reebe" waxa loola jeedaa qofka helaya ama ay tahay inuu helo lacag canshuurta in laga reebay sida ku cad Qaybta IIaad ee Cutubka IXaad.

---

[1] Erayga "Qodob" macnehiisu waa qodob ka mid ah Sharcigan.

6) "Caymiska muddada dheer" waxa loola jeedaa macnaha lagu qeexay xeernidaamiyeyaal, haddii uusan jirin xeer-nidaamiye waxa loola jeedaa macnaha ay ku qeexdo hey'ada Soomaaliyeed ee ku shaqada leh.

7) "Dalka degaan ku ah" marka loola jeedo shakhsi waa shakhsi loo aqoonsaday in uu deggan yahay gudaha Soomaaliya si waafaqsan Qodobka 77-aad.

8) "Faa'ido saami (dividend)" ee shirkad waxaa loola jeedaa macnaha lagu qeexay qodobka 7-aad.

9) "Faa'idada deynta" ee lacag-bixin waxa loola jeedaa macnaha lagu qeexay Qodobka 7-aad.

10) "Aaaladaha Maaliyadda" waxa loola jeedaa macnaha lagu sheegay Qodobka 7-aad.

11) "Ganacsi" waxaa loola jeedaa macnaha lagu qeexay Qodobka 5-aad.

12) "Hanti" waxa loola jeedaa macnaha lagu sheegay Qodobka 6-aad.

13) "Hantida gudaha" macnaheedu waa:

(b) hanti uu leeyahay shakhsi Dalka degaan ku ah (aan aheyn hanti ma guurto dibadda laga leeyahay ama hanti laga leeyahay xarun ganacsi dibadeed) ama loo nisbeeyo xarun ganacsi Soomaaliyeed sida ku cad qodobka 82(2);

(t) lahaansho hanti ma guurto ah oo taalla gudaha Soomaaliya; iyo

(j) lahaanshaha saami ee hay'ad Dalka degaan ku ah, halkaasoo milkiilaha oo ay weheliyaan dadka-u-dhow, ay si toos ah ama si dadban u leeyihiin ama ay u lahaayeen saddexdii sano ee la soo dhaafay, boqolkiiba 25 ama ka badan ee saamiga ama awoodda codeynta ee hay'ada.

14) "Hanti maalgashi" iyo "hanti maalgashi canshuur-gal ah" waxa loola jeedaa macnaha lagu qeexay Qodobka 6-aad.

15) "Hanti ra'sumaal" waxaa loola jeedaa macnaha lagu qeexay Qodobka 6-aad.

16) "Hanti qiima-dhacda" waxaa loola jeedaa macnaha lagu qeexay Qodobka 6aad.

17) "Hanti ma-guurto ah":

(b) waxa ay leedahay macnaha uu u yeelo xeerka madaniga ah;

(t) waxana ka mid ah:

i. lahaanshaha kiro macdan qodis (mining lease)ama xuquuq kale ee lagu soo saaray ama heshiis wadaag wax-soo-saar (production sharing agreement) ee shidaal oo ay soo saartay ama gashay Dawladda Soomaaliya; iyo

ii. lahaanshaha saami hay'ad ganacsi taasoo hantida shirkada, si toos ah ama si dadban ay u leeyihiin hal ama in ka badan oo hay'ado dhexe ah (interposed entity), ay tahay hantida ma-guurtada ah ee lagu sheegay faqrad-hoosaadka (b) taas oo taala gudaha Soomaaliya ama xuquuqaha lagu sheegay farqad-hoosaadka b(i).

18) "Hayn (hold)" marka loo eego hanti macnaheedu waa lahaanshaha hantida.

19) "Hay'ad" waxaa loola jeedaa macnaha lagu qeexay Qodobka 3-aad.

20) "Il (source)" lacageed ama dakhli waxaa lagu qeexay Qodobka 79-aad.

21) "Ka faa'iidayste" marka amaano ama waqaf laga hadlayo waxaa loola jeedaa macnaha lagu qeexay Qodobka 3-aad.

22) "Kharash" waxa loola jeedaa lacag bixin yareyneysa hantida saafiga ah ee qofka lacagta bixinaya.

23) "Kharash la saaray (excluded expenses)" waxa loola jeedaa macnaha lagu qeexay Qodobka 8-aad.

24) "Kharash gelid (incurred)", marka loo eego kharash ama qadar lacageed, waxa lagu fasiray macne ku haboon Qodobbada 26-aad, 27-aad iyo 28-aad.

25) "Kharashka gaarka ah (private expense)" waxa loola jeedaa macnaha lagu qeexay Qodobka 8-aad.

26) "Khayraadka dabiiciga ah" waxaa loola jeedaa macdanta, shidaalka, biyaha ama kheyraadka kale ee aan nooleyn ama nool ee dhex ama hoos yaalla dhulka ama badda Soomaaliya.

27) "Khidmada adeegga dijitaalka (automated digital service fee)" waxaa loola jeedaa lacagta lagu bixiyo adeeg kasta oo intarneed ama shabakad danabeysan (elektaroonig) ah oo yareynaya ku luglahaanshaha shaqo ee aadanaha, laakiin aysan ku jirin khidmadda adeegga farsamada.

28) " Khidmadda adeegga":

(b) waxaa loola jeedaa lacag bixin, si xilliyeed (periodic) ama halmar ah loo bixiyay, ilaa xadna lagu saleeyay qiimaha suuqa, ayna macquul tahay in loo nisbayn karo adeegaas ama dheef kale oo uu bixiyo ganacsi qof leeyahay;

(t) waxaa ku jira khidmadda adeegga farsamada iyo khidmadda adeegga dhijitaalka ah; laakiin

(j) kuma jiraan dakhliga shaqada, khidmada kheyraadka dabiiciga ah, kirada, faa'idada daynta, canshuurta milkiyadda ama lacagaha laga helo wareejinta hanti ama galidda qaan.

29) "Khidmada kheyraadka dabiiciga ah" waxa loola jeedaa macnaha lagu sheegay Qodobka 6-aad.

30) " Khidmadda adeegga farsamada" waxa loola jeedaa khidmadda adeeg lagu bixiyay:

(b) adeeg kasta oo maamul, farsamo ama la-talin, oo ay ku jiraan adeegyada farsamada ama shaqaale;

(t) aqoon, khibrad iyo xirfad warshadeed, ganacsi ama saynis; ama

(j) taageero udub dhexaad u ah arimaha lagu sheegay qeexida "milkiyadda" ee qodobka 6(5)(t).

31) "Kiro (rent)" waxa loola jeedaa macnaha lagu qeexay Qodobka 6-aad.

32) "Kiro muddo dheer (lease)" ee hanti waxa loola jeedaa macnaha lagu qeexay Qodobka 6-aad.

33) "Koror (gain)" laga helay iibinta hanti ama qaan waxa loola jeedaa macnaha lagu qeexay Qodobka 39-aad.

34) "Ku tiirsane (dependant)" qof ah waxaa loo jeedaa macnaha lagu qeexay Qodobka 4-aad.

35) "Lacag-bixin (payment)" waxaa loola jeedaa nooc kasta oo qiimo ama dheef (benefit) uu qof siiyo qof kale waxaana ka mid ah:

(b) wareejinta hanti ama lacag uu qof u wareejinayo qof kale ama wareejinta uu dayn ku wareejinayo qof kale;

(t) kordhinta uu qof kordhiyo hanti uu qof kale leeyahay ama hoos u dhigidda qaan qof lagu leeyahay;

(j) adeeg qof uu qof kale u qabanayo; iyo

(x) u diyaarinta (making available) hanti ama lacag uu leeyahay ama uu heli karo qof si uu u isticmaalo qof kale, ama u ogolaanshaha ka faa'iidaysiga hantidaas ama lacagtaas ee qof kale.

36) "Dheefta faa'iidada hantida" waxa loola jeedaa macnaha lagu qeexay Qodobka 42-aad.

37) "Lacagta hawlgabka" waxaa loola jeedaa lacag bixinta, si hal mar ah, liiltir ah ama liiltir la fududeeyay (commuted pension) ah, oo uu shakhsi u siiyo:

(b) shakhsi marka uu hawlgab noqdo (shaqada ka fariisto); ama

(t) xigtada shakhsiga haddii uu shakhsigu geeriyoodo hadii aysan aheyn lacagta caymiska muddada dheer.

38) Lahaansho" hanti waxa loola jeedaa macnaha lagu qeexay Qodobka 6-aad.

39) "Lahaansho asaasi ah":

(b) marka la eego hay'ad ganacsi, waxa loola jeedaa lahaanshaha saami ee hay'ad ganacsi:

i. ha ahaato mid si toos ah ama si dadban ay u leeyihiin hal ama in ka badan oo hay'ado dhextaal ah (interposed); iyo

ii. iyadoo la dabageli karo dhammaan hay'adaha dhextaalka ah ilaa laga ogaado in ay si toos ah ama si dadban u leeyihiin shakhsiyaad ama hay'ado ganacsi oo aan qofna ku lahayn xubinnimo saami; iyo

(t) marka ay tahay hanti ay leedahay hay'ad ganacsi, waxaa loo go'aaminayaa in ay hantida leeyihiin milkiilayaasha asaasiga ah ee hay'ada ganacsi iyadoo lagu saleynayo sida ay saami ahaan u kala leeyihiin hay'ada.

40) "Loo shaqeeye":

(b) waxa loola jeedaa qofka maamula ama ajuuro siiya shaqaale u shaqeeya; iyo

(t) haddii aan la heyn caddayn shaqaaleyn, waxaa ku jira qofka isaga ama wakaaladiisa lagu bixiyo lacag adeeg ama shaqo lagu qabtay.

41) "Maalgashi" waxa loola jeedaa macnaha lagu qeexay Qodobka 5-aad.

42) "Wasaaradda (Maamulka)" waxaa loola jeedaa Wasaaradda Maaliyadda.

43) "Maamule" hay'adeed waxa loola jeedaa macnaha lagu qeexay Qodobka 3-aad.

44) Dakhli canshuur-gal ah" waxaa loola jeedaa macnaha lagu qeexay Qodobka 10-aad.

45) "Dakhliga la qiimeynayo" waxa loola jeedaa macnaha lagu qeexay Qodobka 11-aad.

46) "Dalka degaan ku aheyn" waxaa loola jeedaa qof aan Soomaaliya degaan ku aheyn.

47) "Xuquuqda lahaanshaha (royalty)" waxa loola jeedaa macnaha lagu qeexay Qodobka 6-aad.

48) "Nidaamka xisaabaadka ee si guud loo wada ogol yahay (GAAP)" waxaa loola jeedaa halbeegyada warbixinta maaliyadeed ee caalamiga ah iyo, kuwa lagu qeexay xeernidaamiyeyaal, waxaana ku jira habraacyada ay wakhtiyo kala duwan dejiso hey'ad ku shaqa leh sida Hay'adda Xisaabiyeyaasha Soomaliyeed.

49) "Dheefta ceymiska " waxa loola jeedaa macnaha lagu qeexay Qodobka 68-aad.

50) "Qaan sheegasho (debt claim)" iyo "qaan waajibtey (debt obligation)" waxaa loola jeedaa macnaha lagu sheegay Qodobka 7-aad.

51) "Qaanta gudaha" macnaheedu waa qaan lagu leeyahay qof Dalka degaan ku ah (marka laga reebo qaan loo nisbeyn karo xarun ganacsi dibadeed) ama loo nisbeeyo xarun ganacsi Soomaaliyeed sida ku cad Qodobka 82(2).

52) "Qaaraanka hawlgabka" waxaa loola jeedaa lacagta la dhiganayo sanduuqa hawlgabka ee ay ujeedadu tahay helidda lacagaha hawlgabka ee hadda ama mustaqbalka.

53) “Qadar la helay”, marka loo eego dakhli ama qaddar lacageed, waxaa lagu fasiray si ku haboon Qodobbada 26-aad, 27-aad iyo 28-aad.

54) "Qadar la-dhaafay" waxaa loola jeedaa macnaha lagu qeexay Qodobka 15-aad.

55) "Qadar” waa qadar lacageed oo la bixiyay ama la helay.

56) "Qiimaha saafiga ah (net cost)" ee hanti leedahay waqti gaar ah waxay la mid tahay:

(b) marka laga hadlayo hantida qiima-dhacda, saamiga qiimaha qoran ee hantida ay ka tirsan tahay wakhtigaas (eeg Jadwalka Afraad faqradiisa 4) oo loo kala qeyb-qaybiyey si waafaqsan qiimaha suuqa ee dhamaan hantida isku midka ah; iyo

(t) marka laga hadlaayo hantida nuucyadeeda kale, qadarka lacageed ee u dhaxeeysa marka laga jaro qadarka lacageed ee hantida lagu kharash-gareeyay qadarka lacageed ee hantida laga helay ilaa iyo intaas ay jirto.

57) "Qiimaha suuqa" ee lacag bixin, hanti ama qaan waxaa loola jeedaa macnaha lagu qeexay Qodobka 32-aad.

58) "Qof dhow" iyo "dad is leh” waxa loola jeedaa macnaha lagu qeexay Qodobka 4-aad.

59) "Dakhliga ka soo xarooda dibadda (repatriated income)" ee xarun ganacsi gudaha waxa loola jeedaa macnaha lagu qeexay Qodobka 84-aad.

60) "Saamile" shirkad waxa loola jeedaa macnaha lagu qeexay Qodobka 3-aad.

61) "Sanad canshuureed" waxa loola jeedaa macnaha lagu qeexay Qodobka 25-aad.

62) "Sanduuq hawlgab la aqoonsan yahay" waxaa loola jeedaa sanduuqa hawlgabka ee lagu qeexay Qodobka 69-aad.

63) "Sanduuqa hawlgabka":

(b) waxa uu yeelanayaa macnaha ay xeernidaamiyeyaal qeexaan; iyo

(t) haddii uusan jirin xeernidaamiye, waxaa loola jeedaa heshiis dhisaya ujeedo qabasho iyo maalgelin qaaraan hawlgab si lacag hawlgabka loo siiyo ka faa'iideystayaasha sanduuqa hawlgabka ama xigtadooda.

64) “Shakhsi” waxa loola jeedaa macnaha lagu qeexay Qodobka 3-aad.

65) "Shaqaale" waxaa loola jeedaa shakhsi qabanaya shaqo.

66) "Shaqo" waxaa loola jeedaa macnaha lagu qeexay Qodobka 5-aad.

67) "Shirkad" waxaa loola jeedaa macnaha lagu qeexay Qodobka 3-aad.

68) "Shuraako (partnership)" iyo "shirkadle (partner)" waxa loola jeedaa macnaha lagu qeexay Qodobka 3-aad.

69) "Wasiir" waxaa loola jeedaa Wasiirka Maaliyadda ee Dawladda Federaalka.

70) "Wakiil canshuur-reebid" waxaa loola jeedaa qofka laga rabo inuu canshuurta ka reebo lacag si waafaqsan Qaybta IIaad ee Cutubka IXaad.

71) "Ka kaaftoomid" hanti ama qaan waxay leeyihiin macnaha lagu kala qeexay Qodobbada 43-aad iyo 44-aad, iyadoo loo eegaayo sida ay u kala horreeyaan.

72) "Xarun ganacsi (permanent establishment)" waxaa loola jeedaa xarun ganacsi oo maxalli ah ama xarun ganacsi oo dibadeed.

73) " Xarun ganacsi ee maxalli ah (Somalia permanent establishment)" waxa loola jeedaa macnaha lagu qeexay Qodobka 80-aad.

74) "Xarun ganacsi ee dibadeed (foreign permanent establishment)" waxa loola jeedaa macnaha lagu qeexay Qodobka 80-aad.

75) "Xigto" waxa loola jeedaa macnaha lagu qeexay Qodobka 4-aad.

76) "Xubin" hay'adeed waxa loola jeedaa macnaha lagu qeexay Qodobka 3-aad.

77) "Xubinnimo" hay'adeed waxa loola jeedaa macnaha lagu qeexay Qodobka 7-aad.

78) Iyada oo la raacayo Qodobbada 3-aad, 4-aad iyo 15-aad ee Sharciga Maamulka Dakhliga (Sharci Lr. 13 ee 27 Oktoobar 2019), Sharcigan waxaa loo maamulayaa, islamarkaasna lala akhrinayaa Sharciga Maamulka Dakhliga, 2019. Erayada aan si toos ah loogu qeexin Sharcigan waxa ay leeyihiin macno la mid ah kuwa lagu qeexay Sharciga Maamulka Dakhliga, 2019.

Qodobka 3-aad
Shakhsiyaadka, Hay'adaha iyo Xubnahooda iyo Maareeyayaashooda[2]

---

[2] Persons, Entities and their Members and Managers.

1) "Shakhsi" waxaa loola jeedaa qof ama hay'ad. Waxaa ku jira shakhsi geeriyooday iyo hay'ad aan hadda jirin.

2) "Hay'ad" waa qaab-dhismeed ujeedooyinka guud ee sharcigani ama qodobo ka mid ah u aqoonsanyihiin inuu ka soocan yahay shakhsiyaadkii dhisay. Qaybaha hay'addu waa-

b) "shuraako (partnership)", waxaa loola jeedaa isutaga labo ama ka badan oo shakhsiyaad ama shirkado ah kuwaasoo si wadajir ah u qabanaya ganacsi si faa'ido doon ah, iyadoo aan loo eegin in isutaga qoraal ahaan loo diiwaan geliyay iyo in kale;

t) "amaano (trust)", oo :

i) waxaa loola jeedaa hanaan uu amaana-haye hanti ku haynayo;

ii) waxaa ku jira sanduuqa hawlgabka; laakiin

ii) waxaa ka baxsan shuraako iyo hanaan abuuraya shakhsi qaanuuni ah oo madax banaan si waafaqsan Xeerka Madaniga ah; iyo

j) "shirkad (corporation)", taas oo:

i) loola jeedo:

B) qaab-dhismeed abuuraya shakhsiyad qaanuuni ah oo madax banaan sida waafaqsan Xeerka Madaniga ah; iyo

T) isutag ama koox shakhsiyaad ah oo loo aqoonsan karo si ka soocan dadka iska leh iyadoo aan loo eegin in isutaggu ama shakhsigu leeyahay shakhsiyad qaanuuni oo gooni ah;

ii) waxaa ka mid ah:

B) iskaashato saaxiibnimo, mid dhismo, sanduuqa keydka howlgabka (provident fund), iskaashato bulsho, ama sanduuq ama iskaashatooyin_la mid ah;

T) Dawladda Federaalka Soomaaliya iyo Dawlad Goboleedyada, oo ay ku jiraan wasaaradaha, hay'adaha ama wakaaladaha ka tirsan dawladahaas;

J) maamulka dawladaha hoose, golaha deegaanka ama hay'adaha la midka ah ee Soomaaliyeed;

X) dawlad shisheeye, xafiis hoosaad siyaasadeed ee dawlado shisheeye ama hay'ad caalami ah oo ka hawlgasha qaybaha dadweynaha (public international organizations); iyo

KH) isutag kasta oo dalka deegaan ku aheyn oo ay Wasaaraddu u aqoonsato in uu yahay shirkad; laakiin

iii) waxaa ka baxsan shuraako ama amaano.

3) Waxaa xeer nidaamiyayaal lagu caddeyn karaa in shuraakooyin iyo unugyo amaano ah loogu aqoonsan karo "shirkad" iyada oo la raacayo ujeedooyinka Sharcigan.

4) Shakhsiyaadka ku lugta leh hay'ad, qaar wuxuu sharcigani u aqoonsanayaa xubno, qaarka kalena maareeyayaal (inkasta oo hal shakhsi uu isku noqon karo labadaba). Qeexitaannada soo socda ayaa caddeynaya:

b) "xubin" hay'ad waxa loola jeedaa qofka heysta xubinnimo lahaansho (membership interest) ee hay’ad ganacsi gaar ahaanna:

i) "wadaage ganacsi (partner)" waa xubin ka mid ah shuraako ganacsi;

ii) "ka-faa'iidayste" waa xubin ka mid ah amaano; iyo

iii) "saamile" waa xubin ka mid ah shirkad waxaana erey bixintani la raacayaa iyadoo aan loo eegin in xubinimada qofka ay abuureyso lahaansho saami marka la raacayo xeerka madaniga ah;

t) "maareeye / maamule" hay'ad waxaa loola jeedaa shakhsiga mas'uulka ka ah hay'adda ama shakhsiga ka qaybqaata ama ka qaybqaadan kara (ha ahaado kaligii ama isagoo la wadaaga shakhsiyaad kale) qaadashada go'aamada masiiriga ah ee maamul isaga oo matalaya hay'adda, waxaana ka mid ah-

i) agaasime, maareeye sare ama sarkaal fulineed;

ii) wadaage qeyb ka ah shuraako ganacsi iyo amaano-haye amaano;

iii) milkiilaha xarun ganacsi Soomaaliyeed (eeg qodobka 81aad) ; iyo

iv) shakhsi ay tilmaamihiisa iyo amaradiisa qaataan hay’adda ama shakhsiyaadka lagu sheegay qeexitaanka;

j) "amaano-haye" waxaa loola jeedaa shakhsi ama hay'ad leh shakhsiyad qaanuuni madax banaan oo ku qeexan xeerka madaniga, kaasoo hanti amaano ama waqaf ah ugu haya (si keli ah ama si wadajir ula haya shakhsiyaad ama hay'ado kale) ka-faa’ideystayaal cayiman ama ujeedo qaanuuni ah, waxaana ka mid ah:

i) shakhsi la magacaabay ama amaano-haye ku yimaadda fal shakhsiyadeed, dardaaran, amar ama go’aan maxkamadeed, ama fulin sharciyeed (operation of law);

ii) fuliye, maamule, dhaxle/dhaxaltooyo hanti uu qofkeeda dhintay, matale ama daryeele;

iii) ka xaraashe (liquidator), soo ururiye, amaano-haye musalaf (trustee in bankruptcy) ama mas’uul garsoor;

iv) shakhsiga maamula ama ilaaliya hanti lagu intifaacayo, daryeele dhaxal ee qof aan haysan karin (fideicommissum), ama dano kale oo xadidan;

v) shakhsiga maamula hantida dadka aan awoodda lahayn (incapacitated), oo ay ku jiraan caruurta (minor); iyo

vi) shakhsi maamula hanti ay leedahay hay'ad dalka deegaan ku aheyn ama wax la mid ah.

Qodobka 4-aad
Dad Is leh (Associated Persons)

1) Laba qof waa dad is leh marka xiriirka ka dhexeeya labada qof uu yahay:

b) mid shakhsi iyo mid xigtonimo;

t) mid shuraako ah marka ay ku jiraan shuraako ganacsi;

j) mid ka dhaxeeya hay'ad iyo qof (oo ay ku jirto hay'ad kale) ee lagu qeexay faqradda (2aad); ama

x) xiriir kasta oon aheyn shaqaale iyo looshaqeeye kaasi oo keenayo in qofi u dhaqmo si uu ugu daneynaayo, uuna raaco awaamirta ama rabitaanka -

i) qofka kale; ama

ii) iyadoo la raacayo qodobkan, marka uu qofku u dhow yahay qofka kale.

2) Qof iyo hay'ad waa kuwo is leh marka:

b) qofku maamulo / koontaroolo hey'adda ama uu helo dheefta boqolkiiba 50 ama in ka badan ee xuquuqda dakhli, ra'sumaal ama awoodda codbixineed ee hey'adda, ha ahaado isaga oo

i) keligiisa uu koontaroolo ama si wadajir ah ula koontaroolaan shakhsiyaad, iyadoo la raacayo qodobkani, ay isleeyihiin; iyo

ii) isagoo si toos ah u koontaroola ama si aheyn toos oo ay u dhexeeyaan shirkado dhextaal ah; ama

t) sidoo kale, iyada oo la fulinayo qodobkan, qof iyo hay'ad isleh qofkii u dhow waa qof lagu fulinaayo faqrad-hoosaadka (b).

3) Laba qof ma noqon karaan dad is leh sida ku cad faqradda 1-aad haddii ay Wasaaraddu ku qancdo in midkoodna isaga oo u daneynaaya midka kale uusan raacayn awaamirta ama rabitaanka kan kale.

4) Laba shakhsi waa "xigto" haddii:

b) midkood uu kan kale u yahay xaas, ama say, waalid, awoowe ama ayeeyo, walaal, eedo ama habar-yar, abti ama adeer, ama ina adeer, ina abti, ina eedo, ina habar-yar darajada kowaad, kuna imaan kara dhalasho, guur, ama nuujin, ama laba xaas oo la isla qabo; ama

t) marka uu qof kan kale ka gacansiiyo baahiyaha nolosha ee daruuriga ah.

Qodobka 5-aad
Hawlaha Dakhliga Laga Helo

1) Howlaha kasabka waa hawlo abuuraya helidda dakhli canshuur-gal ku ah sharcigan. Hawlahaas kasab waxaa loo kala saaray sidan:

b) "shaqo", taasoo macnaha kasoo qaadaneysa xeerka madaniga ayna ku jiraan-

i) jagada maamule ee uu qofku ka hayo hay'ad, marka laga reebo wadaage qayb ka ah shuraako ganacsi;

ii) ku meeleysane xarun shaqo;

iii) jagooyin kale oo lagu qeexay xeer-nidaamiyeyaal, ee khuseeya bixinta adeeg uu qofku, inkasta oo aysan ku xirnayn heshiis shaqo oo rasmi ah, hoosyimaado koontaroolka qof kale iyadoo habraacu uu yahay in qofka hore uu u fulinayo waajibaadka uu u igmadey qofka kale; iyo

iv) shaqo hore, mid hada ama mustaqbalka ah;

t) "ganacsi", waxa loola jeedaa hawlaha warshad (industrial) ama ganacsi oo:

i) ay ka mid yihin:

B) meherad ganacsi, xirfad, wax is-dhaafsi (trade), farsamo (vocation) ama qaabdhismeed gaar ah oo leh sifo ganacsi;

T) bixinta adeeg looga danleeyahey faa'iida raadin, ha ahaato si goos goos ah ama si joogto ah; iyo

J) ganacsi hore, mid hada socda ama mid mustaqbalka ah; laakiin

ii) aan ahayn shaqo; iyo

c) "maalgashi", oo macneheedu yahay lahaanshaha hal ama in ka badan oo ah hanti kala jaadjaada ah oo halmeel laga maamulaayo si loo kobciyo-

i) waxaa ka mid ah maalgashi hore, mid hada socda ama mid mustaqbalka; laakiin

ii) waxaa ka baxsan ganacsi ama shaqo.

2) Qof (individual) oo kaliya ayaa qaban kara shaqo. Shakhsigu waxa uu qaban karaa shaqooyin badan si is xigxigta ama hal mar ah.

3) Marka laga reebo meesha uu sharcigani waajibinayo kala saarid, dhammaan hawlaha ganacsi ee shakhsi uu leeyahay waxa ay u xisaaban yihiin hal ganacsi. Waxaa intaasi dheer, dhammaan hawlaha shuraako ama shirkad (balse aan ahayn qof ama amaano) waxaa loola dhaqmayaa siddii hawlo ganacsi. Tani waxa uu macnaheedu yahay in dhammaan dakhliga shuraako ama shirkad uu u xisaaban yahay dakhli ka yimid ganacsi.

4) Marka laga reebo meesha uu sharcigani waajibinayo kala saarid, dhammaan maalgashiga qof ama amaano waxaa loola dhaqmayaa sidii hal maalgashi.

Qodobka 6-aad
Hanti, Lahaansho iyo Lacagta Lagu Bixiyo Isticmaalka Hantida

1) "Hanti" waxaa ka mid ah hanti la taaban karo ama mid aan la taaban karin, lacag, sumcadwanaag (goodwill), aqoon xirfadeed gaar ah (know-how), xuquuq lahaansho (royalty), xaq kuu sugan inaad dakhli kahesho hadda ama mustaqbalka ah, kaalmo kuu soconeysa in ka badan 12 bilood iyo sidoo kale hanti qeyb ka mid ah.

2) Hanti waxaa qof loogu asteyn karaa in uu hantida haysto ama mudo-dheer kireystay (lease):

- b) "lahaansho" :
  - i) Waxa loola jeedaa xaqqa in aad si gaar ah oo joogta ah u milkido aadna u isticmaasho hantida inta ay waxtar leedahay; sidoo kale
  - ii) waxa ayna noqon kartaa xuquuq qof kale marka ay hantidu mudo-dheer kireysan (lease): tahay; sidoo kale
- t) "kiro mudo-dheer (lease)":
  - i) Waxaa loola jeedaa hanaan qof siinaya xaq ku meel gaar ee isticmaalka hanti uu qof kale leeyahay;
  - ii) waxaana ka mid ah fududayn (easement), shati (license), heshiis ka-faa'ideysi kheyraad dhuleed (profit-a-prendre), obshan (option), heshiis kiro (rent), heshiis isticmaal xuquuq lahaansho (royalty), heshiis ijaar (tenancy) iyo heshiis loo galay in lagu xoojiyo hanaanka lagu qeexay faqrad-hoosaadka (i) .

3) Hantida uu isticmaalo qof ku jira ganacsi waxa loo kala saaraa sidan:

- b) "badeeco ganacsi", waxaa loola jeedaa:
  - i) hantida uu leeyahay qof ee la iibinayo ama loogu talagalay in lo iibiyo ujeedada caadiga ah ee ganacsiga, howlaha socda ee la xiriira hantidaas, iyo sidoo kale keydka alaab (inventory of materials) ee la socota hantidaas; iyo

ii) hantida kale oo ganacsigu leeyahay sida kuwa loo isticmaalo socodsiinta lawl-maalmeedka;

t) "hantida qiimo dhacda"-

i) waxaa loola jeedaa hanti uu shakhsi u isticmaalayo inuu uu dakhli uga soo saaro ganacsigiisa taasoo uu qiimaheeda hoos u dhacayo sababo la xiriirta isticmaal iyo rifan (wear and tear), aad-u-isticmaalid (exploitation), dhamaad ama dhaqan-ka-bax ; laakiin

ii) kuma jirto sumcadwanaag (goodwill), lahaansho dhul, lahaansho hay'ad ganacsi, badeeco ganacsi iyo hanti kasta oo kale ee uu xeer-nidaamiye qeexo; iyo

j) "hanti ra'sumaal":

i) waxaa loola jeedaa hanti uu shakhsi leeyahay una isticmaalo ujeedo ganacsi; laakiin

ii) kuma jirto badeeco ganacsi iyo hanti qiimo dhacda.

4) "Hantida maalgashi" waxaa loola jeedaa hantida uu shakhsi u leeyahay si maalgashi ahaaneed. Korodhka hantida maalgashi waxa la canshuuri karaa oo keliya marka laga kaaftoomo, aheydna hanti-maalgashi canshuur-galka ah. "Hantida maalgashi ee canshuur-galka ah ":

b) waa xubinnimo saami ama dan (security) qof ugu jirta shirkad, xubinnimo saami ee amaano Dalka degaan ku aheyn, lahaansho hanti ma-guurto ah iyo hanti kasta oo kale ee uu xeer-nidaamiye qeexo, laakiin:

t) xeer-nidaamiye waxa uu qeexi doonaa xaalado ku saabsan hoyga gaarka ah ee shakhsi in uusan aheyn hanti maalgashi oo canshuur-galka ah, ama wuxuu u dejin tixgelin gaar ah oo la xiriira korodhka iyo khasaaraha ka dhasha ka kaaftoomidda hanti hadda ama horeyba u aheyd hoyga gaarka ah ee shakhsi..

5) Lacagaha lagu bixiyo isticmaalka hantida ee heshiis kiro muda-dheer (lease) waxaa loo kala saaray sidan:

b) "lacagta kheyraadka dabiiciga ah":

i) Waxaa loola jeedaa lacagta loo bixiyay in kheyraad dabiici ah lagala baxo dhulka ama badda iyada oo loo xisaabinaayo guud ahaan ama qeyb qeyb laguna salaynayo xisaabta tirada ama qiimaha khayraadka dabiiciga ah ee lagala soo baxay dhulka ama badda; sidoo kale

ii) waxa la socda lacagaha horumariska ah (premium), ganaax ama lacagaha kale ee la midka ah marka loo eego waxyaabaha lagu sheegay faqrad-hoosaadka (i); laakiin

iii) kuma jirto khidmadda xuquuqda lahaanshaha (royalty) ee uu sharci soo rogay lana siinayo Dawladda Soomaaliya;

t) "Khidmadda xuquuqda lahaanshaha (Royalty payment)":

i) waxa loola jeedaa lacagta laga bixiyo isticmaalka ama xaqa isticmaal ee hanti aan la taaban karin (sida sumcadwanaaga);

ii) waxaa ka mid ah:

B) isticmaalka ama xaqa isticmaal ee xuquuqda daabacaadda ee suugaan, farshaxan ama saynis, oo ay ku jiraan filimada, softweer ama cajalado muuqaal ama maqal ah, haddii ay ujiraan taal qaab danabeysan (electronic) ama hadii kaleba;

T) isticmaalka ama xaqa isticmaal ee curin, hal-abuur, calaamad ganacsi, naqshad ama moodel, qorshe, qaacido qarsoodi ah ama habraac, ama hanti kale oo la mid ah ama xuquuq;

J) helitaanka ama xaqa lagu heli karo muuq sawireed (visual image) ama cod ama labadaba, oo lagu gudbiyey qalabka satellite ah, waayarada (cable), faybar obtik ama tignoolajiyad la mid ah ee baahinta oo ay ku jiraan telefishan, raadiyo ama interneet;

X) isticmaalka ama xaqa isticmaal ee macluumaad khibrad warshadeed, ganacsi, ama saynis;

KH) gabi ahaan ama qayb ahaan ogolaansho ka dhasha arimaha lagu soo sheegay faqrad-hoosaadka (i) ama (B), (T), (J), ama (X) ee faqrad-hoosaadkan; ama

D) lacagaha horumariska ah (premium), ganaax ama lacag kale oo la mid ah waxyaabaha lagu soo sheegay faqrad-hoosaadka (i) ama xarfaha (B), (T), (J), (X) ama (KH) ee faqrad-hoosaadkanan; laakiin

iii) kuma jirto lacagta kheyraadka dabiiciga ah;

j) "kiro (rent)":

i) waxa loola jeedo lacagta lagu bixiyo

B) isticmaalka ama xaqa isticmaal ee nooc kasta oo hanti ah; iyo

T) gabi ahaan ama qayb ahaan wixii ka dhasha arimaha lagu soo sheegay faqrad-hoosadka (B);

ii) waxaa ku jira lacagaha horumariska ah (premium), ganaax ama lacag kale oo la mid ah waxyaabaha lagu soo sheegay faqrad-hoosaadka (i); laakiin

iii) kuma jirto lacagta kheyraadka dabiiciga, faa’idada deynta ama lacagta xuquuqda lahaanshaha (royalty).

Qodob 7-aad
Xubinnimo, Aaladaha Maaliyadeed iyo Faa’idada ka Timaada

1) Aaladaha Maaliyadeed (financial instruments) waxaa loo kala saaraa sida:

b) "xubinimo (membership interest)" ee hayad, oo:

i) loola jeedo xaqa uu sharciga madaniga ah u aqoonsan yahay xubinnimada wadaagaha ee shuraakada, xubinnimada ka-faaiidaystaha ee amaano ama xubinnimo shirkadeed (oo ay ku jirto ku yeelasho saami);

ii) ay ka mid tahay xuquuq kasta oo kale oo ay kaga qayb helayaan dakhliga ama ra’sumaalka hay’adda, waxaase aan ku jirin wixii xuquuq ah ee ay reebaan xeer-nidaamiyayaal;

t) "Qaan sheegasho (debt claim)" iyo "qaan waajibtey (debt obligation)", oo la macne ah in shakhsi kale laga helo ama loo gudo dayn, taas oo lagu qiimeeyay lacag (oo ay ku jirto lacag qalaad) waxaana ku jira xisaabaadka lagu leeyahay (accounts payable) iyo waajibaadka ka dhalanaya dhigaal (deposits), dukumintiyada dayn-sidaha ah (debenture), amaah, saami, biilasha khasnadda (treasury bills), qoraalada ballan-qaadka, biilasha sarrifka iyo curaarta (bills of exchange and bonds), laakiin aysan ku jirin xubinnimada;

j) "Aaladaha Maaliyadeed ee Darajada Labaad (Derivative Instrument) ", oo yeelanaya macnaha uu xeernidaamiye qeexo, haddiise uu xeernidaamiye jirin macnahiisa waxaa laga soo qaadanayaa mabaadi'da xisaabaadka ee si guud la isla ogolyahay (GAAP); iyo

x) "Aaladda lacagta qalaad", oo yeelanaya macnaha uu xeer-nidaamiye qeexo, hadiise uu xeernidaamiye jirin macnahiisa waxaa laga soo qaadanayaa mabaadi'da xisaabaadka ee si guud la isla ogolyahay (GAAP);

2) Faa’iidada aaladaha maaliyadeed waxaa ka mid ah:

b) "faa’ido saami", oo:

i) loola jeedo lacagta uu saamile ka helo shirkadda-

B) ha lagu helo qaybsi faa’ido ahaan, kala dirid ama dib-u-dhis, dhimista ra’asamaalka ama dib-u-iibsasho saami, ama si kale;

T) iyadoona lagu soo koobeyn kaliya in loo helay saami shirkadeed ahaan;

ii) waxaa ka mid ah ra’sumaaleynta faa'iidada:

B) haddi ay noqoto bixin saami dheeraad ah, kordhinta qadarta lagu iibsaday saamiga ama si kale;

T) iyada oo aan loo eegin in faa’idada badh la qaybiyay iyo in kale;

iii) waxaa ka baxsan lacagta:

B) u dhiganta lacag uu milkiiluhu siisay shirkadda (oo aan ahayn habka wareejinta xubinnimada lahaansho ee shirkadda);

T) laga dhimay xisaabta ra’sumaalka, lacagaha horumariska ah (premium) saamiga ama xisaab la mid ah oo u dhiganta marka la barbar dhigo dhammaan xubinnimada lahaansho ee shirkadda; ama

J) ah canshuur la reebay oo kama dambeys ah ama lacag lagu daray xisaabinta dakhliga xubinta (hadii dakhligu ka imaanayo shaqo, ganacsi ama maalgashi) oo ay ku jiraan faa’idada deynta ama faa'iidada aaladaha maaliyadeed (aan ahayn xubinnimada lahaansho ee shirkadda);

t) "faa’idada deynta", kaas oo:

i) loola jeedo lacagta loo bixiyay faa’ido deyn ahaan;

ii) waxaa ku jira:

B) faa’idada deynta ee loo bixiyay si waafaqsan Shareecada;
T) lacag bixinta ku aaddan qiimadhimis ama lacagaha horumariska ah (premium);
J) lacag lagu bixiyay dammaanad (guaranree); iyo
X) qadar kasta ee lacageed sharcigani, mabaadi'da xisaabaadka ee si guud la isla ogolyahay (GAAP) ama xeernidaamiye u aqoonsadaan faa’ido deyn; balse

iii) waxaan ku jirin faa’idada ra’sumaalka ee uu tilmaamo xeernidaamiye, haddii uusan xeernidaamiye jirin, lagu go’aaminayo sida ay dhigayaan mabaadi'da xisaabaadka ee si guud la isla ogolyahay (GAAP);

J) "Faa’idada deynta ee caadiga ah" waxa ay leedahay macnaha uu tilmaamo xeer nidaamiye, haddiise uu xeer nidaamiye jirin waa faa’idada deynta ee laga xisaabiyay boqolleyda deynta taagan.

Qodob 8-aad
Kharashaadka Sida Gaarka Ah Loo Galay Iyo Kharashaadka La Saaray[3]

1) Marka shakhsi uu galo kharash, kharashku waa "kharash gaar ah" marka loo galay:

  b) arimo shakhsi ah, oo ay ku jiraan diyaarinta ama fududaynta hoy, cunto, hawo-gedis (refreshment), madadaalo ama nasasho (leisure);

  t) gaadiid ahaan ama inuu shakhsiga ukala soconayo inta u dhexeysa gurigiisa iyo goobta shaqada ee caadiga ah;

  j) soo gadashada dhar shakhsiyeed, laakiin kuma jiro dharka aanlagu xiran Karin meel ka baxsan shaqada ama ganacsiga; ama

  x) waxbarashada shakhsiyeed, laakiin kuma jirto waxbarashada sida tooska ah u khuseysa ganacsiga uu shakhsigu ka shaqeeyo islamarkaasina aan horseedeyn shahaado heer (degree) ama dibloomo.

2) Marka uu qof galo kharash uu siinayo shakhsi kale ama u bixinayo dheefta shakhsi kale, kharashku waa "kharash gaar ah" marka laga reebo in:

  b) lacagta ama dheefta la bixiyay lagu daray xisaabinta dakhliga shakhsiga ka soo galay shaqada, ganacsiga ama maalgashiga;

  t) shakhsiga kale uu bixinayo bedel u dhigma qiimaha suuqa ee lacagta ama dheefta;

  j) qadarta kharash ee la galay ay aad uga yar tahay wax sabab ahaan ama maamul ahaan la xisaab gelin karo.

3) Kharashaadka lagu sheegay faqradaha (1) iyo (2) waxaa ka mid ah faa'idada deynta ee lacagta la amaahday loona isticmaalay sida ku cad isla faqradahahaas.

4) "looma aqoonsana Kharash ganacsi " kuwa soo socdaa;

  b) canshuurta lagu bixiyay si waafaqsan sharcigan ama Sharciga Maamulka Dakhliga (Sharci No. 13 ee 27 Oktoobar 2019);

  t) laaluushka iyo kharashaadka loo galay dhaqamo musuqmaasuqa ama fal dambiyeed;

---

[3] Private and Excluded Expenses.

j) faa'idada deynta, ciqaabaha iyo ganaaxyada (fines & penalties) la siiyo dawlad ama maamul-hoosaad dowladeed ee waddan loona bixiyay jebinta sharci ama sharuuc hoosaad;

x) kharashaadka uu shakhsigu u galay helidda qadar la canshuur-dhaafayo (exempted amount) ama canshuurta laga-reebay;

kh) faa'idada deynta ee lacag la amaahday ee loona isticmaalay in lagu helo hanti soo saarta qadar la canshuur-dhaafayo ama canshuurta laga-reebay;

d) qaaraanka hawlgabka, haddii aan lagu darin xisaabinta dakhliga shaqaalaha sida ku cad qodobka 13(3)(kh);

r) faa'idada saamiga shirkad iyo faa'idada ra'sumaal ee xubinnimo lahaansho hay'ad;

s) qaddarta la dhigay sanduuq keyd (reserve fund), bixinta / diyaarinta kharash ama khasaare la filayo ama qaddar la ra'sumaaleeyay;

sh) lacag bixin caddaan ah ee ka badan xadka lagu qeexay xeernidaamiye.

CUTUBKA II
WAAJIBINTA CANSHUURTA DAKHLIGA[4]

Qodobka 9-aad
Waajibinta Canshuurta dakhliga

1) Canshuurta dakhliga waxa ay sanad canshuureed kasta ku waajibtaa:

b) qof hela dakhli canshuurgal ah sanadkii;

t) qofka hela dakhli canshuurta laga reebo si kama dembeys ah sanadka gudihiisa; iyo

j) shakhsi Dalka degaan ku aheyn oo Soomaaliya ku leh xarun ganacsi oo dakhli dibadda uga yimaado.

2) Qaddarta canshuurta dakhliga ee uu shakhsigu bixinayo sanad canshuureed waa wadarta qaddarta lagu sheegay faqradda (1) (b), (t) iyo (j).

3) Iyadoo la raacayo faqradda (4), canshuurta dakhliga ee uu bixinayo shakhsi sida ku cad faqradda (1) xarafka (b) waxa loo xisaabinayaa:

---

[4] IMPOSITION OF INCOME TAX.

b) in boqolleyda canshuurta dakhliga ee ku haboon ee ku xusan Jadwalka Koowaad lagu dhufto dakhliga canshuurgalka ah ee shakhsiga, sidoo kalena

t) laga jaro tixgelinta canshuureed (u tixgelin canshuur) ee jaritaankeeda loo ogolyahay shakhsiga sanadkaas sida ku cad Qodobka 86-aad (canshuurta qofka dalka deegaan ku aheyn).

4) Canshuurta dakhliga ee uu shakhsi ka bixinayo dakhlikiisa canshuur-galka ah ee uu ka helay ganacsi waxaa lagu dhaqi xeerarka canshuuraha la fududeeyay ee ku xusan Jadwalka Labaad.

5) Canshuurta dakhliga ee uu shakhsi u bixinayo sida ku cad faqradda (1) (t) waxaa la xisaabinayaa iyada oo la adeegsanayo boqolleyda ku waajibtay ee ku xusan faqradda 5aad ee Jadwalka Koowaad ee canshuur ka-reebid kasta oo kama dambays ah. Wadarta la bixinayo sida ku cad faqradda (1) (t) ee sanadka waa wadarta guud ee qadartaas.

6) Canshuurta dakhliga ee uu shakhsi u bixinayo sida ku cad faqradda (1) (j) waxaa lagu xisaabinayaa iyada oo la adeegsanayo boqolleyda ku waajibtay ee ku xusan faqradda 4aad ee Jadwalka Koowaad ee xarun ganacsi gudo kasta oo dakhli uga yimaado dibadda. Wadarta lacagta lagu bixinayo sida ku cad faqradda (1) (j) ee sanadka waa wadarta qaddartaas.

CUTUBKA III
SALKA CANSHUURTA DAKHLIGA[5]

QAYBTA I
DAKHLIGA CANSHUURGALKA AH[6]

Qodobka 10-aad
Dakhliga Canshuurgalka ah

1) Iyadoo la raacayo faqradda (2), dakhliga canshuurgalka ah ee sanad canshuureedka shakhsi waa wadarta guud ee dakhliga loo qiimeeyey canshuurgal ee shakhsigu sanadkii ka helo shaqo, ganacsi iyo maalgashi.

2) Marka la xisaabinayo dakhli canshuurgal ah, waxaa laga jarayaa lacagaha la goynayo (deductions) sida ku cad Qodobka 70-aad (qaaraanka hawlgabka) ee sanadka loo ogol yahay shakhsiga. Dhimistu waa in aysan ka badnaan wadarta qaddarta lagu sheegay faqradda (1).

3) Dakhliga canshuurgalka ah ee shakhsi kastaa waxaa loo xisaabinayaa si gooni ah.

QAYBTA II

[5] Income Tax Base.

[6] Chargeable Income.

DAKHLIGA QIIMAYNGALKA AH EE KASABKA[7]

Qodobka 11-aad
Dakhliga Qiimayngalka ah

Dakhliga loo qiimeeyn karo canshuurgal ee uu shakhsigu sanad canshuureed ka helo shaqo, ganacsi ama maalgashiga waa:

b) haddii uu Dalka degaan ku yahay, wadarta dakhliga guud ee qofka sanadkii ka helo shaqada, ganacsiga ama maalgashiga;

t) hadii uu Dalka degaan ku ahayna , wadarta guud ee-

i) dakhliga uu qofku sanadka ka helo xarun ganacsi gudaha uu ku leeyahay (eeg Qodobka 83-aad); iyo

ii) haddii uu yahay dakhli aan lagu sheegin faqradda (i), waa dakhliga shakhsiga uu ka helo shaqada, ganacsiga, ama maalgashiga sanadka dhexdiisa, ee uu ka sameeyay gudaha Soomaaliya.

Qodobka 12-aad
Dakhliga Shaqada[8]

1) Dakhliga shaqo ee uu shakhsigu sanad canshuureed helo waa wadarta guud ee dakhliga shakhsigu shaqo kasta ka helo sanadkaas.

2) Marka la xisaabinayo dakhliga qofka ka soo gala shaqada sanad canshuureedka:

b) waxaa lagu darayaa qadarta lagu xusay faqradda (3) haddi uu shakhsiga ka helo shaqada sanadka dhexdiisa; laakiin

t) waxaa laga saarayaa qadarta lagu xusay faqradda (4).

3) Qadarta lagu darayo (amounts included) waa:

b) mushahar (salary), maalinle (wage), gunno (allowance), xuquuqda shaqo ka tagista (gratuity) abaalmarin shaqo (bonus) gudka, mushaharka fasaxa (leave pay), lacageynta fasaxa, gunnada wakhtiga dheeraadka ah (overtime pay), liiltirka (pension) iyo lacag bixinnada la midka ah iyada oo aan loo eegin magaca loo bixiyay;

t) lacagta lagu bixiyo heshiiska uu shakhsigu:

i) ku galayo shaqada;

---

[7] Assessable Income From Earning Activities.

[8] Income from Employment.

ii) ugu hoggaansamo shuruudaha shaqada ama wax ka bedel kasta oo lagu sameeyo shuruudahaas; ama

iii) ku galayo ballan lagu xadidaayo habdhaqankiisa (restrictive covenant) oo khuseeya shaqada;

j) lacag bixinta ama dib-ugu-celinta kharashaad uu galay shakhsiga ama qof u dhow;

x) magdhawga shaqa ka joojinta, hadii lagu bixiyo si mutadawacnimo ah (voluntarily) ama si heshiis lagu yahey, taas oo ay ku jirto lacagta lagu bixiyo marka shaqaalaha la dhimaayo ama waayidda shaqo;

kh) lacagta qaaraanka hawlgabka ee lagu shubay sanduuqa hawlgabka iyada oo wakiil laga yahay shakhsiga ama laga shubeyqof u dhow shakhsiga iyo lacagaha hawlgabka laga helay shaqada.

d) lacagaha kale, oo ay ku jiraan hadiyadaha lagu helay arimo la xiriirta shaqada; iyo

r) lacag kasta oo kale oo in lagu daro lagu farayo qeybaha kale ee sharcigan si gaar ahaanna Cutubka IV.

4) Waxaan loo xisaabineyn dakhli shaqado kuwa soo socda:

b) qadarta la canshuur dhaafay iyo canshuurta la reebay ee kama dambaysta ah;.

t) bixinta ama dib-u-celinta kharashaadka uu galay shakhsiga isaga oo ka wakiil ah loo-shaqeeyaha una adeegaya ujeedooyinka haboon ee ganacsiga;

j) hadii uu qeexo xeernidaamiye, kharashaadka hoy muhiim u ah shaqaalaha si ay u gutaan waajibaadkooda shaqo ; iyo

x) lacagaha la siiyo shaqaalaha si aan kala sooc lahayn (non-discriminatory basis) taas oo marka la eego baaxadda, nooca iyo inta jeer ee la bixiyayba, aysan macquul ama maamul ahaanba suurtagal u ahayn in loo-shaqeeyuhu u xisaabo ama ku qoro shakhsiga.

Qodobka 13-aad
Dakhliga Ganacsiga[9]

1) Dakhliga uu shakhsi ka helo ganacsi sanad canshuureed waa wadarta korodhka (gain) iyo faa'iidada (profit) uu qofku ka helay ganacsiyadiisa sanadkaas.

2) Marka la xisaabinayo korodhka iyo faa'iidada uu qofku ka helay ganacsi ee sannad canshuureed:

[9] Income from Business.

b) waxaa lagu darayaa qadarta lagu xusay faqradda (3) haddi shakhsigu sanadka gudihiisa uu ka helay ganacsiga; laakiin

t) waxaa laga saarayaa qaddarta lagu xusay faqradda (4).

3) Qadarta lagu darayo waa:

b) khidmadaha adeegga;

t) dheefta kasoo xarootada iibka badeecada ganacsiga (proceeds from trading stocks);

j) faa'idada ka dhalatey ka kaaftoomidda hantida ra'sumaalka iyo deymaha ganacsiga sida lagu xisaabiyay Cutubka Vaad;

x) qadarta in lagu daro uu qeexay Jadwalka Afaraad, ee khuseeya hantida qiimo-dhacaysa ee ganacsiga uu qofku leeyahay;

kh) qadarta lacag ee lagu helay ogolaanshaha xadidnaanshaha kartida ganacsi;

d) hadiyado ama kaalmo (subsidy) uu qofku ku helo ganacsiga;

r) qadarta lagu sheegay qodobka 14(3) (dakhliga maalgashiga) taas oo lagama maarmaan u ah ganacsiga; iyo

s) qadar lacageedyo inta kor lagu xusey aheyn kuwaas oo eey farayaan qeybaha kale ee sharcigan si gaar ahaanna Cutubyada IV iyo VII iyo Qodobka 56-aad.

4) kuwa aan loo xisaabineyna waxaa kamida:

b) qadarta la canshuur dhaafay iyo canshuur laga reebay ee kama dambaysta ah; iyo

t) qadarta lagu daray xisaabinta dakhliga qofka kasoo gala shaqo.

Qodobka 14-aad
Dakhliga Maalgashiga[10]

1) Dakhliga laga helay maalgashiga sannad canshuureed waa wadarta korodhka iyo faa'iidada uu shakhsigu ka helay sanadkaas maalgashi kasta oo uu sameeyay.

2) Marka la xisaabinayo faa'iidada uu shakhsigu ka helay samaynta maalgashi ee sanad canshuureed:

b) waxaa lagu darayaa qadarta lagu xusay faqradda (3) haddi uu shakhsigu sanadka gudihiisa qadartaasi ka helay maalgashi; laakiin

t) waxaa laga saarayaa qadarta lagu xusay faqradda (4).

[10] Income from Investment.

3) Qaddarta lagu darayo waa:

b) faa’ido saami (dividend), faa’idada deynta, sanadle, khidmadda kheyraadka dabiiciga ah, kirada, lacagaha laga helay hawlgabka, iyo xuquuqda milkiyadda;

t) faa'idada ka kaaftoomidda hanti maalgashi canshuurgal ah, sida lagu xisaabiyay Cutubka V;

j) qadar lacag oo loo helay ogolaanshaha xadidnaanshaha kartida maalgashiga;

x) hadiyado uu qofku ku helo maalgashiga; iyo

kh) qadar lacageed kale ee ay faraan qaybaha kale ee sharcigan, si gaar ahaanna Cutubyada IV iyo VII iyo Qodobbada 59-aad, 61-aad iyo 68-aad.

4) Qaddarta laga saaray waa:

b) qadarta la canshuur dhaafay iyo canshuur laga reebay ee kama dambaysta ah; iyo

t) qadarta lagu daro marka la xisaabinayo dakhliga qofka kasoo gala shaqo ama ganacsi.

QAYBTA III
DAKHLIGA LA CANSHUUR DHAAFAY[11]

Qodobka 15-aad
Dakhliga La Canshuur Dhaafay

1. Qadarta la canshuur dhaafay macnaheedu waa:

a) qadarta ku taxan Jadwalka Saddexaad; iyo

b) qadarta la canshuur dhaafay sida ay dhigayaan qodobada kale ee sharcigan gaar ahaan Qodobada 56aad (Wadaagayaasha), 59aad (Ka-faa'ideystayaasha), 61aad (Saamileyda), 68aad (dheefta caymiska), 71aad (Sanduuqyada Hawlgabka), 72aad (Lacagaha Hawlgabka) iyo 86aad (Dakhliga Dibadda).

QAYBTA IV
LACAGAHA LA GOYNAYO[12]

Qodobka 16-aad
Mabaadi'da Guud iyo Xadka Goynta

1. Xeerarka soo socota ayaa loo raacayaa lacagaha laga goynayo dakhliga shakhsi:

[11] Exempt Amounts.

[12] Deductions.

b) wax lacag ah lagama goyn karo-

i) marka la xisaabinayo dakhliga shaqada;

ii) iyadoo la raacayo Qodobka 72(2), qaddarta lagu bixiyo lacagaha hawlgabka; ama

iii) kharashaadka gaarka ah ama kharashaadka la saaray ee uu galay shakhsiga (eeg Qodobka 8-aad);

t) marka faqrada (b) aysan diidin goynta:

i) lacag-goyn waxaa la ogolyahay oo kaliya inta uu sharcigani si cad u fasaxay ; iyo

ii) wadarta lacagaha laga goynayo xisaabinta dakhliga ganacsi ee sanad canshuureed waa inaysan ka badan 95 boqolkiiba qadarta lagu daray xisaabinta dakhligaas; iyo

j) marka uu jiro qodob ama qodobo si baaxad kala duwan u ogolaanaya lacag-goynta:

i) waxaa la dabaqayaa midka baaxadiisu koobantahay xitaa haddii ay keenayso diidmo lacag-goynt ama yareyn lacagta la goynayo; sidoo kale

ii) lacag lama goyn karo wax ka badan hal mar.

Qodobka 17-aad
Xeerka Lacag-goynta ee Ganacsiga[13]

1) Marka la xisaabinayo dakhliga shakhsi sanad canshuureed ka soo galay ganacsi, waxa laga goyn karaa kharashaadka uu shakhsigu sanadkaas gudihiisa u galay dakhli ka soo saaridda ganacsiga.

2) wax lacag goyn ah looma ogola kharashaadka leh sifo ra’sumaal (expenses of capital nature) sida ku cad faqradda (1). "Kharash ra’sumaal" waxaa ku jira kharash loo galay in lagu dhaliyo faa'ido midho-dhal ahaaneysa in ka badan laba iyo toban bilood.

Qodobka 18-aad
Faa’idada Daynta ee Ganacsiga[14]

1) Marka la xisaabinayo dakhliga ganacsi ee shakhsi sanad canshuureed, waxa laga goynayaa faa’idada deynta ee uu shakhsigu galay sanadkaas gudihiisa gaar ahaan:

---

[13] Residual Deduction Rule for Business.

[14] Returns on Debt Claims of a Business.

b) haddii faa'idada deynta laga bixinayo lacag la amaahday, lacagtana:

i) loo isticmaalay sanadka gudihiisa si dakhli looga soo saaro ganacsiga; ama

ii) loo bixiyay in lagu helo hanti sanadka gudihiisa loo isticmaalay dakhli ka soo saardda ganacsiga; ama

t) xaalad kasta oo kale, oodeyn loo galay si loosoo saaro dakhli.

2) Qadarta faa'idada deynta ee la ogol-yahey sanad canshuureedka iyadoo la raacayo faqradda (1) waxa ay ku kooban tahay wadarta qadarta soo socota:

b) faa'idada deynta ee uu shakhsigu helay taasoo ay tahay in lagu daro xisaabinta dakhliga ganacsi ee shakhsiga ee sanadka; oo lagu daray

t) labaatam iyo shan (25) boqolkiiba dakhliga shakhsiga sanadkii ka soo gala ganacsiga oo loo xisaabiyay iyadoo aan:

i) lagu darin faa'idada deynta ee uu shakhsigu helay ama qaddarta lagu sheegay qodobka 13 (3) (j) ama (x); ama

ii) laga goyn faa'idada deynta ee uu shakhsigu galay ama qadarta lagu sheegay Qodobbada 20-aad, 21-aad ama 23-aad.

3) Xaaladaha faa'idada deynta ee loo ogoleyn lacag goynta sida ay dhigayso faqradda (2) ee sare ku xusan:

b) waxaa loo rarayaa loona tixgalinayaa in la galay sanad canshuureedka xiga;

t) waxaa loo goynayaa sida loo kala hor galay;

j) lamana rari karo muddo ka badan toban sano.

4) Xeernidaamiye ayaa wax ku dari kara, dejin kara, bedeli kara ama burin kara xeerarka lagu qeexay faqraddaha (2) iyo (3) ee khuseeya lacag goynta faa'idada deynta ee ay bixiyaan hay'adaha maaliyadeed (financial institutions).

Qodobka 19-aad
Badeeco Ganacsi[15]

1) Marka la xisaabinayo dakhliga shakhsiga sanad canshuureed ka soo gala ganacsi, waxa laga goynayaa qadarta loo ogolaaday (allowance) badeeco ganacsi. Lacagta la ogolaaday goynteeda waxaa loo xisaabinayaa sidani:

b) qiimahabadeecada ganacsigu leedahay billowga sanadkaas (opening value) oo; oo lagu daray;

---

[15] Trading Stock.

t) kharashka uu shakhsigu galay sanadka gudihiisa oo ay ku jiraan kharashkii ku baxey (cost) badeecada ganacsi; oo laga jaray

j) qiimaha badeecada ganacsiga ee hadhey dhamaadka sanadka (closing value).

2) Qiimeynta badeeco ganacsi ee sanad canshuureed billowgiisu (opening value) waa qiimaha lagu xiray (closing value) badeecada sanad canshuureedka hore.

3) Qiimaha lagu xiray badeeco ganacsiga sanadka canshuureed waa hadba kii yar:

b) Qiimahay joogto (cost) badeecada ganacsi ee dhamaadka sanadka; ama

t) qiimaha suuqa ka joogto (market value) badeeco ganacsigu dhamaadka sanadka.

4) Qiimeynta (cost) badeeco ganacsi waxaa loo go'aaminayaa si waafaqsan qodobbada 40-aad iyo 41-aad. Si kastaba ha ahaatee, haddii qiimaha badeeco ganacsi dhammaadka sanadka lagu go'aamiyo si waafaqsan faqradda (3) (t), qiimaha (cost) badeecada ganacsi sidaa ayaa lagu diiwaangelinayaa.

Qodobka 20-aad
Hantida Qiimodhacda[16]

1) Marka la xisaabinayo dakhliga shakhsiga ee sanad canshuureed ka soo gala ganacsi, waxa laga goynayaa dakhligaa qaddarta qiimo dhaca la ogol yahay (depreciable allowance). Haddii la ogolaado wax ka goyn waa in la gooyaa. Qaddarta qiimo dhaca:

b) waxaa loo ogolaanayaa hantida qiimo dhacda ee uu shakhsigu leeyahay una isticmaalay inuu sanadka gudihiisa dakhli uga soo saaro ganacsiga; waxaana

t) loo xisaabinayaa iyadoo la raacayo qodobbada lagu qeexay Jadwalka Afraad.

2) Marka la xisaabinayo dakhliga shakhsiga ee sanad canshuureed ka soo gala ganacsi, waxa laga goynayaa dakhligaa kharashaadka ku baxay dayactirka ama hagaajinta hantida qiimodhacda. Goynta qiimadhaca:

b) waxa ay ku kooban tahay kharashaadka ku baxay hantida qiimadhacda ee uu shakhsigu leeyahay una isticmaalay sanadka gudihiisa inuu dakhli kagasoo saaro ganacsiga;

t) si gaar gaar ah ayaa loo xisaabinayaa hanti kasta oo uu leeyahay ganacsigu oo qiimodhacda taas oo isu nooca ah ; sidoo kale

j) waxaa lagu koobayaa goyntaa boqolkiiba shan qiimaha qoran ee hantida isku nooca ahi joogto dhamaadka sanad canshuureedka (eeg Jadwalka Afraad faqradda 4(3) taasoo la xisaabiyay iyadoo layska indha tirayo qadar kasta oo lagu kordhinayo qiimaha hoos u dhaca hantida isku nooca ah ee sanadka loona

[16] Depreciable Assets.

sababeynayo faqradda (3) ee qodobkan.

3) Goynta lacagaha (deductions) ee lagu qeexay faqradda (2) waxa loo hirgelinayaa sida loo kala hor galay kharashaadka. Kharashaadka aan goynta loo ogolaan ee lagu xadiday faqradda (2)(c) waxa lagu darayaa qiima dhaca hantida ay isku nooca yihiin, (eeg Jadwalka 4-aad, faqradda 3-aad).

Qodobka 21-aad
Hantida Ra'sumaal iyo Qaanta Ganacsiga[17]

1) Marka la xisaabinayo dakhliga shakhsi ee sanad canshuureed ka soo gala ganacsi, waxa laga goynayaa dakhligaas khasaaraha qofka ka soo gaaray ka kaaftoomidda hantida ra'sumaalka ah ama deynta ganacsiga ee sanadkaas. Khasaaraha waxaa loo xisaabinayaa si waafaqsan qodobbada lagu qeexay Cutubka V waxaana la goyn karaa:

b) hadii uu khasaare ku dhaco hanti ra'sumaal, marka uu hantidaas iska lahaa shakhsiga una isticmaalayey dakhli ka soo saaridda ganacsiga;

t) hadii uu khasaare ku dhaco deyn (loss on liability) taas oo ah deynbax loo galay lacag lasoo amaahday, marka lacagta, ama hantidii lagu soo iibiyay loo isticmaalay dakhli ka soo saaridda ganacsiga; iyo

j) hadii uu khasaare ku dhaco nooc kasta oo kale oo deyn ah, marka dayntaasi loo galay dakhli ka soo saaridda ganacsiga.

Qodobka 22-aad
Kala Xiridda Lacagaha Lagoynayo ee Hay'adaha Maaliyadeed[18]

1) Marka la xisaabinayo dakhliga qofka sanad canshuureedka ka soo gala ganacsi xadidaadahan soo socda ayaa la tixraacayaa:

b) goynta kharashaadka lagu galay aaladaha maaliyadeed ama la xiriira hanashada ama ka kaaftoomididda aaladaha maaliyadeed (marka laga reebo ka goynta faa'iidada deynta ee la galay); waxa lagu koobay

t) qadarta lagu daray xisaabinta dakhliga laga helay aaladaha maaliyadeed ama la xiriira hanashada ama ka kaaftoomididda aaladaha maaliyadeed (marka laga saaro lacagaha lagu daray faa'idada daynta ee la helay).

2) Lacag goynta iyo ku-darista waxa loo eegayaa sida ku xusan Qodobka 31-aad.

3) Lacag goynta lagu diiday faqradda (1):

b) waxa loo rarayaa loona tixgalinayaa in la galay sanad canshuureedka xiga;

t) waxaa loo jarayaa sida loo kala hor galay; sidoo kale

---

[17] Capital Assets and Liabilities of a Business.

[18] Quarantine of Deductions in Respect of Financial Instruments.

j) lama rari karo muddo ka badan toban sano.

Qodobka 23-aad
Khasaaraha Ganacsiga[19]

1) Marka la xisaabinayo dakhliga shakhsiga ee sanad canshuureed ka soo gala ganacsi, waxa laga goynayaa:

b) khasaare aan la jarin (unrelieved loss) oo shakhsiga ka soo gaaray ganacsi kasta oo uu sameeyay sannadka gudihiisa; iyo

t) khasaare aan la jarin oo shakhsiga ka soo gaaray ganacsiga ama ganacsi kasta oo kale tobankii sanad canshuureed ee la soo dhaafay.

2) Marka uu shakhsigu leeyahay wax ka badan hal ganacsi, shakhsigu waxa uu dooran karaa xisaabinta dakhliga ganacsiga sida gaarka ah looga jaraayo khasaaraha ama qeyb khasaaraha ee aan la jarin. Si kastaba ha ahaatee, haddii khasaaraha la goynayo (deduction) waa in laga gooyaa dakhliga. Khasaaraha aan la jarin waxaa la goynayaa ka dib goynta dhammaan kharashaadka kale, haddii ay jiraan khasaarooyin badan oo aan la jarin waxaa looga goynayaa sida ay u kala horeeyaan.

3) Iyadoo aan loo eegin faqradaha (1) iyo (2), marka uu qofku khasaaro galo, khasaaro goynta la ogolyahey waxaa lagu qiimeynayaa boqoleydii lagu canshuuri lahaa haddii khasaaruhu faa'iido noqon lahaa. Dakhli aan sidiisaba la canshuurin oo loo asteeyey canshuur dhaaf iyo canshuur si kama dambeys ah loo reebay looma ogolo khasaaro goyn (eeg Qodobbada 8(4)(x) iyo 16(b)(iii)).

4) Qodobkan marka la joogo, "khasaaraha" ganacsi ee qof galo sanad canshuureed xisaabtiisu waa inta ka dheeriga ah:

a) kharashaadka laga goynaayo xisaabinta dakhliga qofka sanad canshuureed ka soo gala ganacsi (iyada oo aan loo eegayn Qodobka 16(t)(ii) iyo Qodobkan); oo la barbar-dhigey;

b) sagaashan iyo shan (95) boqolkiiba dakhliga sanadka; sidoo kale

5) "Khasaaraha aan la jarin (unrelieved loss)" waxaa loola jeedaa qadarta khasaaraha ee aan laga goynin xisaabinta dakhliga qofka sida uu dhigayo qodobkani.

Qodobka 24-aad[20]
Lacagaha Laga Goyn Karo iyo Khasaaraha Maalgashiga

1) Qodobbada 17-aad iyo 23-aad waxay khuseeyaan xisaabinta dakhliga qofka ka soo galamaalgashiga sida iyadoo:

---

[19] Losses from Business.

[20] Deductions for and Losses from Investment.

b) ganacsi loola meel dhigayo maalgashi; iyo

t) in Qodobka 23(4)(t) ee qeexaya khasaaro, "sagaashan iyo shan (95) boqolkiiba" lagu bedelay "boqolkiiba boqol (100%)".

2) Qodobka 18 (1) waxa uu dejinayaa in lacag goyn loo ogolaado faa'idada deynta marka la xisaabinayo dakhliga qofka ka soo gala maalgashiga sida iyada oo ganacsiga loola meel dhigayo maalgashi. Xadidaadaha ay dhigayaan qeybaha kale ee Qodobka 18aad lama dabaqayo. sidoo kale, wax lacag goyn ah looma oggolaanayo kharashaadka lagu bixiyo aaladaha maaliyadeed (oo ay ka mid yihiin noocyo kale ee faa'ida deyn ee la galay) ama marka la eego hanashada ama ka kaaftoomidda aaladaha maaliyadeed.

3) Xeerarka kale ee khuseeya lacag ka goynta ganacsiga midkoodna ma khusayo xisaabinta dakhliga maalgashiga.

4) Marka la xisaabinayo dakhliga qofka ee sanad canshuureed ka soo galamaalgashi, waxa laga goynayaa khasaaraha shakhsiga ka soo gaaray ka kaaftoomidda hantida maalgashi ee canshuurgalka ah sanadka gudihiisa. Khasaaraha waxaa loo xisaabinayaa si waafaqsan Cutubka IV waxaana goynta loo ogolaan karaa ilaa inta hantida la lahaa loona isticmaalay dakhli kasoo saaridda maalgashiga.

CUTUBKA IV
XEERARKA KHUSEEYA QADDARTA LACAGEED EE LAGU XISAABINAYO SALKA CANSHUURTA DAKHLIGA[21]

QAYBTA I
XISAABINTA CANSHUURTA IYO WAKHTIGA[22]

Qodobka 25-aad
Sannad Canshuureed[23]

1) Sannad canshuureed waa xili sanadeed (Janaayo ilaa Disembar).

2) Amaano ama shirkad waxa ay ka codsan karaan Wasaaradda in isbeddel loogu sameeyo sanad canshuureedkooda, taasoo Wasaaraddu iyadoo eegaysa qodobada iyo shuruudaha ay u aragto in ay ku habboon yihiin, u ansixin karta is beddelka.

3) Wasaaraddu waxa ay burin kartaa ansixinta haddii amaanada ama shirkaddu ku guul darreysato in ay u hoggaansamaan shuruudaha ku lifaaqan ansixinta.

4) Isbeddelka ku yimaada sanad canshuureedka amaano ama shirkad waxa uu beddelaa wakhtiga amaanada ama shirkada laga rabo in ay canshuurta ku bixyaan qayb-qayb iyo qiimaynba si waafaqsan Cutubka IX.

[21] Rules for amounts used in calculating the income tax base.

[22] Tax Accounting and Timing.

[23] Year of Assessment.

Qodobka 26-aad
Habka Xisaabinta[24]

1) Ujeedo canshuur dakhliyeed, shakhsigu waa in uu ku xisaabiyaa dakhlikiisa:

b) hab xisaabeedka caddaan ah (cash basis) marka la xisaabinayo dakhliga qofka ka soo gala shaqo ama maalgashi; sidoo kale

t) hab xisaabeedka muteysashada (accrual basis) marka la xisaabinayo dakhliga qofka ka soo gala ganacsiga, wixii aan aheyn haddii nidaamka canshuuraha la fududeeyay lagu dabaqayo (eeg Qodobka 9(4)).

2) Shuraakada, ujeedo canshuur dakhliyeed, waa in lagu xisaabiyaa hab xisaabeedka muteysashada haddii nidaamka canshuuraha la fududeeyay lagu dabaqayo (eeg Qodobka 9(4)).

3) Haddii hab xisaabeedka shakhsi ama shuraako wax iska beddelaan, waa in si lamida wax ka beddel loogu sameeyo canshuurta sannadka iyada oo la tixraacayo isbeddelka si aan khalad xisaabeed uga dhalan isbadalkaa.

4) Amaano, aan ka ahayn ilaaliyaha (haayaha) qof baahiyaha gaarka ah qaba (incapacitated person) (eeg qodobka 58(2), waa in canshuurta dakhligiisa loo xisaabiyaa habka muteysashada (accrual basis), laakiin waxa uu ka codsan karaa Wasaaradda isticmaalka habka caddaanka ah (cash basis). Wasaaraddu, waxa ay ansixin kartaa isticmaalka habka caddaanka ah waxayna soo jeedin kartaa tilmaamaha iyo shuruudaha la haboon. Wasaaraddu waxa ay burin ama la laaban kartaa ansixinteeda haddii amaanadu ku guul darreysato in ay u hoggaansanto shuruudaha ku lifaaqan ogolaanshaha.

5) Shirkaddu waa in ay dakhligeeda ku xisaabisaa habka muteysashada.

Qodobka 27-aad
Hab Xisaabeedka Caddaanka ah [25]

1. Marka hab xisaabeedka cadaanka ah la raacayo, shakhsigu waxa uu:

b) qaddar lacageed helayaa marka ay lacagtu soo gaarto ama loo diyaariyo helitaankeeda (made available); sidoo kalena

t) galayaa kharash ama qaddar lacageed kale marka uu qofku bixiyo.

Qodobka 28-aad
Hab Xisaabeedka Muteysashada[26]

1) Marka la raacayo hab xisaabeedka muteysashada, shakhsigu waxa uu:

[24] Method of Accounting.

[25] Cash Basis Accounting.

[26] Accrual Basis Accounting.

b) qaddar lacageed helayaa marka ay mudantahey in uu helo; sidoo kalena

t) gelayaa kharash marka bixintiisa laga rabo .

2) Qaddarta lacageed helitaankeeda wuu muteystey marka uu qofku xaq u yeesho in uu helo, xataa haddii wakhtiga bixinta dib loo dhigo ama loo bixin karo qayb qayb.

3) Qaddart lacageed waxaa loo aqoonsayaa mid uu shakhsigu bixinayo marka xaaladaha qaanta lagu go'aamiyo oo dhami dhacaan, markaasna qaantu inta ay tahay loo xisaabin karo saxnaan macquul ah laakiin lama aqoonsanayo ka hor fulinta dantii dhaqaale ee laga lahaa lacagta. Fulin danta dhaqaale waxa ay dhacaysaa:

b) marka ay khuseyso adeeg ama hanti, wakhtiga adeega ama hantida la bixiyay;

t) marka ay khuseyso isticmaalka hantida, wakhtiga hantida la isticmaalo ama

j) xaalad kasta oo kale, wakhtiga uu qofku iska wada bixiyo dhamaan qaanta.

4) Haddii ay khaladaad xisaabeed dhacaan xilliga dakhliga lagu xisaabinayo hab muteysi, waa in wax ka beddel habboon la sameeyo wakhtiga lacagta la helo ama la bixiyo si loo saxo khaladka. Khaladaadka habka muteysashada waxaa ka mid ah:

b) inuu shakhsigu xisaabiyo lacag gaar ah oo uu xaq u leeyahay ama ay waajib ku tahay in uu bixiyo;

t) ka dibna xaqa helitaankii ama waajibka bixintisii:

i) aay fulin; ama

ii) shakhsigu helay ama uu bixiyay, hadba sida xaaladu tahay, tiro ka duwan intii la muteystey, oo ay ku jirto sababo la xiriira isbeddelka qiimaha lacagta.

Qodobka 29-aad
Dib U Rogidda Lacagaha oo ay ku Jiraan Daynta Laga Quustay[27]

1) Haddii shakhsi uu kharash ka gooyo xisaabinta dakhligiisa, ka dibna uu dib u helo kharashkaas, waa in uu shakhsigu ku daraa qadarta lacageed ee dib loo helay xisaabinta dakhliga isla wakhtiga dib u-helidda.

2) Haddii shakhsi uu ku daro qadar lacageed marka uu xisaabinayo dakhlikiisa, isagoo fulinaaya waajib sharci, ka dibna uu dib u celiyo (refund) qaddarta lacageed, shakhsigu wuxuu qaddartaasi uu dib u celiyay ka goyn karaa xisaabinta dakhlikiisa isla wakhtiga dib u celinta.

[27] Reverse of Amounts Including Bad Debts.

3) Haddii shakhsigu, isaga oo dakhligiisa ku xisaabinaya habka muteysashada, uu ka gooyo kharash uu markii hore ku qasbanaa in uu bixiyo, laakiin uu markii dambe ka baaqsado bixinta kharashkaas, waa in uu xisaabinta dakhliga ku daraa qadarta uu ka baaqsaday bixinteeda isla wakhtiga uu ka baaqsaday.

4) Iyadoo la raacayo faqradda (5), ee soosocota:

b) marka dakhliga ganacsi lagu xisaabinayo habka muteysashada, haddii uu shakhsigu ku daro xisaabta qadar lacaga oo uu xaq u lahaa helideeda;

t) kadibna uu shakhsigu qadartii lacagta si deyn laga quustay ahaan uga tiro xisaabaadka ganacsiga,

waqtiga la tirayo, qofka waxaa loo oggol yahay inuu qaddartaa lacagta ee la tiray ka jaro xisaabinta dakhlikiisa.

5) Marka la joogo Qodobka 65-aad (ganacsiga bangiyada), wax lacag goyn laguma heli karo faqradda (4) ilaa uu qofku:

b) qaaday talaabo kasta oo macquul ah oo uu ku daba galayo sidii uu u soo xerayn lahaa dayntaas; islamarkaasina uu

t) si macquul ah u rumaystay in aysan dayntaasi marnaba soo xeroonayn.

Qodobka 30-aad
Qandaraasyada Muddada-dheer[28]

1) Haddii qofka ku hawlan ganacsi:

b) ujeedo canshuur dakhli ahaan uu hab xisaabeedka muteysashada ku xisaabinayo ganacsigiisa; islamarkaasina

t) uu qayb ka yahay qandaraas muddo dheer,

qaddarta lagu darayo ama laga goynayo xisaabinta dakhliga qofka ee la xiriirta qandaraaska mudada dheer waxa la xisaabayaa hadba inta boqolkiiba laga dhameeyey qandaraaska sanad canshuureed kasta.

2) Xeernidaamiye ayaa qeexaya xaaladaha sida khasaaro haddii uu soo baxo sanadka u dambeeya ee qandaraaska muddada dheer xeernidaamiye haasi oo jideynaaya in dib loogu rari karo khasaarahaa si looga gooyo dakhliga heshiiskaa ee sannadihii hore.

3) Qodobkan gudihiisa:

b) "qandaraas mudada dheer" waxaa loola jeedaa qandaraas:

[28] Long-term Contracts.

i) warshadeyn, wax rakibid, ama dhismo ama hawlgalinta adeeg ayaga xiriir laleh; kaasoo

ii) aan 12 bilood gudahood ku dhamaaneynin marka laga soo bilaabo taariikhda uu billoday, iyo

iii) "boqolkiiba inta qandaraaska laga dhammeeyay" waxaa lagu go'aaminayaa habraaca uu qeexaayo nidaamka xisaabaadka ee si guud loo wada ogol yahay (GAAP) kaasoo dakhliga iyo kharashaadka ka soo baxa qandaraaska muddada dheer lagu xisaabiyey .

4) Xeernidaamiye ayaa mabaadi'da Qodobkan ku fulin kara noocyo kale oo qandaraas ah oo soconaya in ka badan muddo 12 bilood ah.

Qodobka 31-aad
Aaladaha Maaliyadeed[29]

1) Haddii shakhsi ku xisaabinayo dakhlikiisa hab ku salaysan muteysashada, lacagaha lagu darayo xisaabinta dakhliga iyo kuwa kharashaad ahaan ooga goynayo aaladaha maaliyadeed ee lagu sheegay Qodobka 22(1) waxa loo raacayaa xeerarkan:

b) wakhtiga qadarta lacageed lagu darayo ama laga goynayo waxa loo go'aaminayaa si waafaqsan nidaamka xisaabaadka ee si guud loo wada ogol yahay (GAAP);

t) mabaadi'daas ayaa sidoo kale go'aaminaya shakhsiga qadar lacageed loo qoondeeynayo, tirada iyo nooca lacagta; sidoo kalena

j) mabaadi'daas ayaa lafulinayaa xitaa haddii ay u baahan yihiin in qadar lagu daro ama laga gooyo qiimaha (fair value or mark-to-market) iyada oo aan loo eegayn in:

i) qaddarta lacageed la helay, la galay ama la xaqiijiyay; ama

ii) lacagtu ay nooc ahaan tahay ra'sumaal ama dakhli.

QAYBTA II
QIYAASIDDA, QOONDAYNTA IYO NOOCEYNTA QADDAR LACAGEED[30]

Qodobka 32-aad
Qiyaasidda Waafaqsan Qiimaha Suuqa[31]

1) Lacag bixinta ama qadarta lagu darayo ama laga goynayo xisaabinta dakhli waxaa lagu qiyaasayaa qadarta lagu qeexay Jadwalka Shanaad ama waxa lagu qeexi xeernidaamiye

---

[29] Financial Instruments.

[30] Quantification, Allocation and Characterisation of Amounts.

[31] Quantification According to Market Value.

ama haddii kale, sida uu yahay qiimaha suuqu.

2) Qaddar la bixiyay waxa la qiyaasayaa inta aan wax canshuur ka-reebid ah lagu samayn lacagta sida uu dhigayo Qaybta II ee Cutubka IX.

3) Iyada oo la raacayo faqradda (5), qiimaha suuqa ee lacag-bixin, hanti ama qaan ee waqti gaar ahi waa:

b) qiimaha (value) lacagta, hantida ama qaantu ka joogto suuq furan oo caadi loogu ganacsado wakhtigaas;

t) haddii faqrad-hoosaadka (b) aan la fulin karin, qiimaha lacag, hanti, ama qaan waxaa laga qiyaas qaadanayaa qiimaha suuq furan oo kale oo caadiya ah wakhtigaas ka joogto lacag, hanti, ama qaan la mid ah iyada oo la tixgelinaayo wixii kala duwanaasho ah ee u dhexeeya lacagta, hantida, ama qaanta la midka ah iyo lacagta, hantida, ama qaanta dhabta ah; iyo

j) haddii faqrad-hoosaadka (b) iyo (t) aan midina la fulineyn, waxaa la qaadanayaa qaddarta ay go'aamisay Wasaaradda taas oo waafaqsan mabaadi'da qiimaynta ee si guud loo wada ogol yahay.

4) Iyadoo laga duulaayo ujeedooyinka faqradda 3(t), lacag, hanti ama qaan waxa loo tixgalinayaa in ay la mid tahay ama ay aad ugu dhowdahay lacag, hanti ama qaan kale, marka ay wadaagaan sifo, tayo, tiro, waxtar, agab, iyo sumcad.

5) Qiimaha suuqa waxa go'aamiya:

b) iyada oo lagu xisaabtamayo, halkii suuragal ah, nidaamka wax kala iibsiga “eex la’aanta” ee lagu sheegay Qodobka 37-aad; laakiin

t) aan loo eegayn:

i) haddii qadarta lacageed ay tahay mid ka badan baahida ama rabitaanka qof kasta;

ii) haddii qadarta lacageed ama qadar la mid ah la siiyay qof kale;

iii) haddii qadarta lacageed lagu bixo iyada oo la raacayo waajibaad sidaasi faraya;

iv) haddii qaddarta loo beddeli karo lacag ama qiimo lacageed; ama

v) haddii ay tahay hanti, xadidaad wareejinta hantida in ay saarantahey iyo in kale.

Qodobka 33-aad
Lacag Bixinta Dadban iyo Tan Gacanta-dhexe[32]

1) Wasaaraddu waxa ay wareegto rasmi ah oo waafaqsan Qodobka 9-aad ee Sharciga Maamulka Dakhliga (Sharci lr 13 ee 27 Oktoobar 2019) ama ogeysiis qoraal ah ayuu ku qeexi kartaa habdhaqanadan soo socda:

b) haddii ay tahay lacag-bixin dadban, ka-faa'iidaystaha waxaa loola dhaqmayaa in uu yahay:

i) qaataha lacagta;

ii) bixiyaha lacagta; ama

iii) qaataha lacagta ama sidoo kale in uu lacag u dhiganta siiyo qof loo aqoonsan yahay inuu yahay qaataha lacagta haddii faqrad-hoosaadkan layska indhatiro; iyo

t) haddii ay tahay lacag bixin gacan dhexe (labaad) usoo marta qaataha :

i) waxaa qaataha lacagta ee labaad loola dhaqmayaa sida qaataha lacagta ee koowaad;

ii) waxaa lacag bixiyaha kowaad loola dhaqmayaa sidii lacag bixiyaha labaad; ama

iii) in la mideeyo lacag bixinta koowaad iyo tan labaad islamarkaasina loola dhaqmo sida hal lacag oo uu bixiyay lacag bixiyaha koowaad uuna qaatay lacag qaataha labaad.

2) Qodobkan dhexdiis:

b) "lacag-bixinta dadban" waxaa ku jira hanaan:

i) qof (ka faa'iidaystaha):

B) si dadban uga faa'iidaysanayo lacag uu qof kale bixiyay; ama

T) maamula qaataha lacag uu qof kale bixiyay; sidoo kale

ii) ay suuro gal tahay in qofka kale ee bixinaya lacagta (ama qof u dhow qofka kale) uu damacsan yahay in lacagta uu ka-faa'iideystaha ku nafciyo;

t) "lacag bixin gacan dhexe (labaad) usoo marta qaataha (back-to-back payment)" waa hanaan:

i) lacag bixin la sameeyay (lacag bixinta koowaad); islamarkaasina

---

[32] Indirect and Back-to-back Payments.

ii) ay suuro gal tahay in la fisho in bixinta hore ay sababi karto inuu qaataha koowaad (ama qof u dhow) uu lacag siiyo qof kale (lacag bixin labaad).

Qodobka 34-aad
Maalgashiga Wadajirka ah[33]

1) Marka la xisaabinayo dakhliga qofka ka soo gala maalgashi uu qof kale la leeyahay, qaddarta lagu darayo iyo mida laga goynayo waxaa loogu kala qaybinayaa milkiilayaasha wadajirka ah sida ay u kala leeyihiin saamiga maalgashiga.

2) Marka aan la xaqiijin karin saamiga ay kala leeyihiin milkiileyaashu, waxaa loola dhaqmayaa si siman.

Qodobka 35-aad
Magdhawga iyo Lacagta dib loogu celiyo[34]

1) Iyada oo la raacayo Qodobka 29-aad, qadar magdhow (compensation) waxaa lagu darayaa xisaabinta dakhliga qofka magdhowga la siiyey waxaa uuna magdhowga u qaadanayaa sifada markii hore uu lahaa qadarka magdhawga la bixiyay.

2) Qodobkan, "qadar magdhow" waxaa loola jeedaa qadar uu helay qof ama qof u dhow qofkaas oo magdhow ahaan ama soo kabasho:

b) dakhli ama qadar lagu daray xisaabinta dakhli, kaas oo uu qofku filayo ama filaayey inuu helo; ama

t) khasaaro ama qaddar laga goynayey xisaabinta dakhli uu qofku galay, uu filayo ama filaayey inuu galo.

Qodobka 36-aad
Maalgalinta Kirooyinka Mudada Dheer, Iibka qayb-qaybta ah iyo lacagta sanadlaha ah[35]

1) Lacagaha uu shakhsi ku bixiyo heshiis kiro mudo dheer (lease) ama uu ku hanto hanti loo bixinayo qayb-qayb waxaa loola dhaqmayaa sida kharashfaa'idada daynta iyo dib isaga bixin qaan raasumaal oo la siiyey iibiyaha ama kireeyaha (lessor) uuna bixiyey iibsadaha ama kiyeystaha (lessee), kolba sidii ay xaaladdu u baahato.

2) Lacagaha qof loo siiyo sanadle ahaan waxa loola dhaqmayaa sida kharashkafaa'idada daynta iyo bixinta qaanta ra'sumaalka.

---

[33] Jointly Owned Investment.

[34] Compensation and Recovery Payments.

[35] Finance Leases, Instalment Sales and Annuities.

3 kharashkaFaa'idada daynta iyo bixinta qaanta ra'sumaalka ee lagu sheegay faqradda (1) iyo (2) waxa loo xisaabinayaa sida haddii amaahdu ay aheyd amaah isku dhafan oo leh faa'ido isdulsaaran (compound) oo xisaabinteedu tahey lix biloodle ah.

4) Qodobka 50-aad ayaa dejinaya xeerar dheeraad ah oo ku saabsan wareejinta heshiisyada kirada mudada dheer (lease) iyo iibinta qayb-qaybta ah.

5) Qodobkan dhexdiisa:

b) "amaah isku dhafan" macnaheedu waa amaah:

i) taasoo lacagaha amah-qaataha uu bixinayo ay qeyb ahaan tahay bixinta faa'idada daynta qaybta kalina dib-u-bixinta raasumaalka;

ii) taas oo xisaabinta qeybta faa'idada daynta lagu saleynaayo ra'sumaalka wali labixin wakhtiga lacag bixin kasta; islamarkaasina

iii) boqolleyda lagu xisaabinaayo faa'idada ay isku mid tahay muddada amaahda;

t) "heshiis kiro mudo dheer oo maaliyadeed" waxa uu leeyahay macnaha lagu qeexay xeernidaamiye, haduusan xeernidaamiye jirinna, waxa loola jeedaa heshiis kiro mudo dheer oo loola dhaqmo sida heshiis kiro maaliyadeed iyada oo la raacayo nidaamka xisaabaad ee si guud la isla ogol yahay (GAAP); iyo

j) "iibka qeyb-qeybeed" waxa ka baxsan iibka uu lasocdo dulsaar faa'iido.

Qodobka 37-aad
Beeca Eexda ah ee Dadka Is-leh[36]

1) Si loo gaaro ujeedada Qodobka 37-aad, haddii xiriir ka dhaxeeyo shakhsi deegaan ku ah Dalka iyo shakhsi kale oo aan deegaan ahayn balse isleh, shakhsiga deegaanka ah waa inuu u xisaabiyaa canshuurtooda dakhliga iyo canshuurta ku waajibtay sida ayagoo aan is leheyn ama xiriir ka dhexeynin (arms length standard).

2) Mabda'a eex la'aanta (arms length) waxa uu ku waajibinayaa shakhsiyaadka is leh inay xisaabiyaan, sifeeyaan, kala xirxiraan, oo ay qoondeeyaan qadarta lagu darayo ama laga goynayo xisaabinta dakhliga si la mid ah marka ay shakhsiyaadku kala madax banaan yihiin.

3) Xeer-nidaamiye waxa uu qeexi karaa:

b) waxyaabaha ka reebban nidaamka eex la'aanta iyo halbeegyada kale ee la isticmaalayo bedelkiisa. iyo

t) tilmaamaha caalamiga ah ee la raacayo marka la fulinayo nidaamka eex la'aanta oo ay ku jiraan wax ka beddelka ku dhaqanka xeerarkaas.

4) Haddii uu shakhsi ku guuldareysto inuu u hogaansamo faqradda (1), waxa ay

[36] Transfer Pricing for Associated Persons.

Wasaaraddu awood u leeyahay inuu ku sameeyo xisaabaadkiisa wax-ka-beddel waafaqsan faqradda (1), iyada oo Wasaaraddu:

b) dib-u-habayn ku samayn karo macaamilka dhex maray ashkhaas is leh;

t) dib-u-habeyn ku samayn karo isha iyo nooca dakhliga, khasaaraha, qaddarta ama lacag bixinta;

j) kalana xiri karo sidoo kalena kala qoondayn karo kharashaad ganacsi oo kusaleysan iibka ganacsiga (turnover).

Qodobka 38-aad
Kala Qaybinta Dakhliga[37]

1) Haddii uu shakhsi isku dayo in uu dakhlikiisa la qaybsado (u jaro) qof kale, Wasaaraddu waxay ka hor tagi kartaa wax kasta oo hoos u dhigaya qadarta canshuurta lagu leeyahay shakhsi, iyada oo soo saaraysa ogeysiis qoraal ah.

2) Ogeysiiska lagu sheegay faqradda (1) waxa uu wax ka bedeli karaa qadarta lagu darayo ama laga goynayo xisaabinta dakhliga qof kasta ama waxa uu dib-u-eegis ku samayn karaa isha iyo nooca dakhli kasta, khasaaro, qaddar ama lacag bixin.

3) Isku dayga "kala qaybin dakhli" ee Qodobkani waxaa ka mida hanaan kasta oo leh dhammaan sifooyinka soo socda:

b) wareejinta hantida (si toos ah ama si dadban), oo ay ku jirto wareejinta qadar lacageed ee laga helayey hantida;

t) wareejiyahu uu haysto xaq sharci ah ama mid qarsoon oo uu (hadda ama mustaqbalka) kaga faa'iidaysan karo hantida; iyo

j) sababaha wareejinta marka ay ka mid tahay in la yareeyo canshuurta uu qof bixin lahaa.

CUTUBKA V
HANTIDA IYO QAAMAHA[38]

QAYBTA I
XEERARKA ASAASIGA AH

Qodobka 39-aad
Xisaabinta Korodhka iyo Khasaaraha[39]

1) Korodhka uu shakhsi ka helo ka kaaftoomidda hanti ama qaan waa qadarta ay wadarta

[37] Income Splitting.

[38] Assets And Liabilities.

[39] Calculation of Gains and Losses.

lacagta lagu gaday hantida ama qaantu ka badan tahay qiimaha kharash (cost) ee hantida ama qaantu ku fadhido wakhtiga ka kaaftoomidda.

2) Khasaaraha shakhsi ka soo gaara ka kaaftoomidda hanti ama qaan waa qadarta ay wadarta qiimaha kharash (cost) ee hantida ama qaantu ku fadhiso ka badan tahay wadarta laga helay hantida ama qaanta wakhtiga ka kaaftoomide.

Qodobka 40-aad
Qiimaha Kharash ee Hanti[40]

1) Iyadoo la raacayo sharcigan, qiimaha kharash (cost) ee hantida qofku waa wadarta:

b) kharashaadka uu qofku u galay hanashada hantida oo ay ku jiraan, halka ay khusayso, kharashaadka dhismaha, warshadaynta ama soo saaridda hantida;

t) kharashaadka uu qofku ku galay wax ka bedelka, qurxinta, rakibidda, dayactirka ama hagaajinta hantida;

j) kharashaadka uu qofku ku galay ka kaaftoomidda hantida;

x) kharashaadka lama filaanka ah ee uu qofku u galay hanashada iyo ka kaaftoomidda hantida; iyo

kh) qadarta dakhli ee lagu sheegay faqradda (2).

Iyadoo aan qadar lacageed la xisaabin karin wax ka badan hal mar.

2) Qadar dakhli waa:

b) qadarta ay Qaybta II ee Cutubka III fareyso in si toos ah loogu daro xisaabinta dakhliga qofka waaqadar la canshuur dhaafay ama waacanshuurta laga reebay ee kama dambaysta ah; haddii

t) ku-dhaqanka faqrad-hoosaadka (b) ee sare ku xusan ay ka dhalaneyso in qofku hanto hantida ama qof kale uu galo kharashaadka noociisa lagu sheegay faqradda (1)(t), (j) ama (x) isaga oo wakiil ka ah qofka.

3) Qiimaha kharash (cost) ee hantida kuma jiraan:

b) Kharashaadka gaarka ah ama kharashaadka la saaray;

t) kharashaadka ay tahay in si toos ah looga gooyo xisaabinta dakhliga qofka;

j) lacagaha lagu bixiyay faa'idada daynta; ama

x) kharashaadka lagu daray qiimaha kharashka (cost) ee hanti kale.

---

[40] Cost of Assets.

4) Qaddarta kharash ee lagu galay aaladaha maaliyadda waa laga saarayaa qiimaha kharashka (cost) ee hanti kasta oo aan ahayn aaladaha maaliyadeed. Ka hor inta aan lagu darin qiimaha kharashka (cost) ee aaladaha maaliyadda, qaddartu waa in ay ku daridda u qalantaa sida ku cad faqradda (1) sidoo kalena aysan saareynin faqradda (3).

5) Qodobkan dhexdiisa, "kharashaad lama filaan ah" ee uu qofku ku galay hanashada iyo ka kaaftoomidda hantida waxa ka mid ah:

b) kharashka xayaysiinta, canshuurta, khidmada iyo kharashka kala wareejinta;

t) kharashaadka asaasidda, ilaalinta ama difaaca lahaanshaha hantida; iyo

j) xuquuq hawleedka (mushaar ama gunno) ee adeegyada xisaabiyaha, wakiilka, naadiyaha, dallaalka, lataliye, lataliye sharci, sahamiye (surveyor) ama qiimeeye taasoo la xiriirta kharashaadka lagu sheegay faqrad-hoosaadka (b) ama (t).

Qodobka 41-aad
Qiimaha Badeeco Ganacsi[41]

1) Iyadoo ay ujeedadu tahay in la go'aamiyo qiimaha (cost) badeeco ganacsi ee uu qof ku ganacsado:

b) kama mid aha qadar lacageed loo bixiyey dayactirka, hagaajinta ama qiimo dhaca hantida qiimodhacda;

t) iyadoo la eegayo faqrad-hoosaadka (a), waa in habka dhamaan kharash-koobka loo istcimaalaa si dhamaan qadarta lacageed loogu daro qiimaha (cost) badeecada ganacsiga sida ku cad Qodobka 40-aad; iyo

j) in la tixgeliyo dib-u-dajin kasta ee xisaabeed (resetting) oo lagu samaynayo qiimaha (cost) siwaafaqsan qodobka 19(4).

2) Milkiilaha shay ka mid ah badeecada ganacsiga oo aan si gaar ah loo aqoonsan karin waxa uu dooran karaa in qiimaha (cost) hantida lagu go'aamiyo iyadoo la raacayo habka kala horreynta (first-in-first-out) ama habka qiimaynta celceliska (average-cost method). Mulkiiluhu wuu dooran karaa habkii lagu xisaabinaayo.

3) Habka lagu doortay faqradda (2) waxa lagu bedeli karaa oo keliya ogolaansho qoran oo ay Wasaaraddu bixiso.

4) Qodobkan dhexdiisa:

b) "habka dhamaan kharash-koobka)": waxa loola jeedaa marka la raaco mabaadi'da xisaabaadka ee si guud loo wada ogol yahay (GAAP) ee qiimaha (cost) badeecada ganacsiga ay tahay wadarta qiimaha (cost) asalka ahaa ee hantida, kharashaadka tooska ah ee shaqaalaha, iyo qiimaha si guud ugu baxa maamulka shaqada;

---

[41] Cost of Trading Stock.

t) "habka qiimeynta qiimaha (cost) ee celceliska (average-cost method”: waxa loola jeedaa marka la raaco mabaadi’da xisaabaadka ee si guud loo wada ogol yahay (GAAP) ee qiimaynta badeecadda ganacsigu lagu salaynayo celceliska miisaaman ee qiimaha dhammaan badeecada ganacsi ee noocaasi laga hayo ;

j) "kharashaadka tooska ah ee shaqaalaha”: waxa loola jeedaa kharashaadka shakhsi uga baxa shaqaalaha taasoo si toos ah ula xiriirta soo saaridda badeecadda ganacsi;

x) "qiimaha (cost) asalka ah ee hantida”: waxa loola jeedaa qiimaha uu shakhsi u galay helitaanka hanti noqonaysa badeecad ganacsi ama loo qaadan karo inay qeyb asaasi ah ka tahay badeecadda ganacsiga ee lasoo saaray ;

kh) “qiimaha (cost) si guud ugu baxa maamulka shaqada” waxa loola jeedaa dhamaan kharashaadka uu qofku u galay wax soo saarka warshadeed ee aanay ku jirin kharashaadka asalka ah ee shaqaalaha iyo hantida; iyo

d) "habka kala horreynta” waxa loola jeedaa marka la raaco mabaadi’da xisaabaadka ee si guud loo wada ogol yahay (GAAP) oo qiimaha (cost) badeecada isku nooca ah u qoondeynaya in looga kaaftoomo sidii loo kala hor keenay.

Qodobka 42-aad
Dheefta Faa’idadada Hantida[42]

1) Iyadoo la raacayo Sharcigan, dheefta faa’idada hantida ee uu qof leeyahay waqti gaar ah waxa loola jeedaa:

b) qadarta uu qofku ka helay lahaanshaha hantida oo ay ku jiraan:

i) qadarta laga helay wax ka bedelka ama yareynta qiimaha hantida; iyo

ii) qadarta laga helay hantida oo ay ku jiraan heshiis loo galay dayactiridda iwm; iyo

t) qadarta uu qofku ka helay ka kaaftoomidda hantida ama ka kaaftoomid xaq uu qofku u leeyahay in uu ka helo mustaqbalka (future) qadar lacageed.

2) Lacagta dheefta iibka hantida kuma jiraan lacag la canshuur dhaafay, canshuur la reebay oo kama dambays ah ama wixii aan aheyn badeecad ganacsi, qadar si toos ah loogu darayo xisaabinta dakhliga qofka si waafaqsan Qaybta II ee cutubka III.

Qodobka 43-aad
Ka kaaftoomidda Hantida[43]

1) Iyada oo la raacayo sharcigan, qofka hantida leh waxa uu ka kaaftoomaa hantida:

---

[42] Proceeds for Assets.

[43] Disposal of Assets.

b) marka qofku uu ka tanaasulo inuu yahay mulkiilaha hantida, waxaana kamida marka hantida la iibiyo, lays dhaafsado, la wareejiyo, la qaybiyo, la baabi'iyo, la ceshado, la burburiyo, ay lunto, wakhtigeedii dhaco ama la iska dhiibo;

t) haddii ay dhacdo in qofkii hantida lahaa uu meesha ka baxo, oo ay ka mid tahay dhimashada shakhsiga, ka kaaftoomku waxa uu dhacayaa wax yar ka hor inta uusan qofku dhiman;

j) haddii ay tahay hanti kale oo an aheyn badeeco ganacsi ama hanti qiima dhacaysa, marka ay wadarta lacagta laga dheefey iibinta hantida ay ka badato qiimaha (cost) hantida;

x) marka la raacayo qodobka 65-aad (ganacsiga bangiyada), haddii ay hantidu tahay deyn uu qof leeyahay si uu ganacsi u sameeyo, waa marka uu qofka:

i) qaaday dhammaan talaabooyinka uu ku xaqiijinayo raadinta lacagta;

ii) si macquul ah u rumaystay in aanay dayntu soo xeroonayn; iyo

iii) in qadarka daynta laga quustay uu ka tiro xisaabta ganacsiga;

kh) hadii ay tahay badeeco ganacsi, hanti qiimo dhacda, hanti ra'sumaal ee ganacsi ama hanti maalgashi oo canshuurgal ah, wax yar ka hor inta uusan shakhsigu u hawlgelin hantida hab doorineya sifooyinkii lagu aqoonsanaayey noocyada hanti ee kor ku xusan; iyo

d) xaaladaha ku xusan Qodobada 54aad iyo 57aad (shuraakada), 63aad (isbeddelka milkiileyaasha), 65aad (ganacsiga bangiyada), 78aad (bedelka dagenaashaha) iyo 82aad (xarumaha ganacsi ee joogta ah).

2) Ka kaaftoomidda hantida waxaa ka mid ah in qayb hantida ka mid ah laga kaaftoomo (eeg Qodobada 51aad iyo 52aad).

Qodobka 44-aad
Ku Dabaqida Cutubkan ee Qaanta[44]

1) Go'aaminta qiimaha (cost) iyo lacagta dheefta ee qaanta ee qof waxa loo raacayaa qodobada 40aad iyo 42aad sida iyada oo qaantu ay la mid tahay hantida. Waxaana kamida:

b) qiimaha (cost), waxaa lagu darayaa kharashka lagu galay ka kaaftoomidda qaanta; iyo

t) lacagta dheefta, waxaa lagu darayaa qadarta lacageed ee laga helay markii qaanta la galaayey.

2) Iyadoo la raacayo sharcigan, qofka qofkale kule qaan waxa uu ka kaaftoomayaa qaantaa:

[44] Application of this Chapter to Liabilities.

b) marka qofku ka hadho qaanta, oo ay ku jirto marka qaanta la wareejiyo, la bixiyo, la baabi'iyo, laga dhaafo ama uu waqtigeedii dhaco;

t) haddii qaanta qofka lagu leeyahay uu meesha ka baxo, oo ay ka mid tahay geeri ku timaada shakhsiga, wax yar ka hor inta uusan qofku dhiman; iyo

j) xaaladaha ku xusan Qodobbada 54aad iyo 57aad (shuraakada), 63aad (isbeddelka milkiileyaasha), 78aad (beddelka degenaanshaha) iyo 82 (xarumo ganacsi oo joogta ah).

3) Iyadoo la raacayo xeernidaamiye, xeerarka gaarka ah ee Qaybta II ayaa lagu dabaqayaa qaanta si la mid ah sida loogu dabaqayo hantida, iyada oo la tixgelinaayo duruuf (adoptations) kasta oo lagama maarmaanka ah.

Qodobka 45-aad
Dib u Rogidda Xisaabta, Qiyaasidda iyo Magdhawga[45]

1) Iyadoo la raacayo Qodobka 29-aad (dib u rogidda xisaabta), marka qof uu kharashka ku daro qiimaha (cost) hantida ama qaanta ka dibna uu soo ceshado kharashka, qofku waa in uu ku daraa qaddartaas lacageed lacagta dheefta hantida ama qaanta, hadba siday xaaladdu u baahato.

2) Iyadoo la raacayo qodobka 29-aad (dib u rogidda xisaabta), marka qof uu qadar lacageed ku daro lacagta dheefta hanti ama qaan ayna waajib sharci ahayd inuu sidaasi sameeyo, uu hadhow dib isaga celiyo lacagtaasi, qofku waa inuu ku dari karaa lacagtaasi uu iska celiyeyqiimaha (cost) hantida.

3) Iyadoo la raacayo wax ka bedel kasta oo kale ee sharcigan oo uu ku jiro Qodobka 35aad (magdhowga iyo soo kabashada), qaddarta magdhowga waa lagu darayaa lacagta dheefta hantida ama qaanta ee ay la xiriirto, hadba siday xaaladdu u baahato.

4) Qodobkan dhexdiisa, "qaddarta magdhowga" ee la xiriira hantida ama qaanta, macnaheedu waa qaddarta uu qof ama qof u dhow shakhsiga uu ku helay magdhow ahaan ama utaagan:

b) ka soo kabashada qiimaha (cost) dhabta ah ama tan la filayey ama lacagta dheefta hantida ama qaanta ee la filaayay laakiin aan la helin, hadba siday xaaladdu u baahato; ama

t) hoos u dhaca qiimaha hantida ama korodhka ku dhaca qaanta, hadba siday xaaladdu u baahato.

QAYBTA II
XEERARKA GAARKA AH

[45] Reverse, Quantification and Compensation of Amounts.

Qodobka 46-aad
U Wareejinta Hantida Qof Dhow ama Hadyad Ahaan[46]

1) Iyada oo la raacayo Qodobkan iyo Qodobka 48-aad, marka uu shakhsi ka kaaftoomo hanti isagoo lahaanshaha hantida ku wareejinaya qof u dhow shakhsiga ama u hadiyeeyo qof kale:

b) wareejiyaha waxaa loola dhaqmaa in hantida uu ka kaaftoomay ka helay lacag dheef ah oo la mid ah hadba middi weyn qiimaha suuqa ay ka joogto iyo qiimaha kharasheedkii (cost) saafiga ah ee hantidu joogtay ka hor isla marka aan laga kaaftoomin; sidoo kale

t) loowareejiyahana waxaa loola dhaqmayaa in uu galayo kharash la mid ah mid lagu hantiyi karo hantidani oo kale.

2) Haddii uu qof ka kaaftoomo badeeco ganacsi, hanti qiimo dhacaysa, hantida ra'sumaalka ee ganacsi ku jirtay ama hanti maalgashi canshuurgal ah isagoo lahaanshaha hantida u wareejinaya qof u dhow, shuruudaha faqradda (3)-na la buuxiyey:

b) wareejiyaha waxaa loola dhaqmaa inhantida uu ka kaaftoomey ka helay lacag dheef ah oo la mid ah qiimaha (cost) saafiga ah ee hantidu joogtay ka hor inta uusan ka kaaftoomin;

t) loo wareejiyahana waxaa loola dhaqmayaa in uu galayo kharash qiimihiisu la mid yahey qiimaha dheef ahaan loogu xisaabshey wareejiyaha hantida.

3) Sharuuduhu waa:

b) in hantida la wareejiyey qeyb katahey ganacsi shaqeynaya oo loo wareejinayo qof u dhow shakhsiga kuna jiraan dhammaan hantida ganacsigaa oo iswadata;

t) qofka ama qofka u dhow ay yihiin hay'ad (ama labaduba ay yihiin hey'ad) sidoo kalena inkabadan sideetan (80) boqolkiiba qiimaha xubinnimada lahaansho ee hay'ada uu si toos ah u hayo kan kale;

j) wakhtiga wareejintana:

i) qofka iyo qofka u dhow ay deggan yihiin Soomaaliya;

ii) hantidu ay tahay hanti gudaha dalka taalla; iyo

iii) qofka u dhow uusan ahayn, wixii ka baxsan shuraako ashkhaas isu dhow, shuraako sanduuq hawlgab ama urur aan faa'iido doon ahayn ama aan ka faa'iidaynin canshuur ka dhaafidda Jadwalka Saddexaad;

x) wareejinta ka dib hantidu ay wali tahay hanti gudaha dalka taal; iyo

[46] Transfer of Asset to an Associate or as Gift.

kh) in la doortey dabaqidda faqradda (2) si wada jir ah oo qoraal ahna ugu soo saaraan shakhsiga iyo qofka u dhow kahor dhamaadka sanad canshuureedka eey wareejintu gudihiisa dhacayday.

Qodobka 47-aad
Ka Kaaftoomidd Hanti Iyadoon Lahaanshihiyo Wareegin[47]

1. Hadii uu shakhsigu ka kaaftoomo hanti qaab ka mid ah nidaamyada lagu sharaxay Qodobada 43(1)(kh), 57-aad (shuraakada), 63-aad (isbeddelka milkiilayaasha) ama 78-aad (beddelka degenaanshaha), qofka waxaa loola dhaqmayaa in uu:

b) joojiyey lahaanshiyaha hantida iyo in hantidii uu ka kaaftoomay ka helay lacag dheef la mid ah qiimaha suuqa ah ee hantidu joogtay isla marka laga kaaftoomey;

t) isla markiisna dib usoo ceshado hantidii, isaga oo galaya kharash udhigma ka hantida uusoo ceshanayo.

Qodobka 48-aad
Wareejinta Hantida Laga Dhinto ama marka Kala Tagga Lamaane[48]

1) Marka qof geeriyooday hantidiisa loo wareejinayo fuliye (executor) ama ka faa'ideyste:

b) shakhsiga geeriyoodey waxaa loola dhaqmayaa sihantida uu kadhintey tahey mid uu ka kaaftoomey kana helay lacag dheefa oo la mid ah qiimaha suuqa eey hantidu ka joogtay waqtiga ka kaaftoomidda (geerida); islamarkaasina

t) fuliyaha (executor) ama ka faa'ideystaha, hadba siday xaaladdu u baahato, waxaa loola dhaqmayaa in uu galayo kharash la mid ah ka lagu hantiyi karo hantidani oo kale.

2) Haddii, iyada oo qayb ka ah is-afgarad furniin ama kala tag hanti loo kala wareejinayo lamaane ama lamaane isfurey kuna heshiiyaan in lagu dabaqo faqraddan:

b) wareejiyaha waxaa loola dhaqmaa in hantida uu wareejiyey ka kaaftoomey kana helay lacag dheefa oo la mid ah qiimaha saafiga ah ee hantidu ka joogtay suuqa ka hor inta uu ka kaaftoomin (wareejin); iyo

t) loo wareejiyahana waxaa loola dhaqmaa in uu galayo kharash la mid ah ka lagu hantinayo hantidani oo kale; iyo

j) isla marka lala kala wareego ka dib, hantida waxaa loola dhaqmayaa in ay la wareegaha agtiida ku leedahay sifo la mid ah tii ay ku lahayd gacanta wareejiyaha ka hor wareejinta.

---

[47] Disposal with Retention of Asset.

[48] Transfer of Asset on Death or Separation of Spouses.

Qodobka 49-aad
Ka Kaaftoomid Hanti Ku-imatey Ikhtiyaar La'aan oo Bedel-leh[49]

1) Faqrada (2) waxay khusaysaa haddii qofku:

   b) si aan iskiisa aheyn uu uga kaaftoomo hanti maxalli ah (gudaha dalka taal), sida ku cad Qodobka 43(b);

   t) uu helana hanti kale oo maxali ah oo isla noocii ah oo u badashana hantidii hore muddo lix bilood gudaheed ah ama hal sano kadib ka kaaftoomidda; iyo

   j) si qoraal ahi u doorto ku dhaqmida Qodobkan.

2) Haddii faqradan lagu dabaqo, shakhsiga waxaa loola dhaqmaa in:

   b) lacagta dheefta ee uu ka helayo ka kaaftoomidda hantida ay la mid tahay -

      i) qiimaha (cost) saafiga ah ee hantidu joogtay ka hor inta aan laga kaaftoomin; oo lagu daray

      ii) Qadarta lacageed, haddiiba ay jirto, ee dheefta laga helay ka kaaftoomidda ay ka badan tahay kharashka loo galay hanashada hantidii lagu bedelay (la xisaabinayo iyada oo aan la raaceynin qodobkan); iyo

   t) kharashaadka loo galay hanashada hantida beddelka ah ay la mid tahay:

      i) qaddarta lagu sheegay farqad hoosaadka (b)(i); oo lagu daray

      ii) qaddarta lacageed, haddiiba ay jirto, ee kharashka loo galay hanashada hantida bedelka ahi ay ka badan tahay lacagta dheefka laga helay ka kaaftoomidda (la xisaabinayo iyada oo aan la raaceynin qodobkan);

3) Xeernidaamiye ayaa qeexi duruufaha isubedelka hal damaanad hantiyeed (security) ee shirkad lagu badalayo damaanad kale ee isla shirkaddii ama shirkad kale ay abuuri karto ka kaaftoomid ikhtiyaari aheyn. Duruufahaas waxa ku jiri kara shirkaddo midoobay, shirkado kala baxay iyo kuwo dib-u-dhis lagu sameeyay.

Qodobka 50-aad
Wareejinta Rahan ahaan, Kiro Muda Dheer ee Maaliyadeed ama Beeca Qayb-Qaybta loo Bixinayo[50]

1) Haddii qof uu rahmo hantidiisa si uu qofkale uga helo qaan:

   b) shakhsiga loolama dhaqmayo sida in uu ka kaaftoomey hantidaa ama qayb ka mid ah, laakiin waxaa loola dhaqmayaa in uu hantida weli leeyahay hase ahaatee uu galayo qaan (waajibka la damaanad qaadayo); sidoo kale

[49] Involuntary Disposal of Asset with Replacement.

[50] Transfer by way of Security, Finance Lease or Instalment Sale.

t) qofka kale loolama dhaqmayo in uu hantida ama qayb ka mid ah hantinayo, laakiin waxaa loola dhaqmaayaa in uu lahaanayo waajibka la damaanad qaaday.

2) Haddii hantida lagu kireeyo heshiis kiro mudo dheer (lease), kireeyaha waxaa loola dhaqmayaa in uu lahaanshaha hantida u wareejiyey kiraystaha.

3) Iyadoo la raacayo Qodobka 46-aad (u wareejinta qof dhow), haddii uu shakhsi wareejinayo hanti si waafaqsan beeca qayb-qayb u bixinta ah ama (sida ku cad faqradda (2)) si waafaqsan heshiiska kirada:

b) shakhsiga waxaa loola dhaqmayaa in uu hantidii la wareejiyey ka helay lacag dheefa oo la mid ah qiimaha suuqa ee hantidu joogtay ka hor inta aan la wareejin;

t) qofka la wareegaya hantidana waxaa loola dhaqmaayaa in uu galayo kharash la mid ah kan lagu hantinayo hantidan oo kale.

4) Haddii kiraystuhu si waafaqsan heshiiska kirada mudada dheer uu hantida ku soo celiyo kireeyaha ka hor inta aysan lahaanshuhu u gudbin kireystaha (aan ka ahayn sababta ku cad faqradda (2)), kiraystaha waxaa loola dhaqmayaa in uu lahaanshaha hantida dib ugu wareejinayo kireeyaha.

5) Qodobkan, "heshiis kiro mudo dheer" iyo "beeca qayb-qaybta loo bixiyo" waxa ay la macnaha yihiin sida ku qeexan Qodobka 36-aad.

Qodobka 51-aad
Ka Kaaftoomidda Hantida la Kala Qeybshey[51]

1) Iyadoo la raacayo qodobka 50-aad (wareejinta hantida rahmanka, iwm), haddii xuquuqo ama waajibaad la xiriira hanti uu qof leeyahay lagu asteeyo qof kale, oo ay ka mid tahay qaabka hantida mudada dheer kiraysan ama qayb ka mid ah, markaasi:

b) haddii xuquuqahaa ama waajibaadkaasu yahey mid joogta ah, qofka hantida lahaa asteynta kahor waxaa loola dhaqmayaa in uu ka kaaftoomaayo qayb ka mid ah hantida, balse loolama dhaqmayo in uu hantinayo hanti cusub ama qaan; iyo

t) haddiise xuquuqaha ama waajibaadku ay yihiin kuwo ku-meel-gaar ah ama shuruudeysan, qofka loolama dhaqmayo in uu ka kaaftoomaayo qayb ka mid ah hantida ama qaanta, balse waxa loola dhaqmayaa in uu hantinayo hanti cusub ama galayo qaan cusub, hadba siday xaaladdu u baahato.

2) Xuquuqda iyo waajibaadka waxa loo tixgaliyaa in ay joogto yihiin haddii ay u badan tahay in ay sii jirayaan inta hantidu waxtar leedahay ama, ugu yaraan 50 sano, marka aan la tixgelineynin cimriga waxtar ee hantida.

---

[51] Disposal by Separation of Asset.

Qodobka 52-aad
Ukala Qeybinta Kharashaadka iyo Lacagta Dheefta Iibka[52]

1) Marka uu shakhsi hal ama in ka badan oo hanti ah ku helo hab isuwareejin hal mar ah ama hal heshiis, kharashka ku baxay helidda midkasta oo hantida katirsan waxaa si kalidii ah loogu xisaabinayaa kharashka u gaarka ah iyada oo loo raacayo qiimaha suuqa ay ka joogto wakhtiga la hantinayo hanti kasta.

2) Marka uu shakhsi hal ama in ka badan oo hanti ah uu kaga kaaftoomayo hab wareejin u dhaceysa qaab hal mar ah, lacagta dheefta laga helay ka kaaftoomidda hantida waxaa si kala gooni-gooni ah loogu kala xirayaa hantida iyada oo loo eegayo qiimaha suuqa ay ka joogto hanti kasta wakhtiga ka kaaftoomidda.

3) Haddii shakhsi hanti leh uu ka kaaftoomo qayb ka mid ah hantida, qiimaha (cost) saafiga ah ee ay hantidu lahayd ka hor inta aanuka kaaftoomin waxaa loo kala qaybinayaa qaybta la kaga kaaftoomey iyo qeybta hartay si waafaqsan qiimaha suuqa ay ka joogto kadib islamarka laga kaaftoomiey.

Qodobka 53-aad
Xeerar Gaar ah oo Dheeraad ah

Xeernidaamiye ayaa qeexi shuruuc dheeraad oo gaar ah oo lagu dabaqi karo xisaabinta hantida iyo qaamaha oo ay ku jiraan, laakiin aan ku xadidneyn, ka kaaftoomidda hantida ka dhalata midoowga iyo soo kordhin xubinnimo aan ku qiimeysneyn lacag caddaan ah.

CUTUBKA VI
XEERARKA NIDAAMINAAYA NOOCYADA SHAKHSIYAADKA[53]

QAYBTA I
SHURAAKOOYINKA[54]

Qodob 54-aad
Mabaadi'da Canshuurta[55]

1) Dakhliga ganacsiga shuraakada iyo khasaarihiisa waxa loogu qaybiynayaa wadaagayaasha si waafaqsan qaybtan. Tani waxa loola jeedaa shuraakada ganacsi:

b) waajib kuma ahan bixinta canshuurta dakhliga canshuurgalka ah ee uu dhigayo Qodobka 9(1)(b) xaqna uma leh wax canshuur tixgelin (credit) ah oo khuseeya dakhligaasi; balse

---

[52] Apportionment of Costs and Proceeds.

[53] Rules Governing Types of Persons.

[54] Partnerships.

[55] Principles of Taxation.

t) waxa waajib ku ah:

i) in ay shuraakada sameyso canshuur ka reebid kama dambays ah ee lacagta ay shuraakada hesho si waafaqsan Qodobka 9(1)(t);

ii) in ay canshuurta ka reebto lacagaha ay shuraakada bixiso si waafaqsan Qaybta II ee Cutubka IX; iyo

iii) in ay soo gudbiyo xisaab canshuureedka si waafaqsan Qodobka 101-aad.

2) Lacagta ay helaan ama kharashaadka ay u galaan wadaagayaashu si wada jir ah ama si guud oo qayb ka ah shuraakada waxa loola dhaqmayaa sida inuu lacagtaasi helay ama kharashka galay ganacsi shuraakada ah, oo looma tixgelinayo wadaagayaasha.

3) Hantida la leeyahay (oo uu ku jiro sumcadwanaaga) iyo qaanta loogu leeyahay wadaagayaasha si wada jir ah ama si guud oo qayb ka ah ganacsiga shuraakada ah waxaa loola dhaqmayaa sida inay leedahay ama lagu leeyahay shuraakada ganacsiga, oo looma tixgelinayo wadaagayaasha. Waxaa intaasi dheer, hantida iyo qaanta waxa loola dhaqmayaa sida:

b) marka ay tahay hanti , inay shuraakadu heshay marka ay hantidaasi noqoto mid si wada jir ah ama si guud loo yeeshay;

t) marka ay tahay qaan, in ay shuraakadu gashay marka qaanta loo yeesho si wada jir ah ama si guud; iyo

j) inay shuraakadu ka kaaftoomtay markay hantida ama qaantu ka baxdo diiwaanka lahaansho ama ku yeelashada si wada jir ah ama si guud, hadba siday xaaladdu u baahnaato.

4) Sida ay dhigayaan qeybaha kale sharcigan,macaamilka u dhexeeya shuraako ganacsi iyo wadaagayaasheeda waa la aqoonsanayaa, balse waxaa laga saaray (oo aan la aqoonsaneynin) kuwa soo socda, kuwaas oo la tixgalinayo marka la go’aaminayo saamiga wadaagaha ee ku qeexan Qodobka 56(1):

b) amaahda uu wadaage siiyey shuraakada iyo faa’ida dayneed uu amaahdaa ka helo; iyo

t) adeegyada uu wadaage siiyo shuraako (oo ay ka mid tahay inuu ku siiyo hab shaqaalayn) iyo khidmad ama dakhli kasta oo shaqadaas darteed lagu siiyo.

Qodob 55-aad
Dakhliga ama Khasaaraha Shuraakada[56]

1) Dakhliga shuraakada ee sanad canshuureed waa dakhliga shuraakada ka soo gala ganacsiga sanadkaas gudihiis (eeg Qodobka 13).

2) Khasaaraha shuraakada ee sanad canshuureed waa wadarta khasaaraha aan laga jarin ee shuraakada kasoo gaara ganacsiga sanadkaasi gudihiisa (eeg Qodobka 23(4)). Khasaaraha aan laga jarin waxa uu ka baxayaa inuu ahaado khasaare shuraako marka loo asteeyo wadaagayaasha sida uu dhigayo Qodobka 56(1).

Qodob 56-aad
Canshuurta Shakhsiyaadka Shuraakada ah[57]

1) Marka la xisaabinayo dakhliga wadaagaha ka soo gala shuraakada mudo sanad canshuureed:

b) waxa lagu darayaa saamiga uu wadaagaha ku leeyahay dakhliga shuraako kasta ee sanadka; ama

t) waxa laga goynayaa saamiga uu wadaagaha ku leeyahay khasaaraha shuraako kasta ee sanadka.

2) Milkiyadda wadaagaha ee shuraako waa hanti laga dhaafay cashuur, korodhka iyo khasaaraha ka dhasha ka kaaftoomida lama aqoonsanayo.

3) Dakhliga ama khasaaraha shuraako ee loo kala qoondeeyo wadaagayaasha ah sida ku xusan faqradda (1):

b) sidooda ayay ahaanayaan nooc ahaan iyo il dakhli ahaanba;

t) waxa loola dhaqmayaa lacag uu helay ama khasaare uu galay wadaagaha dhammaadka sanad canshuureedka;

j) waxa loogu kala qoondaynayaa wadaagayaasha si u dhiganta hadba saamiga wadaage kasta leeyahay, haddii aysan Wasaaraddu, hab qoraal ah iyo sabab wanaagsan, ku farin si kale.

---

56 Partnership Income or Loss.

57 Taxation of Partners.

4) Canshuurta lagu bixiyay sharcigan ama canshuurta dakhli dibada uga yimaada ee ay bixisay ama loola dhaqmay in ay bixisay shuraakada marka la eego dakhliga shuraako waxaa:

- b) loogu qoondeeynayaa wadaagayaasha ah si la mid ah hadba saamiga wadaage kasta;

- t) loo qoondeeynayaa waqtiga dakhliga shuraakada loo aqoonsaday inay heleen wadaagayaasha si waafaqsan faqradda (3)(t);

- j) loola dhaqmayaa in ay bixiyeen wadaagayaasha.

5) Marka la eego ujeedooyinka Qodobkan iyo iyada oo la raacayo Qodobka 54(4) (macaamilka u dhexeeya wadaagayaasha iyo shuraakada), "saamiga wadaage" waxa uu la’eg yahay boqolayda lahaanshahiisa ee shuraakada.

Qodob 57-aad
Isbadalka Xubnaha Shuraakada ah[58]

1) Haddii uu wadaage ka kaaftoomo saamigiisa shuraakada gabi ahaan ama qayb -

- b) hadii lahaanshihiisu ka badan yahay boqolkiiba toban (10) ee dhammaan lahaanshaha shuraakada, shuraakada waxa loola dhaqmayaa in ay ka kaaftoontey qayb u dhiganta hantida shuraakada (oo uu ku jiro sumcadwanaag) iyo qaantaba;

- t) haddii kale, shuraakada loolama dhaqmayo in ay ka kaaftoomtey wax hanti ama qaan ah.

2) Marka la go’aaminayo in xadka toban (10) boqolkiiba ee ku cad farqadda (1)(b) la gaaray, waxaa laisku geeynaya wadarta dhammaan ka kaaftoomidda uu xubinta shuraakada sameeyay muddo saddex sano gudahooda ah.

3) Faqradda (1) laguma fulinayo meesha uu Qodobka 63 (isbeddelka lahaanshaha) dabaqayo isbeddelka ku yimaada lahaanshaha shuraakada. Haddii kale, shuraakadu waxa ay sii jiraysaa xitaa hadii uu isbeddel ku yimaado wadaagayaasheeda.

QAYBTA II
AMMAANNO[59]

[58] Change of Partners.

[59] Trusts.

Qodob 58-aad
Canshuurta Amaanada[60]

1) Amaanada waxa ku waajibtay canshuur ka gooni ah tan ka faaidaystayaasheeda. Si gooni gooni ah ayaa loo xisaabinayaa dakhliga amaannooyinka iyadoon loo eegayn inay amaano hayeyaal isku mid ahi hayaan.

2) Amaanada waxa loo canshuurayaa sida hay'ad. Si kastaba ha ahaatee, amaano shakhsi naafo ah waxa loo canshuurayaa sida iney tahay qof. Noqoshada qof laga mas'uul yahay laguma tirinayo karti la'aan.

3) Qaddarta ay heshay iyo kharaska ay gashay amaano ama amaana haye (aan ahayn wakiil kaliya) waxaa loola dhaqmayaa in ay heshay ama ay gashay amaanada, oo aysan helin ama gelin qof kale. Xeerkani wuxuu khuseeyaa hadii:

- b) qaddarta lacagta lagu helay ama lagu galay wakaaladda qof kale iyo hadii kaleba;

- t) qof kasta oo kale uu xaq u leeyahay qadartaas ama dakhli ka kooban qadartaas iyo hadii kaleba;

4) Hantida ay leedahay iyo deymaha lagu leeyahay amaano ama amaana haye (aan ahayn wakiil kaliya) waxaa loola dhaqmayaa in ay leedahay ama lagu leeyahay amaanada, oo uusan helin ama lagu lahayn qof kale.

5) Sida ay dhigayaan sharcigan qeybihiisa kale, macaamilka dhex mara amaanada iyo amaana-hayayaasha ama ka faaidaystayaasha waa la aqoonsanayaa.

6) Marka la raaco ujeedooyinka Qodobkan, amaano waxa ay khuseysaa amaano haye sida isagoo ah "wakiilka kaliya" marka uu amaanohayuhu gacanta ku hayo hanti amaano waajibaadkiisuna uusan ahayn wax ka baxsan ku wareejinta hantidaasi ka-faaidaystaha marka uu ka dalbado iyo in uu ka yeelo hantidaasi sida uu ka faaiidaystuhu ku amro.

Qodob 59-aad
Canshuurta Ka-faaiidaystayaasha[61]

1) Qaybinta:

- b) amaano Dalka degaan ku ah waa laga dhaafayaa canshuurta marka ay ku jirto gacanta ka faa'iideystayaasha amaanada;

[60] Taxation of Trusts.

[61] Taxation of Beneficiaries.

t) amaano Dalka degaan ku aheyn waa lagu darayaa xisaabinta dakhliga kafaaidaystayaasha amaanada.

2) Xubinnimada ka faaiidaystaha:

b) ee amaano Dalka degaan ku ah waa hanti canshuurta laga dhaafay, korodhka iyo khasaaraha ka dhasha ka kaaftoomiddeedana lama aqoonsanayo;

t) ee amaano Dalka degaan ku aheyn, ma aha hanti canshuurta laga dhaafay, korodhka iyo khasaaraha ka dhasha ka kaaftoomiddeedana waxa lagu daryaa xisaabinta dakhliga ka-faaidaystaha.

QAYBTA III
SHIRKADAHA[62]

Qodob 60-aad
Canshuurta Shirkadaha[63]

1) Shirkad waxaa ku waajibtay canshuur si ka gooni ah saamilaydeeda.

2) Qadarta lacag iyo kharashaad si wada jir ah ay u heleen ama u galeen maareeyayaasha ama saamilayda u jeedada shirkad aan lahayn shakhsiyad sharci oo gaar ah (eeg Qodobka 3(2)(j)(i)(T))) waxaa loola dhaqmayaa in lacagta ama kharash ay heshay ama gashay shirkadda, ee uusan helin ama gelin shakhsi kale.

3) Hantida iyo qaanta si wadajir ama guud ah ay u leeyihiin ama loogu leeyahay maareeyayaasha ama saamilayda ujeeddada shirkad aan lahayn shakhsiyad sharci oo gaar ah (eeg qodobka 3(2)(j)(i)(T)) waxa loola dhaqmayaa in ay leedahay ama lagu leeyahay shirkadda, oo uusan helin ama gelin shakhsi kale.

4) Iyadoo la raacayo Sharcigan intiisa kale, macaamilka dhex mara shirkad iyo maareeyayaasheeda ama saamilaydeeda waa la aqoonsanayaa.

5) Haddii uu jiro ganacsi wadaag ah (joint venture), dhammaan ka qayb-galayaasha ganacsigan wadaagga ah waxaa waajib ku ah inay u fuliyaan ganacsiga wadaagga ah iyagoo adeegsanaaya shirkad la diiwangeliyay, oo leh shakhsiyada khaanuuneed.

[62] Corporations.

[63] Taxation of Corporations.

Qodob 61-aad
Canshuurta Saamilayda[64]

1) Faa'ido saami:

b) ay shirkad Dalka degaan ku ahi u qaybisay:

i) shirkad kale oo dalka dagan canshuurta waa laga dhaafayaa haddii shirkada kale ay ugu yaraan leedahay 12.5% ama ka badan ee saamiga shirkadda, walibana ay xukunto ugu yaraan 12.5% ee xuquuqda codaynta ee shirkadda qaybinaysa faa'iidada;

ii) shakhsi dalka dagaan ku ah ama shakhsi Dalka degaan ku aheyn waa la canshuurayaa ayadoo la sameynayo canshuur ka-reebid kama dambays ah;

iii) faa'iidada saamiga oo ay kasbato shirkada deegaanka ama shakhsi degaan ah, taasoo ka timaada saamiga lagu leeyahay shirkada deegaan ah laguma soo rogaayo canshuur kale oo dheeraad ah; iyo

t) ay qaybisay shirkad Dalka degaan ku aheyn waxaa lagu darayaa xisaabinta dakhliga saamilayda.

2) Saamiga shirkad:

b) haddii ay qeyb weyn ku leedahay shirkad Dalka degaan ku ah shirkad kale oo iyaduna dalka degaan ku ah, waa loo canshuur dhaafayaa hantida, korodhka iyo khasaaraha laga helay saamiga laga kaaftoomyna lama aqoonsanayo;

t) haddii kale, lama canshuur dhaafayo hantida, korodhka ka yimaada ka kaaftoomidda saamiyadana waxa lagu darayaa xisaabinta dakhliga saamilayda.

3) Qodobkan gudihiisa, "qeyb weyn ku lahaansho " ee waqti gaar ah macneheedu waa lahaanshaha saamiyada shirkad (shirkadda laga hadlayo) ee ay shirkad kale leedahay halka:

b) lahaanshuhu uu yahay:

i) labaatan iyo shan (25) boqolkiiba ama in ka badan ee qiimaha saamiyada shirkadda laga hadlayo, marka laga reebo saamiyada la soo ceshan karo; oo lagu daro

[64] Taxation of Shareholders.

ii) koontarool, si toos ah ama si dadbanba, boqolkiiba labaatan iyo shan (25) ama in ka badan awoodda codbixinta ee shirkadda laga hadlayo; iyo

t) in heerka lahaanshahana si joogto ah u jiray muddo 365 maalmood ah.

QAYBTA IV
QODOBADA GUUD EE KHUSEEYA HAY'ADAHA[65]

Qodob 62-aad
Macaamilka Hantiyeed ee u Dhaxeeya Hay'adaha iyo Xubnaha[66]

1. Iyadoo la raacayo qodobka 46aad (wareejinta u dhexeeya dadka is leh), hadii hanti laga kaaftoomey hay'ad ganacsi ku wareejineyso xubnaheeda ama ay xubini ku wareejinayso hayad ganacsi:

b) wareejiyaha waxa loola dhaqmayaa in uu helay lacagta ka kaaftoomidda oo udhiganta qiimaha suuqa ee hantidu ka joogto waxyar ka hor waqtiga ka kaaftoomidda;

t) loo wareejiyaha waxa loola dhaqmayaa in uu galay kharashaadka lagu sheegay farqadda (b) ee hanashada hantidaa.

Qodob 63-aad
Isbedelka Lahaanshaha[67]

1) Haddii lahaanshaha asaasiga ah ee hayad ganacsi isbadalo in ka badan boqolkiiba 50 marka loo barbardhigo siduu ahaa wakhti kasta ee saddexdii sanadood ee lasoo dhaafay ("isbadal lahaansho"), hayadda ganacsi waxa loola dhaqmayaa in ay ka kaaftoomtay dhammaan hantideedii iyo qaanteedii eey laheyd waxyar ka hor isbadalka.

3) Isbadalka lahaanshaha kadib, hayadda ganacsi looma ogola in ay:

b) ka goyso faa'idada daynta ama qaddar lacageed ee laga soo raray sandihii hore ee ku qeexan Qodobada 18(3) ama 22(2), kuwaas oo ay markii hore gashay hayadda ka hor isbadalka;

t) goyso khasaaraha ku xusan Qodobka 23(1) ama 24(1) kaas oo ay gashay hayadda ka hor isbadalka; ama

---

[65] General Provisions Applicable to Entities.

[66] Asset Dealings between Entities and Members.

[67] Change of Ownership.

j) haddii ay dhacdo in hay'adda, ka hor isbeddelka, ay qadar lacageed ku dartay xisaabinta dakhlikeeda ayadoo raaceysa Qodobka 28 (4) ama 29(2) ama (4) iyo (5), looma ogola in ay dib usoo sheegato lacagaha la gooyay sida ay dhigayaan qodobadaas ka dib isbadalka.

4) Haddii uu hey'adda isbadal lahaansho ka dhaco sanad canshuureedka gudihiisa, qaybaha sanadka ee ka horreeya isbadalka iyo kawa ka dambeeya isbadalka waxa loola dhaqmayaa sida sanado canshuureed kala madaxbannaan.

5) Qodobkani laguma dabaqayo shuraakada ama shirkad:

b) haddii qiimaha suuqa ee hantideeda ra'sumaal iyo hantideeda qiimodhacda aysan waqtiga isbedelka ka badnayn $400,000;

t) isbedelka lahaanshaha kadib, hawlaheeda ganacsi ku qabsaneysa wax ka badan boqolkiiba sideetan (80) isla hantidii (oo lagu saleeyay qiimaha suuqa) ay haysatay muddadii 12ka bilood ahayd ee ka horraysay isbadalka; iyo

j) Haddii hawl ku qabsashada lagu soo sheegay faqradda (b) ay socoto muddo laba sanadood ah oo ka dambaysay isbadalka.

CUTUBKA VII
HAWLAHA GAARKA AH[68]

QAYBTA I
HOWLAHA QODISTA MACDANTA IYO SHIDAALKA[69]

Qodob 64-aad
Dhaqangalinta Sharciga Lagu Hagayo Nidaam Maaliyadeedka Kheyraadka Dhulka Hoostiisa[70]

Sharcigani laguma maamulaayo howlaha khayraadka dhulka laga qodo, waxaase maamulaya oo lagu dabaqayaa hawlahaas sida uu dhigayo Sharciga Lagu Hagayo Nidaam Maaliyadeedka Kheyraadka Dhulka Hoostiisa (Sharci Lr.10 ee Maarso 2023).

QAYBTA II
BANGIYADA IYO CEYMISKA

[68] Special Activities.

[69] Extractive Industries.

[70] Application of the Extractive Industries Fiscal Regime Law.

Qodob 65-aad
Ganacsiga Bankiyada[71]

1) Qodobkani wuxuu wax ka badalayaa sidii xeerarka caadiga ee uu sharcigani dejiyay loogu fulin lahaa shakhsiga sameynaya ganacsi bangi. Meelaha aan waxba laga beddelin, xeerarka caadiga ah ayaa lagu fulinayaa.

2) Ujeeddooyinka Sharcigani:

b) hawlaha qofka ee samaynta ganacsi bangi waxa loola dhaqmayaa in uu yahay ganacsi ka duwan hawl kasta oo kale ee uu shakhsi qabto;

t) dakhliga ama khasaaraha shakhsi ka soo gaara ganacsiga bangiga sanad canshuureed waxa loo xisaabinayaa si gaar ah; iyo

j) amaahyada loo bixiyo sida caadiga ah ee ganacsiga bangiyada waxaa loo aqoonsanayaa in ay yihiin hanti hadda u taalla bankiga (current asset) taasi oo la mid noqoneysa badeecada ganacsiga.

3) Si waafaqsan Qodobka 19-aad, marka la xisaabinayo dakhliga qofka ka soo gala ganacsiga bangiyada sanad canshuureed, waa in uu qofku raacaa xeerarka khuseeya ee uu Bankiga Dhexe ee Soomaaliya u dejiyay amaahda aan hawl-galka ahayn (non-performing loans), oo ay ka mid yihiin:

b) in laga gooyo qiimo dhaca (write downs) amaahda aan hawl-galka lahayn;

t) in lagu daro dakhliga wax ku darid kasta oo la xiriirta qiimo dhacyadaas.

Haddii lacag goyn ama ku darid la sameeyo, qiimaha amaahda aan hawl-galka ahayn waa in dib loogu hagaajiyaa qiimiha la saxay.

4) Xadaynta Qodobka 22(1) (kala xirxiridda aladaha maaliyadeed) laguma dabaqayo deynta la helay ama dayn la galey mudadii ganacsiga bankiga la samaynayay.

5) Haddii qofka samaynaya ganacsi bangi uu tiro deynta isagoo u aqoonsanaya deyn aan soo xarooneynin marka la eego xeerarka khuseeya ee uu dejiyay Bangiga Dhexe ee Soomaaliya:

b) qofka waxaa loola dhaqmaa in uu ka kaaftoomey daynta;

---

[71] Banking Business.

t) waxa uu codsan karaa lacag goyn waafaqsan Qodobka 21-aad (khasaaraha hantida ra'sumaalka) ama 29-aad (dib u dejinta xisaab lacageed), hadba sida ay xaaladdu u baahato.

6) Qodobkan dhexdiisa, ganacsi bangi waxa loola jeedaa ganacsiga haya'd maaliyadeed oo qabata hawlo bangi oo uu u fasaxay Sharciga Haya'daha Maaliyadda.

Qodob 66-aad
Ganacsiga Caymiska Guud[72]

1) Qodobkani wuxuu wax ka badalayaa sidii xeerarka caadiga ee uu sharcigani dejiyay loogu fulin lahaa shakhsiga sameynaya ceymis guud. Meelaha aan waxba la beddelin, xeerarka caadiga ah ayaa la fulinayaa.

2) Si loo gaaro ujeedooyinka Sharcigan:

b) hawlaha qofka ee samaynta ganacsi ceymis guud waxa loola dhaqmayaa in uu yahay ganacsi ka duwan hawl kasta oo kale ee uu shakhsi qabto;

t) dakhliga ama khasaaraha qofka uga yimaada ganacsiga caymiska guud ee sanad canshuureed waxaa loo xisaabinayaa si gaar ah.

3) Marka la xisaabinayo dakhliga qofka ka soo gala ganacsiga caymiska guud ee sanadka canshuureed, waxa lagu darayaa kuwan soo socda (iyo qaddarta kale ee lacageed ee sharcigani waajibiyo in lagu daro):

b) premium-ka uu caymiyuhu helo sanadka gudihiisa (oo uu ku jiro dib-u- caymiye) marka uu qabanayo ganacsiga; iyo

t) dheefta ceymiska sanadka gudihiisa uu qofku ka helo sida heshiis kasta oo dib-u-caymin oo daboolaya khataraha qandaraasyada caymiska ama dib-u-caymiska la sameeyay.

4) Iyada oo la raacayo qodobka 16aad (xadidaadaha lacag goynta), marka la xisaabinayo dakhliga qofka ka soo gala ganacsiga ceymiska guud sanad canshuureedka, waxa laga goynayaa kuwan soo socda (iyo qaddartii kale ee lacageed ee uu sharcigani waajibiyo in la gooyo):

b) kharashka dheefta caymiska (proceeds) ee uu qofku sanadka gudihiisa u bixiyay ceymiye ahaan (oo ay ku jirto dib-u- caymiye ahaan) marka uu qabanayo ganacsiga; iyo

---

[72] General Insurance Business.

t) kharashka lacagaha (premiums) uu qofku sanadka dhexdiisa ku bixiyey heshiis kasta oo dib-u-caymin ah oo daboolaya khataraha qandaraasyada caymiska ama dib-u-cayminta.

5) Sida ku cad ujeeddooyinka Qodobka 28-aad (Hab xisaabeedka muteysashada), kharashka qaddarta dheefta lacagaha caymiska ee uu shakhsigu ku galay caymiye guud ahaan waa in la bixiyo (sidaas darteed waxaa laga yaabaa in waxka jarid uu ka helo firqadda (4) (b) ee Qodobkan) goorta iyo ilaa xadka:

b) ay dhacaan dhammaan dhacdooyinka go'aaminaya qaanta;

t) lacagaha dheefta caymiska la goyn karo si waafaqsan nidaamka xisaabaadka ee si guud loo wada ogol yahay (GAAP).

6) Wax lacag goyn ah looma samaynayo khatar kasta oo aan waqti-dhicin (unexpired risks) ama kayd kale oo ku saabsan ganacsiga caymiska guud.

7) Qodobkan dhexdiisa, "caymis guud" waxa loola jeedaa caymis kasta oo aan ahayn caymis mudo dheer ah.

Qodob 67-aad
Caymiska Mudada Dheer[73]

1) Qodobkani wuxuu wax ka badalayaa sidii xeerarka caadiga ee uu sharcigani dejiyay loogu fulin lahaa shakhsiga sameynaya ceymis muddo dheer soconaya. Meelaha aan waxba laga beddelin, xeerarka caadiga ah ayaa la fulinayaa.

2) Ujeeddooyinka Sharcigan:

b) hawlaha qofka ka ganacsanaya caymiska muddada dheer waxaa loola dhaqmaa in uu yahay ganacsi ka duwan hawl kasta oo kale ee uu qofku qabto;

t) dakhliga ama khasaaraha qofka sanad canshuureedka ka soo gala ganacsiga caymiska mudada dheer waxaa loo xisaabinayaa si gaar ah.

3) Marka la xisaabinayo dakhliga qofka sannadka canshuureed ka soo gala ganacsiga caymiska muddada dheer, kuwan soo socda waa laga saaray mana aha qaddar lacageed dheefa oo laga helay hanti ama qaan toona:

[73] Long term Insurance Business.

b) lacagaha (premium) uu caymis ahaan u helo caymiyuhu (oo ay ku jirto dib-u-caymiye ahaan) marka uu qabanayo ganacsiga; iyo

t) dheefta ceymiska uu qofku ka helo sida heshiis kasta oo dib-u-caymin oo daboolaya khataraha qandaraasyada caymiska ama dib-u-caymiska la sameeyay.

4) Marka la xisaabinayo dakhliga qofka ee sannadka canshuureed ka soo gala ganacsiga caymiska muddada dheer, kuwan soo socda lagama goynayo, loogumana darayo qiimaha hantida ama qaanta:

b) dheefta caymiska uu qofku u galay caymiye ahaan (ay ku jirto dib-u- caymiye ahaan);

t) lacagaha (premiums) uu qof u galay qandaraas kasta oo dib-u-caymis oo daboolaya khataraha qandaraasyada caymiska ama dib-u-caymiska.

Qodob 68-aad
Lacagta dheefta Caymiska[74]

1) Si waafaqsan farqadda (2) iyo Qodobada 66aad (caymiska guud) iyo 67aad (caymiska muddada dheer), marka la xisaabinayo dakhliga shakhsi uu ka helay, sida loola dhaqmayo dheefta caymiska uu qof helay waxa go'aaminaya Qodobka 35aad (magdhowga).

2) Si waafaqsan Qodobada 66aad (caymiska guud) iyo 67aad (caymiska muddada dheer), lacagata dheefta caymiska mudada dheer ee la siiyo la-ceymiyaha ama haddii uu la-ceymiyuhu dhinto qaraabadiisa:

b) haddii uu dheefta ceymiska bixiyo ceymiye dalka deegaan ku ah, canshuurta waa laga dhaafyaa la-ceymiyaha;

t) haddii uu dheefta ceymiska bixiyo caymiye Dalka degaan ku aheyn, waxaa lagu darayaa xisaabinta dakhliga la-ceymiyaha laakiin waa kaliya marka uu la-caymiyuhu korodh ka helo caymiska muddada dheer.

3) Qodobkan dhexdiisa, "korodhka uu la-ceymiyuhu ka helayo caymiska muddada dheer" waxa loola jeedaa ilaa inta lacagta dheefta uu la-ceymiyaha muddada dheer helayo ay ka badan tahay lacagta (premium) caymiyaha loo siiyo caymiska.

QAYB III
KAYDKA HAWLGABKA[75]

---

[74] Insurance Proceeds.

[75] Retirement Savings.

Qodob 69-aad
Sanduuqa Hawlgabka ee la Aqoonsaday[76]

1) Xeer nidaamiyayaal uu soo saaro Wasiirka ayaa qeexi qodobada iyo shuruudaha ay Wasaaraddu ugu aqoonsanayso sanduuqa hawlgab oo dalka deegaan ku ah in uu yahay sanduuq hawlgab la aqoonsaday.

2) Wasaaraddu waxa ay ku aqoonsanaysaa sanduuq howlgab qoraal ahaan iyadoo raacaysa Qodobka 13-aad ee Sharciga Maamulka Dakhliga (Sharci Lr. 13 ee 27 Oktoobar 2019) kaas oo tibaaxaya in sanduuqu uu waafaqsanyahey shuruudaha ay asteeyeen xeernidaamiyaasha lagu xusay farqadda (1).

3) Liiltirka shaqaalaha Dowladda iyo xuquuqda shaqa ka tegista ee shaqaalaha ee lagu aasaasay sharciga liiltirka shaqaalaha rayidka iyo liiltirka ciidanka ee lagu aasaasay sharciga liiltirka ciidanka waa sanduuqyo hawlgab oo la aqoonsanyahay. Xeer nidaamiyeyaal ayaa gaar u tilmaamaya sanduuqyo kale oo hawlgab in ay yihiin sanduuqyo hawlgab la aqoonsaday.

Qodob 70-aad
Qaaraanka Hawlgabka ee Sanduuqyada Hawlgabka La Aqoonsaday[77]

1) Shakhsiga dalka dagan waxa uu codsan karaa in xisaabinta dakhliga canshuurgalka ah ee sanad canshuureed laga dhimo qaaraanka uu ku bixiyo sanduuqa hawlgabka ee la aqoonsaday (eeg qodobka 10(2)). Qaaraanka waa in uu bixiyey:

b) shakhsiga; ama

t) loo shaqeeyaha, islamarkaasina qaaraanka lagu darayo xisaabinta dakhliga shakhsigu ka helo shaqada sida uu dhigayo Qodobka 12(3) (kh).

2) Dhimista uu qofku soo sheegan karo sanad canshuureed waa qaddarta tabaruca ama xadka sharciga ah, hadba kii yar . "Qaddarta sharciga" waa labada qaddar ee soo socota tooda weyn:

b) tabarucaadka qasabka ah ee uu sharciga ka rabo inuu shakhsigu ama loo shaqeeyuhu bixiyo muddada sanadka gudihiisa ah; iyo

t) qaddarta la cayimay.

[76] Recognised Retirement Funds.

[77] Retirement Contributions to Recognised Retirement Funds.

Qodob 71-aad
Canshuurta Sanduuqyada Hawlgabka[78]

1) Qodobkani wuxuu wax ka badalayaa sidii xeerarka caadiga ee uu sharcigani dejiyay loogu fulin lahaa shakhsiga sameynaya sanduuqyada howlgabka. Meelaha aan waxba laga beddelin, xeerarka caadiga ah ayaa la fulinayaa.

2) Qaaraanka hawlgabka ee uu helo sanduuqa hawlgabku waa laga dhaafay canshuurta sidoo kalena looma aqoonsani karo dheef lacag ka dhalatey iib hanti ama qaan sanduuq.

3) Sanduuqa howlgabka qaaraanka uu bixiyo uma goyn karo kharash ahaan lagumana dari karo qiimaha (cost) hantida ama qaanta sanduuqa.

4) Dakhliga uu helo sanduuqa hawlgabku isaga oo ah sanduuq hawlgab la aqoonsaday waa la canshuur dhaafayaa.

5) Haddii sanduuqa hawlgabka ee la aqoonsanaa uu waayo aqoonsiga sanad canshuureedka gudihiisa,dakhliga canshuurgalka ah ee sanadka waxa lagu kordhinayaa qaddar u dhigan farqiga u dhexeeya labada qaddar ee soo socda:

b) wadarta lacagaha xiga ee la helay intii uu ahaa sanduuq la aqoonsan yahay:

i) dhammaan qaaraanka hawlgabka ee uu sanduuqa hawlgabku ka helo shakhsiyaad dalka deggan; iyo

ii) dakhliga canshuurgalka ah ee sanduuqa (ee la xisaabiyay iyadoo aan layska indha tirayo farqadda (4)), ee sanad canshuureed; oo laga gooyo

t) dhammaan lacag-bixinta hawlgab ee sanduuqa u siiyey shakhsiyaad deggan dalka intii uu ahaa sanduuq la aqoonsan yahay.

Qodob 72-aad
Lacagaha Hawlgab Ee Laga Bixiyay Sanduuqyada Hawlgabka[79]

1) Si loo xisaabiyo dakhli qof ee sanad canshuureed uu ka helo qaadhaankii u ku darsadeysanduuqa hawlgabka waa in:

b) lacagaha hawlgabka ee laga bixiyo sanduuqa hawlgabka ee la aqoonsan yahay ee laxiriirta qaadhaankii hore loogu darsadey waxa lagu darayaa dakhliga ka yimaaddaid maalgashiga;

---

[78] Taxation of Retirement Funds.

[79] Retirement Payments from Retirement Funds.

t) lacagaha hawlgabka ee laga helo sanduuq Dalka degaan ku ah oo aan la aqoonsaneyn taasi oo la xiriirta qaadhaankii hore loogu darsadey waa la canshuur dhaafay;

j) korodhka laga helo qaadhaankii hore loogu darsadey sanduuq howlgab Dalka degaan ku aheyn waxaa lagu darayaa dakhliga, laakiin haddi kale lacag-bixinta hawlgab iyada waa laga dhaafayaa canshuurta.

2) Qodobkan gudihiisa, "korodhka qaadhaankii hore loogu darsadey "ee sanduuqa hawlgabka waxa loola jeedaa xadka lacag-bixinta uu sanduuqu sameeyay ay ka badan tahay qaaraanka hawlgab ee sanduuqa lagu shubay.

QAYBTA IV
HAWLAHA DANTA GUUD, ISKAASHATADA IYO KUWA AAN FAA'IDO-DOONKA AHAYN[80]

Qodob 73-aad
Aqoonsiga Ururada Dadwayne ee aan Faaiido doonka ahayn[81]

1) Iyada oo la tixraacaayo Sharcigan, Wasaaraddu waxa ay u aqoonsan kartaa hayad ama urur inuu yahay mid aan faa'iido doon ahayn, iyad oo qoraal ahaan kusoo saaraysa sida uu dhigayo Qodobka 13-aad ee Sharciga Maamulka Dakhliga (Sharci Lr. 13 ee 27 Oktoobar 2019), walibana caddaynaysa in hay'adda ama ururku u hoggaansamo shuruudaha farqadda (2).

2) Shuruudaha looga baahanyahay waa:

b) in haya'ddu ay tahay mid si sharci ah, loogu aasaasay oo kaliya inay ka shaqayso "hawlo aan faaiido doon ahayn":

i) hay'ad danguud oo ka shaqaysa arrimo diini ah, hawlo khayri ah ama daryeel;

ii) hay'ad waxbarasho oo danguud ah; ama

iii) hay'ad danguud oo loo aasaasay ujeeddooyin dhaqan ama ciyaaro, taas oo buuxisay shuruudaha ay si gaar ah u dejiyaan xeer nidaamiyayaal; iyo

t) Haya'd leh distuur qoran oo ka reebaya:

[80] Public, Mutual and Non-profit Causes.

[81] Recognition of Public Non-profit Organisations.

i) hawlkasta oo aan ahayn tan sida gaarka loogu tilmaamay farqad hoosaadka (b); iyo

ii) bixinta dheef gaar ah, aan ka ahayn hawlaha aan faa'iido doonka ahayn ee ururka.

2) Sababo wanaagsan awgood, Wasaaraddy waxa ay kala noqon kartaa aqoonsiga lagu sheegay farqadda (1), oo ay ku jirto sababo ay ka mid tahay in hay'addu ay u dhaqmayso si aan waafaqsanayn shuruudaha lagu sheegay farqadda (2).

Qodob 74-aad
Canshuurta Ururada Dantaguud Ee Aan Faaiido Doonka Ahayn[82]

1) Qodobkani wuxuu wax ka badalayaa sidii xeerarka caadiga ee uu sharcigani dejiyay loogu fulin lahaa ururrada danta guud ee aan fa’ida doonka aheyn. Meelaha aan waxba laga beddelin, xeerarka caadiga ah ayaa la fulinayaa.

2) Si loo gaaro ujeedooyinka Sharcigan:

b) hawlaha ururka danta guud ee aan faa'iido doonka ahayn oo qabsada hawlihiisa gaarka ah ee aan faa'iido doonka ahayn waxaa loola dhaqmayaa in uu yahay ganacsi ("ganacsi aan faa'iido doon ahayn") kana baxsan hawl kasta oo kale oo ururka qabto;

t) dakhliga ama khasaaraha sanadka ee hawlaha ururka ee aan faa’iido doonka ahayn si gooni ah ayaa loo xisaabinayaa;

j) Qodobka 16(t) (ii) laguma dabaqayo hawlaha aan faaiido doonka ahayn ee ururka;

x) ganacsiga ururka aan faaiido doonka ahayn waxaa lagu dabaqayaa Qodobka 23aad iyadoo qeexitaanka ‘’khasaare’’ ee ku jira Qodobka 23 (4) (t), “sagaashan iyo shan (95) boqolkiiba” lagu badalayo “boqolkiiba boqol (100%)”.

3) Xisaabinta dakhliga ururka danta guud ka soo gala howlihiisa aan faiido doonka ahayn ee sanad canshuureed waxa ka mid ah kuwa soo socda (iyo qaddartii kale ee uu sharcigani ku soo daro):

b) dhammaan hadiyadihii iyo deeqihii uu ururku helay sanadka gudihiis;

t) dhammaan lacag-bixinihii aan ganacsiga ahayn ee uu sameeyay ururku sanadka gudihiisa.

[82] Taxation of Public Non-profit Organisations.

4) Xisaabinta dakhliga ka soo gala ururka danta guud howlihiisa aan faa'iida doonka aheyn ee sanad canshuureed waxa laga goynayaa waxyaalaha soo socda (iyo qaddartii kale ee sharcigan ogolaado in laga goyn karo):

b) qaddarkii la galay sanadka gudihiis (xataa kharashaadkii gaarka ahaa) ee ilaa xad si gaar ah loogu qabtay fulinta hawlihii aan faa'iido doonka ahayn ee ururka oo keliya; iyo

t) shan (5%) boqolkiiba dakhliga la saxay ee ururka ka soo galay hawlaha aan faa'iido doonka ahayn ee sanadka;

Iyadoo la raacayo in lacagaha la ogol yahay goyntooda ee farqad-hoosaadka (t) ee sanad canshuureedka waa in aysan ka badnaan dakhliga ururka ee la saxay ee ka yimid howlaha aan faa'iido doonka ahayn ee sanadka ka dib marka laga gooyo qaddarta lagu sheegay farqadda (b) ee sanadka.

5) Haddii ay hay'ad sii jirto ayadoo lumisey aqoonsigii urur danguud oo aan faa'iido doon ahayn:

b) qaybta sanad canshuureedka hore inta aanay lumin ahaanshaheeda urur u qalma dantaguud waxa loola dhaqmayaa sidii sannad canshuureed ka gooni ah ("sanadka ka hor inta eey lumin) qaybta dambe marka ay lumiso ahaanshaha danguud ("sanadka ka dib marka eey lumisey");

t) hay'adda waxaa loola dhaqmayaa in ay sii waddo ganacsi ka dib marka ay lumiso ahaanshaheeda mid danguud;sidoo kale

j) xisaabinta dakhliga hay'adda ee ganacsiga sanadka markii eey lumisey kadib waxa lagu darayaa:

i) dhammaan lacagaha la gooyan si waafaqsan farqadda (4)(t) ee sanadka lumisey ka hor iyo shantii sanad canshuureed ee hore; oo aan ka badnayn;
ii) qiimaha suuqa ee hantida saafiga ah ee hay'adda wakhtiga ay lumisey ahaanshaha mid danguud.

6) Qodobkan gudihiisa:

b) "dakhliga la saxay" ee urur danguud oo aan faa'iido doon ahayn ka sameeyo howlihiisa aan faaiido doonka ahayn sanad canshuureedka waa dakhlikiisa ganacsi ee sanadka:

i) oo loo xisaabiyay qaab caadi ah, lakiin

ii) meesha laga saarayo (aan la fulineyn) faqradaha (3) (t) and (4);

t) "lacag-bixin aan ganacsi ahayn" waxa loola jeedaa wax kasta oo uu bixiyo urur danguud ee aan faaiido doonka ahayn laakiin laga saaray:

i) qaddarta sanadka dhexdiisa loo galay in si gaar ah loogu qabto hawlaha aan faa'iido doonka ahayn ee ururka;

ii) lacagaha dhigaalka ah ee u yaalla bangi ama hay'ad maaliyadeed oo Dalka degaan ku ah ama xarun ganacsi Soomaaliya uga furan bangi ama hay'ad maaliyadeed oo Dalka degaan ku aheyn; ama

iii) lacagaha macquulka ah ee qof loo siiyo hanti ama adeeg uu ka iibiyay ururka;

j) "hawlaha aan faaiido doonka ahayn" ee urur danguud aan faa'iido doon ahayn waxa loola jeeda macnaha lagu qeexay Qodobka 73(2)(b).

Qodob 75-aad
Naadiyada iyo Ururada Ganacsi[83]

1) Qodobkani waxa uu la xiriiraa Qodobka 74aad. Wuxuuna wax ka badalayaa sidii xeerarka caadiga ee uu sharcigani dejiyay loogu fulin lahaa howlaha naadiyada, ururada ganacsi iyo kuwo la midka ah. Meelaha aan waxba la beddelin, xeerarka caadiga ah ayaa la fulinayaa.

2) Ururada ganacsi, naadiyada iyo kuwo la midka ah waxaa loola dhaqmayaa sida shirkad marka la raacayo ujeedooyinka sharcigan. Howlahoodana waxa loola dhaqmayaa sida hal ganacsi.

3) Marka la xisaabinayo urur ganacsi, naadi ama kuwo la mid ah dakhliga ka soo gala ganacsigooda sanad canshuureed, waxaa ku jira khidmadaha gelitaanka (xubinnimo), isdiiwaangelinta iyo qadarta kale ee laga qaaday xubnaha sannadka gudihiisa.

4) Naadi dalka degan ama hay'ad la mid ah oo u qalmi laheyd qaab-xisaabaadka caddaanka ah ee isku dhafan (eeg farqadda 3 ee Jadwalka Labaad) haddii ay ahaan laheyd shuraako, waxa ay isticmaali karaan nidaamka xisaabeedka cadaanka ee isku dhafan si ay u xisaabiyaan dakhlikiisa sanad canshuureedka.

5) Qodobkan gudihiisa:

b) "Xubin" waxa loo jeedaa:

[83] Trade Associations and Clubs.

i) haddii ay noqoto naadi ama hay’ad la mid ah, shakhsi:

B) xaq u leh inuu wax ka lahaado hantida naadiga ama hay'adda haddii laga kaaftoomo ;ama

B) xaq cod dhiibasho ku leh shirwaynaha naadiga ama ururka iyo;

ii) hadday noqoto urur ganacsi, shakhsi cod dhiibasho ku leh shirwaynaha ururka;

t) "Urur ganacsi":

i) waxa loola jeedaa urur shakhsiyaad iska diiwaangeliyay haya’dda ku shaqada leh:

B) kuwaas oo dhammaantood si keli keli ah ugu jira ganacsi;

T) loona dhisay ujeeddo guud oo ah ilaalinta ama sare u qaadidda danaha ganacsi ee shakhsiyaadka isku yimid; sidoo kale

ii) waxa soo galaya ururada ganacsi ee ka diiwaan gashan haya’daha ku shaqada leh.

Qodobka 76-aad
Qaaraanka iyo Sadaqada Lagu Bixiyo Wax Qiimo Leh[84]

1) Shakhsigu waxa uu codsan karaa in wax laga dhimo xisaabta dakhliga canshuur-gal ah ee sanad canshuureed oo u dhigma qaddarta wadarta tabarucaadadii iyo sadaqada uu ku bixiyay sanadka gudihiisa sababaha lagu ansixiyay Jadwalka Lixaad (eeg Qodob 10(2)).

2) Dhimista sabab gaar ah iyo wadarta qaddarta dhimista ee la heli karo sanad canshuureedka waxay ku kooban tahay qaddarta lagu sheegay Jadwalka Lixaad. Haddii tabarucaadka iyo sadaqadu ay ku dhacaan in ka badan hal sabab oo la oggolaaday, waxa lagu dabaqayaa kaliya sababta leh qaddarta sare.

3) Qaaranka shakhsiyaadka iyo shirkaduhu siiyaan hay’addo samafal ee Soomaaliyeed waxaa laga jaraayaa canshuurta, balse qadarka jaritaanka wuxuu ahaanaya mid la eg oo keliya 10% ee dakhliga la canshuuri karo iyo/ ama 10% faa’iidada saamiga.

CUTUBKA VIII
ARRIMAHA CAALAMIGA AH

QAYBTA I

[84] Contributions and Donations to Worthwhile Causes.

DEGGANAANSHO IYO ISHA DAKHLIGA[85]

Qodobka 77-aad
Shakhsiyaadka Dalka Deegaanka ku ah[86]

1) Shakhsigu waxa uu Dalka degaan ku yahay sanad canshuureed haddii shakhsigu uu-

b) hoy rasmi ah ku leeyahay Soomaaliya;

t) yahay muwaadin Soomaaliyeed, marka laga reebo haddii uu hoy rasmi ah ku lahayn meel Soomaaliya ka baxsan oo sanadka oo dhan uu joogi karo;

j) Soomaaliya joogo sanadka gudihiisa, joogitaankaasina ku mudeysanyahey muddo ama muddooyin u dhiganta 183 maalmood, ama ka badan wadar ahaan, 12kii bilood ee kastaba oo bilaabmaysa ama ku dhammaanaysa sannadka gudihiisa; ama

j) yahay shaqaale ama mas'uul ka tirsan Dowladda Federaalka ama Dowlad Goboleedyada Soomaaliya oo dalka dibadiisa shaqo loogu diro sanadka gudihiisa.

2) Shuraako Dalka iyey degaan ku yahey sanad canshuureedka haddii waqti ka mid ah sannadka uu wadaage deegaan ku yahay Soomaaliya.

3) Amaano Dalka iyey degaan ku tahey sanad canshuureed haddii:

b) ay ka hawl gasho ama lagu aasaasay Soomaaliya;

t) waqti sanadka ka mid ah uu amaano-hayaha deegaan ku yahey Soomaaliya; ama

j) waqti ka mid ah sanadka uu shakhsi deegaan ku ah Soomaaliya koontaroolo ama awood u lahaa koontaroolka go'aamada ammaanada, koontaroolkaasi ha noqdo:

i) mid uu kali ku yahay ama ay la wadaagaan shakhsiyaad kale ama

ii) mid toos ah ama uu u sii marayo hal ama hay'ado kale oo dhextaal ah.

4) Shirkadi Dalka iyey deegaan ku tahay sanad canshuureed haddii:

b) lagu shuraakoobay, lagu dhisay, lagu abaabulay ama lagu aasaasay Soomaaliya gudaheeda; ama

---

[85] Residence and Source.

[86] Resident Persons.

t) sanadka gudihiisa mar uun maamulkeedu ka howlgalo Soomaaliya.

Qodobka 78-aad
Badalashada Deganaashaha[87]

1) Shakhsiga sannad canshuureed Soomaaliya ku ahaa deegaan sababta qodobka 77(1) (j) oo keliya, oo aan Soomaaliya degaan ku aheyn sannad canshuureedkii ka horeeyay, waxa loo aqoonsanayaa in uuDalka degaan ku yahay keliya marka mudada 183 maalmoodka ahi u dhamaato. Haddiise, shakhsigu deganaa Soomaaliya sanad canshuureed waxaa loola dhaqmayaa in inuu dalka deganaa sanadka oo dhan.

2) Marka qof Dalka degaan ku aheyn uu ku noqdo Dalka degaan , qiimaha saafiga ah (cost) ee hantida uu haysto qofku ka hor inta uusan Dalka degaan ku noqonin waxay la mid tahay qiimaha suuqa ee hantida wakhtigaas. Xeerkani ma khuseeyo hantida gudaha ee qofku lahaa ka hor inta uusan Dalka degaan ku noqon.

3) Ka hor inta qof Dalka degaan ku ahaa uusan lumin degenaashihiisa dalka, qofka waxaa loola dhaqmayaa in uu ka kaaftoomaayo dhammaan hantida uu leeyahay (eeg Qodobka 47). Haddii uu qofku lumiyo deganaashihiisa bilowga sanad canshuureedka (eeg farqadda (1) ee Qodobkan), ka kaaftoomidda hantidu waxa lagu mudeynayaa wax yar ka hor dhamaadka sanad canshuureedkii hore. Ka kaaftoomiddani waa mid loogu talagaley in xisaabaadka cashuuraadka lagu saxo kaliya mana khuseeyso hantida gudaha ah ee qofku leeyahay kadib isla marka uu qofku lumiyo degenaanshaha. Markay ku habboonaato, Wasaaraddu waxa ay adeegsan kartaa awoodaha ku qoran Qodobada 39(4) iyo 49-aad ee Sharciga Maamulka Dakhliga (Sharci Lr. 13 ee 27 Oktoobar 2019) si loo dhaqan geliyo waajibka canshuureed ee ay farqaddani keentay.

Qodob 79-aad
Isha Dakhliga iyo Lacagaha[88]

1) Dakhliga shakhsiga uu ka helo shaqo, ganacsi ama maalgashi waa in si kala madax banana loo xisaabiyaa:

b) dakhliga ka yimid il Soomaaliya gudaheeda ah; iyo

t) dakhliga ka soo galay il dibadeed.

Sidaas oo kale, shakhsigu waa in uu u xisaabiyaa khasaaraha gudaha ee ganacsiga ama maalgashiga si ka madax banana khasaarada isha dibadeed (eeg Qodobka 85).

[87] Change of Residence.

[88] Source of Income and Payments.

2) Dakhliga waxaa laga helay il gudaha ah marka uu yahay noocyada soo socda:

b) lacagta lagu bixiyo shaqo ama khidmad adeeg:

i) laga qabtay gudaha Soomaaliya; ama

ii) lacagaha ay bixiso dawladda Federaalka ama Maamul Goboleedyada Soomaaliya;

t) kirada ama xaq u yeelashada adeegsiga xuquuqda lahaanshaha (royalty) ama isticmaalka hanti taala gudaha Soomaaliya;

j) faa'idada saami ee ay bixiso shirkad Dalka degaan ku ah ;

x) faa'idada daynta, xuquuqda lahaanshaha (royalty), khidmad adeeg farsamo, khidmadaha adeegyada dhijitaalka, dheefta caymiska muddada dheer iyolacagaha hawlgabka:

i) ee uu bixiyo shakhsi Dalka degaan ku ah, ee aan ahayn kharashka ganacsi dibada ku yaalla ; ama

ii) uu shakhsi Dalka degaan ku aheyn u bixiyay kharash ganacsi uu ka sameeyay xarun ganacsi gudaha ah;

kh) khidmada khayraadka dabiiciga ah ee lagala soo baxo Soomaaliya;

d) korodhka iyo qadarada kale ee lacagaha ah ee lagu daro dakhliga hantida ama qaanta gudaha;

r) lacagaha ceymiska ee premium iyo dheefta ceymiska khataraha ee Soomaaliya;

s) lacagaha uu helo shakhsi ka shaqeeya ganacsi gaadiid dhul, bad ama cir kana shaqeeya qaadista rakaabka, xamuul, fariimo ama hantida kale ee guurtada ah ee la taaban karo ee:

i) qaadidda rakaab u kala gooshaya ama xamuul, fariimo ama hantida kale ee guurtada ah ee la taaban karo oo u kala gooshaysa Soomaaliya oo aan aheyn kala wareejin rar /xamuul;

ii) kiraynta konteenarada iyo qalabka la xiriirta ee kaabaha u ah daabulka laguna sheegay farqad hoosaadka (i);

sh) lacagaha qof Dalka degaan ku ah ama shirkad oo xarun rasmi ah ku leh gudaha ay siiyaan shakhsi qabta ganacsiga gudbinta farriimaha ee waayarka, idaacadda, habka

obtikalka ama satelayd ama war isgaadhsiin electaroonik ah oo farriimaha lagu gudbinayo qalab ku rakiban Soomaaliya gudaheeda, farriimahaaasi asal ahaan haka yimaadaan Soomaaliya ama yeysan ka imaanin;

dh) haddiyadaha ama lacagaha maamuuska loo bixiyo ee laga helo hanti ama qaan gudaha ah ama hawl laga qabtay gudaha Soomaaliya;

c) qaddarta magdhowga ee ku xusan Qodobka 35-aad marka ay magdhowga ishiisu tahay Soomaaliya.

3) Lacagta waxa ay sidoo kale il gudaha ah leedahay haddii:

b) lagu qabanayo arimaha lagu sheegay farqadda (2); ama

t) laga helayo lacagaha lagu sheegay faqradda (2).

4) Haddii heshiis caalami ah uu Soomaaliya u oggolaado soo rogidda canshuurta dakhliga (haddii si toos ah loogu daro dakhliga ama si aan toos ahayn haddii loo diido in laga jaro) laguna saleeyo si aan aheyn deganaasho, xeernidaamiye ayaa qeexi kara soo rogidaasi oo ay ku jirto sida loola macaamilayo lacagaha laga helo il gudaha ah.

5) Qaddar lacageed waxaa laga helay il dibadda ah haddii eeysaan laheyn il gudaha Soomaaliya ah.

QAYBTA II
GANACSIYADA JOOGTADA AH[89]

Qodobka 80-aad
Ganacsiyada Joogtada ah iyo Mulkiilayaashooda[90]

Sharcigani waxa uu aqoonsanayaa laba nooc xarun ganacsi joogto ah:

1) "Xarun ganacsi joogto ah ee Soomaaliya", oo:

b) loola jeedo meel cayiman oo uu shakhsi Dalka degaan ku aheyn uu ganacsi ku sameynayo ama uu awood u leeyahay inuu ujeedadaasi ka fuliyo;

t) waxa ka mid noqonaya kuwa hawshu Soomaaliya uga muddo 90 maalmood ama ka badan muddo 12 bilood kasta:

[89] Permanent Establishments.

[90] Permanent Establishments and their Owners.

i) goob Soomaaliya gudaheeda ah oo uu qof Dalka degaan ku aheyn ku haysto, ku isticmaalayo ama ku rakibanayo qalab ama mashiinno ganacsiga muhiiim u ah;

ii) goob Soomaaliya gudaheeda ah oo uu qof Dalka degaan ku aheyn uu kaga shaqaynayo dhismo, mashruuc xirxir ama rakibid oo ay ku jirto goob uu ku samaynayo hawlaha korjoogteynta ee la xiriira mashruuca;

iii) goob Soomaaliya gudaheeda ah wakiil uu hawl ugu qabanayo ganacsiga shakhsi uu wakiil ka yahay oo Dalka degaan ku aheyn-

B) oo ay ku jiraan, xaaladaha caymis ganacsi, ururinta khidmadaha ceymiska ama caymiska khataraha ka jira Soomaaliya;

T) marka laga reebo xaalada wakiil madax-banaan oo qabanaya howlaha ganacsiga oo noocaasi ah, wakiilku ma madax banana haddii uu wakiilku u dhow yahay qofka deganaha aheyn ama uu si gaar u matalo qofka deganaha aheyn iyo deganaha aheyn qof u dhow;

Si loo go’aamiyo mudada 90 maalmood, waxaa la tirinayaa wixii hawlo ah ee qofka u dhow shakhsiga deegaan aheyn uu ka qabtay Soomaaliya gudaheeda mudadii 12 biloodka aheyd;

2) "Xarun ganacsi ee ajnabi", oo loola jeedo goob cayiman oo ganacsi shakhsi Dalka degaan ku ah ku leeyahay dal shisheeye halkaasoo uu ganacsigu si joogto uga shaqeynayey ugu yaraan lix bilood, laakiin kuma jiraan goob kasta oo lagu qabto howlaha diyaarinta (preparatory) ama caawinta (auxiliary) ee ganacsiga.

3) "Milkiilaha" xarun gancasiga joogto ahi waa shakhsiga qabanaya ganacsiga ay xarunta joogtda ahi ay qeybta ka tahay.

Qodob 81-aad
Mabaadi’ida Canshuurta

1) Marka dakhliga shakhsiga ee kasoo gala ganacsiga la xisaabinayo:

b) hawlaha xarunta joogtada ah waxa loola dhaqmaa in ay yihiin ganacsi madax banaan, shakhsiguna waa in uu xisaabaadka ganacsigaasi u diyaariyaa si ka gaar ah hawl kasta oo kale ee uu shakhsigu qabtay;

t) shakhsiguna waa inuu dakhliga ama khasaaraha ganacsiga gaarka ahi xisaabiyaa sanad canshuureed kasta.

2) Dakhliga iyo khasaaraha xarun ganacsi Soomaaliyeed waxaa loo xisaabinayaa isla si la mid ah shirkad Dalka degaan ku ah, iyada oo aan loo eegayn in milkiiluhu dalka deegaan

ku aheyn ama uu yahay shakhsi, shuraako, amaano ama shirkad. Milkiiluhu waxa uu qaadayaa mas'uuliyadda, tani waxa loola jeedaa xarun ganacsi Soomaaliyeed waa in:

b) ay si milkiilaha ka gaar ah u bixisaa canshuurta lagu qeexay qodobka 9 (1) (b) (dakhliga canshuurgalka ah) iyo (t) (lacagta laga reebayo ee kama dambaysta ah);

t) uu canshuurta ka reebaa lacagaha ay bixiso si la mid ah duruufaha shirkad Dalka degaan ku ah;

j) ay canshuurta ku bixisaa si qeyb-qeyb ama qiimeyn ah isla sida shirkad Dalka degaan ku ah;

x) canshuur ka bixisaa dakhlikeeda dibada ka yimaada sida ku cad Qodobka 9 (1) (j) kaasoo:

i) dheeraad ku noqonaya dakhliga canshuurgalka ah;

ii) laguna bixinayo qeyb-qeyb iyo qiimeynsida ku cad Cutubka IX si la mid ah canshuurta dakhliga canshuur galka ah.

3) Dakhliga ama khasaaraha xarun ganacsi joogta ah ee dibadeed waxaa loo qoondeeyay milkiilaheeda dalka deeganka ku ah waxay na sii haysaneysaa sifadeeda sida nooca iyo isha. Tan waxa loola jeedaa xarunta ganacsi ee dibada waajib kuma aha iney canshuur ku bixiso Qodobka 9(1) (b) ama (t), xaqna uma laha canshuur celin la xiriirta dakhliga ka goonida ah milkiilaheeda.

4) Marka arrimaha soo socda laga reebo, macaamilka dhex mara xarun ganacsi joogta ah iyo milkiilayaasheeda lama aqoonsanayo. Arimaha la reebay:

b) halka ganacsi bangi oo leh macnaha Qodobka 65-aad uu shakhsi Dalka degaan ku aheyn ka fulinayo xarun ganacsi gudaha ah:

i) dayn bixin u dhexaysa mulkiilaha iyo xarunta joogtada ah ama xarunta joogtada ah iyo mulkiilaha;

ii) lacagta laga helay ama loo galay daynta ee lagu sheegay farqad hoosaadka (i),

waa haddii xarunta joogtada ah ee ganacsi ay ogolaansho qoraal ah ka hesho Wasaaradda, kasoo tilmaamaya in farqaddani la dabaqyo islamarkaasina arimaha sare ku xusan lagu sameeyay xisaabta milkiilaha iyo xarunta ganacsi; iyo

t) macaamilkuna yahay helid iyo ka kaaftoomid sida ku cad qodobka 82(5).

5) Marka farqadda (4) (b) la dabaqayo:

b) wax dayn la galey ah oo uu mulkiiluhu u galay shakhsi kale looma nisbeyn karo xarunta joogtada ah ee Soomaliya sida ku cad Qodobka 82;

t) faa'idada daynta ee loola dhaqmay inay gashay xarunta joogtada ah ee Soomaliya waxa laga rabaa canshuur ka reebid sida uu dhigayo Qeybta II ee cutubka IX.

6) Xeerarka beeca eexda ah ee ku cad Qodobka 37-aad ayaa lagu dabaqayaa arimaha lagu caddeeyay farqadda (4)(b) iyo (t) iyadoo laga soo qaadayo in xarunta ganacsiga iyo milkiilaheedu ay kala gaar yihiin inkastoo ay isleeyihiin.

Qodobka 82-aad
Hawlaha, Hantida iyo Qaanta Xarunta Ganacsi ee Joogtada ah[91]

1) Hawlaha xarunta ganacsiga ee joogtada ah waa howlaha uu mulkiiluhu qabtay isaga oo adeegsanaya xarunta joogtada ah. Waxa intaasi dheer, hawlaha soo socda ayaa loola dhaqmayaa inay qabatay xarunta joogtada ah ee gudaha Soomaliya (laakin ma aysan qabanin xarun joogta ah ee dibadda):

b) shaqaaleynta mulkiilaha ee shakhsi kasta oo degan Somaaliya;

t) iibinta mulkiilaha ama qof u dhow ee badeeco ganacsi taasi oo la mid ah kuwa la iibiyay iyadoo la adeegsanayo xarunta joogtada ah;

j) hawlaha kale ee ganacsi ee mulkiilaha ama qof u dhow ee laga fuliyo Soomaaliya si la mid ah kuwa la fuliyay iyadoo la adeegsanayo xarunta joogtada ah.

2) Hantida iyo qaanta xarunta joogtada ah waa kuwa ay leedahay ama lagu leeyahay milkiilaha ahna:

b) hantida ay leedahay ama loo isticmaalay howlaha xarunta joogtada ah;

t) hantida aan la taaban karin ee ay abuurtay ama lagu abuuray xarunta joogtada ah;

j) marka ay tahay xarunta joogtada ah, hantida aan la taaban karin ee lagu isticmaala gudaha Soomaaliya;

x) si waafaqsan Qodobka 81(5) (ganacsiga baangiyada), daynta bislaatay ee loo galay lacag amaahashada, loona galay hawlaha xarunta joogtada ah ama loo loo galay in lagu hanto hantida lagu tilmaamay farqadda (b);

[91] Activities, Assets and Liabilities of a Permanent Establishment.

kh) qaanta kale ee toos uga dhalaneysa hawlaha xarunta joogtada ah.

3) Xarunta joogtada ah waxa loola dhaqmayaa in ay yeelaneyso hanti ama qaan marka hantidaa iyo qaantaasi ay noqdaan hanti ama qaan ay leedahay xarunta joogtada ah.

4) Waxa raaca duruufaha ay si gaar u tilmaameen Qodobada 43-aad and 44-aad (ka kaaftoomidda hantida iyo qaanta), xarunta joogtada ah waxa loola dhaqmaa inay ka kaaftoomeyso hanti ay laheyd ama qaan lagu lahaa markay hantidaasi ama qaantaasi ay kabaxaa mid ay leedahay ama lagu leeyahay xarunta joogtada ah.

5) Si waafaqsan farqaddaha (3) iyo (4), wareejinta hanti ama qaan:

b) uu milkiiluhu ku wareejinayo xarunta joogtada ah waxa loola dhaqmayaa ka kaaftoomid hanti dhinaca milkiilaha iyo helid hanti dhinaca xarunta joogtada ah;

t) ay xarunta joogtada ah ku wareejineyso milkiilaha waxa loola dhaqmayaa inay ka tahay ka kaaftoomid hanti dhinaca xarunta joogtada ah iyo helid hanti dhinaca milkiilaha.

6) Si waafaqsan faqraddaha (4) iyo (5) (t), haddii ay xarunta joogtada ah joojiso sii jiritaankeeda:

b) waxa loola dhaqmayaa inay ka kaaftoomtay dhammaan hantidii iyo qaantii kuna wareejisay milkiilaha;

t) milkiiluha ayaa keligii qaadaya mas'uuliyadda dhamaan waajibaadka canshuureed ee taagan iyo tan mustaqbalka ee xarunta joogtada ah, iyadoo marka ay habboontahay, Wasaaraddu ay adeegsan karto awoodaha ku cad Qodobada 39(4) and 49-aad ee Sharciga Maamulka Dakhliga (Sharci No. 13 ee 27 October 2019).

Qodobka 83-aad
Dakhliga ama Khasaaraha Xarunta Joogtada ah[92]

1) Qodobkani waxa uu wax ka badal ku samaynayaa xeerarkii caadiga ahaa ee sharcigan ee lagu dabaqayay xisaabinta dakhliga ama khasaaraha xarunta joogtada ah. Marka uusan wax ka badal jirin, xeerarka caadiga ah ayaa la dabaqayaa.

2) Marka la xisaabinayo dakhliga iyo khasaaraha ee ganacsiga xarunta joogtada ah, waxaa loo nisbeynayaa xarunta joogtada ah:

[92] Income or Loss of a Permanent Establishment.

b) qadarta lacageed ee laga helay hantida ay leedahay, qaanta lagu leeyahay ama hawlaha xarunta joogtada ah;

t) kharashaadka la galay iyo lacagaha loo bixiyay ujeedooyinka hantida ay leedahay, qaanta lagu leeyahay ama hawlaha xarunta joogtada ah, laakiin kaliya ilaa inta kharashaadka si sax ah loogu qoray xisaabta xarunta joogtada ah.

Qodobka 84-aad
Dakhliga Dibada Kasoo Noqda[93]

1) Dakhliga dibada kasoo noqda ee xarunta joogtada ah ee ganacsi gudaha ee sanad canshuureed waxa loola jeedaa wadarta:

b) dakhliga canshuurgalka ah ee xarunta joogtada ah ee ganacsi ee sanadka aan dib loogu maalgalin xarunta ganacsiga; oo lagu daray

t) dakhliga canshuurgalka ah ee xarunta joogtada ah ee ganacsi ee sanad canshuureed hore dib loogu maalgaliyay xarunta joogtada ah ee ganacsiga haseyeeshee la gala baxey ganacsiga sanadka gudihiisii.

2) Marka laxisaabinayo dakhli dibadda kasoo noqday:

b) dakhliga canshuurgalka ah waxa laga jarayaa canshuurta laga bixiyey dakhligaasi;

t) waxaa isbarbardhig lagu sameynayaa isbadalada ra’sumaalka xarunta joogtada ah ee ganacsi ee bilowga iyo dhammaadka sanadka;

j) waxaa laxisaabinayaa ra’sumaalkeeda iyada oo qiimaha saafiga ah (net cost) ee hantida xarunta joogtada ah ee ganacsi laga jarayo wixii lacag qaan saafi ah ee xarunta lagu leeyahey;

x) waxa laga soo qaadayaa in dakhliga canshuurgalka ah ee sanadkani iyo dakhliga canshuurgal ahaa ee dib loogu maalgaliyay sanadihii hore in laga soo celinayo dibadda ama lagala bixinayo ganacsiga ka hor inta saamileyda shirkaddu kala qaadan faa’iidada ra’sumaalka.

3) Xeernidaamiye ayaa tilmaami xogo dheeraad ah oo khuseeya dakhli dibadda kasoo noqday ee xarun ganacsi Soomaliyeed oo joogta ah.

QAYBTA III

[93] Repatriated Income.

DAKHLIGA IYO KHASAARAHA HOWLAHA DIBADDA[94]

Qodobka 85-aad
Lacag Goynta iyo Khasaaraha Howlaha Dibadda[95]

1) Lacag goynta kharashaadka dibadda waxa keliya oo loo isticmaali karaa xisaabinta dakhliga ilaha dibadda (wadan shisheeye) balse looma isticmaali karo xisaabinta dakhliga ilaha gudaha (Soomaaliya). Qadarta la goynayo waa goyn dibadda ah haddii mid Soomaaliya tahay mooyaane. Kuwan soo socda ayaa ah goyn gudaha ah:

b) lacagaha goyntooda lagu ogolaaday Qodobka 19-aad ama 20-aad:

i) marka ay la xiriirto hanti gudaha taal sida ku cad farqad-hoosaadka (ii); ama

ii) markaa loo eego ganacsiga gaadiidka ee lagu sheegay Qodobka 79 (2)(s), goynta waxaa loo ogol yahay hantida guurtada ah ee la taaban karo loona adeegsado in lagu qaado rakaabka socdaalka ah ama xamuulka, fariimaha ama hanti guurto kale oo la taaban karo oo u socdaaleysa Soomaaliya, oo aan ahayn natiijo kala wareejin xamuul (transhipment);

t) khasaare ka yimid ka kaaftoomidda:

i) hanti gudaha taal oo ah hanti ra’sumaal ganacsi ama hanti maalgashi oo canshuurgal ah; ama

ii) qaan gudaha ah ee ganacsi; iyo

j) iyadoo loo eegayo faqradda (b) iyo (t), goynta kharashka ku baxay lacag bixin gudaha ah oo leh il gudaha (Soomaaliya) ah;

2) Khasaaraha dibadda ee ka yimaada ganacsi ama maalgashi sanad canshuureed waa xadka lacaga la goyn karo ee ganacsiga ama maalgashiga sanadka ay ka badan tahay dakhliga dibadda ee ganacsiga ama maalgashiga ee sanadka.

3) Waxaa xadidaada Qodobada 23-aad (khasaaraha ganacsiga) iyo 24-aad (lacag goynta iyo khasaaraha maalgashiga) uraaca, khasaaraha dibadda ee ganacsiga ama maalgashiga:

b) waxa laga goyn karaa keliya marka la xisaabinayo dakhliga dibadda ka yimid ee shakhsiga;

[94] Foreign Source Income and Losses.

[95] Foreign Deductions and Foreign Losses.

t) lagama goyn karo marka la xisaabinayo dakhliga uu Somaaliya ka helay shakhsiga.

Qodobka 86-aad
Tixgelinta Canshuur Dibadda Lagu Baxshay[96]

1) Shakhsiga dalka deegaanka ku ah (ee aan ahayn shuraako) wuxuu codsan karaa u tixgelin canshuur uu ku bixiyey dibadda sanad canshuureedka oo ku aaddan wixii canshuur dakhli ah ee uu dibadda ku bixiyay marka loo eego dakhliga dibadda ee shakhsiga ee qiimeyngalka ah sanadka. Ma jirayso u tixgelin canshuur , iyadoo loo cuskanayo xeerarka Qodobka 79-aad, hadii aan dakhliga dibadda laga helin isla wadanka shisheeye ee canshuurta lagu bixiyay.

2) Tixgelinta canshuur dibadda lagu baxshay ee dakhliga dibadda waxa loo xisaabinayaa:

b) si kala gooni ah sanad canshuureed kasta, iyo si kala gooni ah dakhli kasta oo qiimeyngal ah ee laga helay shaqada, ganacsiga amamaalgashiga; iyo

t) xisaabin kastaana, waa iney ka badanin heerka celceliska canshuurta dakhliga Soomaaliya ee shakhsiga sanadkii loogu dabaqay dakhliga uu ka helay dibadda ee qiimeyngalka ah.

3) Shakhsigu waxa uu dooran karaa inuu ka tanaasulo u tixgelin canshuur dakhlikiisa dibadda ee sanadka, waxa uuna codsan karaa in laga gooyo qaddarkii canshuurta dakhliga uu dibadda ku bixiyay. Haddii kale, ma jirto wax goyn ah oo loo helayo canshuurta dakhliga dibadda.

4) Beddelka canshuur khafiifinta uu dhigayo qodobkan, xeernidaamiye ayaa qeexi duruufaha laga dhaafo canshuurta dakhli dibadda laga helay ee shaqo dibadda ah, xaruno ganacsi dibadda ah, ama hanti ma guurto dibadda taal.

5) Qodobkan gudihiisa:

b) "heerka celceliska canshuurta dakhliga" ee shakhsi deegaan ku ah Soomaliya sanad canshuureed waa boqollayda:

i) canshuurta waajibtay sida uu dhigayo Qodobka 9 (1) (b) (oo la xisaabinayo iyada oo aan lagu xisaabtamayn Qodobkan); ee

ii) dakhliga canshuurgalka shakhsiga ee sannadka.

[96] Foreign Tax Credit.

t) "dakhli dibadda oo qiimeyngal ah" waxa loola jeedaa isha dakhli dibadda ah ee ka mid ah dakhliga qiimeyngalka ah ee shakhsi dalka deegaan ku ah sanadcanshuureed kasoo gala shaqo, ganacsi ama maalgashi, kolba siduu xaalku noqdo.

Qodobka 87-aad
Amaanooyinka iyo Shirkadaha Xakameysan ee Ajaanibta ah[97]

1) Haddii dhamaadka sanad canshuureedka amaano ama shirkadi ay tahay mid shisheeye oo ammaana-xakameysan, ama shirkad-xakameysan,, waxaa loola dhaqmayaa sidii ayadoo dakhliga aan la qeybin ee sanadka xubnaheeda u qeybineysa waqtigaasi ka hor. Qaybintu waxay waafaqsanaanaysaa xubin walba saamiga uu ku leeyahay dakhliga aan la qeybin.

2) Qaybta wixii uu ka helay xubin ka mid ah ammaana-xakameysan ee shisheeye ama shirkad-xakameysan ee shisheeye ee muddadii sanad canshuureedka (iyada oo Meesha laga saarayo farqadda (1)) waxa laga dhimayaa qeybtii uu helay sanadkii ka horeeyay ammaanadaa-xakameysan ee shisheeye ama shirkaddaa-xakameysan sida ku cad farqadda (1). Dhimistu kama badnaan karto kolba tii yar:

b) intay dheeraadka ka ah dakhliga qofka loo qaybiyey marka la barbar-dhigo saamigii xubinimadiisa ee amaanada ama shirkadda ee sanadka;

t) qeybintii dakhli ee sanadkii hore ee aan loo xisaabin ama laga dhimin dhakhliga la canshuuraayo, sida faqraddani xustay.

3) Qadar kasta oo loola dhaqmay in loo qaybiyay si waafaqsan ee farqadda (1) waxa lagu daray qiimaha (cost) xubinimada lahaanshaha ee amaanada ama shirkadda ee waqtigii la qaybinayay.

4) Wax kastoo dhimis ah oo lagu sameeyo farqadda (2) waxa lagu darayaa dheefta lahaanshaha xubinimada ee amaanada ama shirkadda waqtiga dhimista.

5) Qodobkan gudihiisa:

b) "dakhliga loo nisbeyn karo" amaano-xakameysan ama shirkad-xakameysan oo dalka deegaan ku aheyn sanad canshuureed waa dakhligeeda canshuurgalka ah ee sanadka oo loo xisaabiyay sidii ayagoo Dalka degaan ku ah;

t) amaano-xakameysan oo dalka deegaan ku aheyn " iyo " shirkad-xakameysan oo dalka deegaan ku aheyn " waxa looga jeedaa amaano ama shirkad aan dalka degaan ku

[97] Controlled Foreign Trusts and Corporations.

aheyn taas oo qof dalka degani uu xubin wax kuleh ka yahay si toos ah ama si dadban oo shirkad ama dhawr shirkadood oo aan dalka deganayn dhextaal u yihiin; sidoo kale:

i) shakhsigu wuu u dhow yahay amaano ama shirkad sida uu tibaaxayo Qodobka 4(1)(x) or (2); ama

ii) ay jiraan dad u dhaxeeyay hal iyo afar qofood oo kale oo dalka degan kuwaas oo haddii ay u dhowaan lahaayeen qofka, ay keeni laheyd in qofka uu u dhowaado amaanada ama shirkadda;

j) "Saamiga xubinta" marka loo eego dakhliga amaano ama shirkad waxa uu:

i) le'eg yahay boqollayda xubintu ay xaq ugu leedahay saamiga dakhliga la qaybsanayo; ama

ii) haddii uusan xaqani hubaal noqon karin, boqollayda ay Wasaaraddu u aragto inuu ku habboon yahay duruufaha;

x) "dakhli aan la qeybin" ee amaano-xakameysan ama shirkad-xakameysan oo dalka deegaan ku aheyn sano canshuureed waa:

i) dakhliga ay amaano ama shirkadi heshay sanad; oo laga jaray

ii) qaybintii ay samaysay amaanada ama shirkadda sanadka gudihiisa (iyada oo aan la dabaqayn faqradda (1)) ee lagu daray xisaabinta dakhliga xubin.

Qodobka 88-aad
Hoos u Dhiga Canshuur[98]

1) Saamiga ay shirkad-xakameysan oo dalka deegaan ku aheyn u qaybisay (iyada oo loo raacayo sida u udhigayo qodobka 87(1)) saamiley saami xoogan leh waxaa loola dhaqmayaa in:

b) uu leeyahay sifo la mid ah nooc iyo il ahaanba dakhliga ay hesho shirkad shirkad-xakameysan oo dalka deegaan ku aheyn;

t) looguna qaybiyey si u dhiganta nooca iyo isha dakhli loo nisbeyn karo shirkad shirkad-xakameysan oo dalka deegaan ku aheyn;

[98] Relief for Underlying Tax.

Xeerka ku qoran faqrada kore lama dabaqaayo haddii faa'idada saamiga ee ay qaybisay shirkad-xakameysan oo dalka deegaan ku aheyn sanad canshuureedka uu ka badan yahay dakhliga loo nisbeyn karo shirkadda sanadka.

2) Saamilaha lagu dabaqayo faqradda (1), waxa loo qoondeeyay canshuurta dakhliga ee sharcigan ama canshuurta laga bixiyey dakhliga dibadda ama loola dhaqmay in ey bixisey shirkad-xakameysan oo dalka deegaan ku aheyn ee khusaysa dakhli loo tix galiyanayo in loo qaybiyay isaga. Saamilaha waxa loo tixgalinayaa inuu bixiyay canshuurtii waqtigii qaybintu dhacdey, waxa uuna heli karaa u tixgelin canshuur lagu bixiyey dibadda sida uu dhigayo Qodobka 86-aad.

3) Faqradaha (1) and (2) waxay khuseesaan qaybinta eey sameeysey shirkada dalka degani siiseynasaamile saami xooggan leh oo aan dalka deganayn waana sidii oo kale in shirkaddu aheyd shirkad-xakameysan oo dalka deegaan ku aheyn dakhliga shirkadda loo nisbeeyeyna ee sanad canshuureedkuna yahay dakhliga canshuurgalka ah ee sanadka.

4) Qodobkan gudihiisa:

b) "dakhli la nisbeyn karo" iyo " shirkad-xakameysan oo dalka deegaan ku aheyn "waxa loola jeeda sida uu dhigayo Qodobka 87-aad";

t) "saamilay xooggan (substantial)" waxa loola jeedaa shirkad haysata ka qaybqaadasho xooggan sida lagu qeexay Qodobka 61-aad".

CUTUBKA IX
HABRAACA CANSHUUR BIXINTA[99]

QAYBTA I
WAAJIBAADKA GUUD

Qodobka 89-aad
Hababka Iyo Waqtiga Bixinta[100]

1) Canshuurta uu soo rogay Qodobka 9aad waxa lagu bixin karaa canshuur kareebid Qaybta II, qeyb-qeyb u bixin Qaybta III ama qiimeyn Qaybta IV.

2) Canshuurta waxa la bixinayaa:

b) canshuurta lagu bixiyo habka canshuur kareebidda, xilliga ku cad Qodobka 93-aad;

---

[99] Tax Payment Procedure.

[100] Withholding by Employers.

t) canshuurta loo bixiyo qeyb-qeyb, taariikhda ay tahay in qeyb walibaa la bixiyo sida ay dhigayaan Qodobada 97-aad ama 100-aad; iyo

j) canshuurta lagu bixinayo qiimayn, taariikhda ay tahay in isqiimeynta loo gudbiyo Maamulka ee ku cad Qodobka 101-aad.

3) Sharciga Maamulka Dakhliga (Sharci No. 13 ee 27 October 2019) waxa ku jira qodobo muhiim ah oo kaabaya, siina faahfaahinaya habraaca canshuur bixinta.

QAYBTA II
CANSHUURTA LAGU BIXINAYO HABKA CANSHUUR KAREEBIDDA[101]

Qodobka 90-aad
Canshuurta Loo Shaqeeyuhu Kareebayo Shaqaalaha[102]

1) Xeernidaamiye ayaa qeexaya duruufaha ay tahay in loo shaqeeye dalka deggani (oo ay ka mid tahay xarun ganacsi gudaha) uu canshuurta kareebo lacag kasta oo soo hoos gasha lacagaha lagu darayo xisaabinta dakhliga canshuurgalka h ee shaqaalaha.

2) Waajibaadka loo shaqeeyaha ee canshuur kareebidda sida ku cad farqadda (1) kuma yaraaneyso ama kuma tirtirmayso sababahani:

b) in loo shaqeeyuhu uu xaq u leeyahay ama waajib ka saaran yahay inuu lacago kale ka jaro lacagta uu bixinaayo; ama

t) in sharci kale uu jiro oo sheegaya in dakhliga qofka shaqaalaha ah aan wax laga reebi karin ama aan la duldhigi karin lifaaqi qaansheeg.

Qodobka 91-aad
Canshuur Ka-reebidda Maalgashiga[103]

1) Sida waafaqsan farqadda (3), Qofka deganaha ah (oo ay ku jirto xarun ganacsi gudaha) waa in uu ka reebaa canshuur ah boqolleyda loogu talagalay ee ku qeexan farqadda 5 ee Jadwalka Koowaad marka uu shakhsigu:

b) bixinayo faa’ido saami, khidmadda khayraadka dabiiciga ah, kiro, faa’idada deynta, xuquuqda lahaanshaha ee uu qof kale siinayo; iyo

---

[101] Tax Payable by Withholding.

[102] Withholding by Employers.

[103] Withholding from Investment Returns.

t) lacagta laga helay il gudaha ah (Soomaaliya).

2) Marka uu sanduuq hawlgab la aqoonsaday uu bixinayo lacag hawlgab, waa in canshuurta looga reebaa si waafaqsan Qodobka 90-aad, sidii oo ay:

b) lacagtu tahay dakhli shaqo;

t) sabata lacag bixinta hawlgabka loo bixiyayna ay tahay shaqo; iyo

j) in sanduuqa hawlgabka ee la aqoonsaday uu yahay loo shaqeeye.

3) Farqadda (1) ma khusayso:

b) lacagta canshuurta looga reebayo ujeedo shaqo sida ku qeexan Qodobka 90aad (dakhliga shaqada);

t) lacagaha ay bixiyaan shakhsiyaadka gaarka ahi, marka laga reebo:

i) lacago lagu bixiyay ganacsi la qabanayo oo ugu yaraan leh hal qof oo shaqaale ah; ama

ii) haddii ay tahay kiro hanti ma guurto ah, bi-shardi haddii kirada la bixiyey ee bishu ka badan tahay heerka uu jaangooyay xeernidaamiye;

j) kiro, faa'idada deynta, ama xuquuqda lahaanshaha ee la siiyay hayad Dalka degaan ku ah taas oo leh isla markaana bixiyaha siineysa lambarka aqoonsiga canshuurta; ama

x) lacagaha la canshuur dhaafay.

Qodobka 92-aad
Canshuur Ka-Reebidda Khidmadaha Adeegga[104]

1) Iyada oo la dabaqayo faqradda (3), qofka degganaha ah (oo ay ku jiro xarun ganacsi gudaha) waa in uu qofka ka reebaa boqolleyda canshuur ee ku waajibtay ee ku qeexan faqradda 5-aad ee Jadwalka Koowaad marka uu:

b) bixinayo khidmad adeeg oo isheeda dakhli ay tahay Soomaaliya uuna siinayo shakhsi dalka deegaan ku ah oo aan ahayn shaqaale, sida:

i) wax dhigid (teaching), barenimo (lecturing), imtixaamid, ilaalin ama kormeerid imtixaan;

[104] Withholding from Service Fees.

ii) dilaal ahaan loo siiyo caymis Dalka degaan ku ah, wakiil iibiye;

iii) khidmad ansixin (endorsement fee); ama

iv) arrimaha kale ee uu qeexo xeer nidaamiye; ama

t) uu bixiyo khidmad adeeg ama khidmad caymis oo ay isheedu tahay Soomaaliya oo uu siiyo shakhsi dalka deegaan ku ahayn.

2) Iyada oo la dabaqayo sida ku cad faqradda (3), xeer nidaamiyayaasha waxa lagu faahfaahin karaa:

b) in shakhsiga degganaha ah (oo ay ku jiro xarun ganacsi gudaha) ay waajib ku tahay inuu canshuurta ka reebo qof marka uu lacag siinayo shakhsi aan dalka deegaan ku ahayn oo ah nooca lagu sheegay Qodobka 79 (2) (s) ama (sh) (gaadiidka dhulka, badda ama cirka ama adeegyada isgaadhsiinta); and

t) boqolleyda canshuur ee lagu soo sheegay faqrad-hoosaadka (a) ee canshuur ahaan loo reebayo.

3) Qodobkani ma khuseeyo:

b) lacag bixinta canshuur ka-reebidda ee uu dhigayo Qodobka 90 (dakhli shaqo);

t) lacag bixinta uu shakhsi sameeyo, haddii uusan ku bixinin ganacsi uu ugu yaraan ka shaqeeo hal qof; ama

j) lacag bixinta ah mid canshuurta laga dhaafay.

Qodobka 93-aad
Bayaanka iyo Lacag Bixinta Canshuurta Lareebay, ama Laga soo qaadey in Lareebay[105]

1) Wakiil canshuur ka-reebid kasta waa in uu Wasaaradda ku siiyaa canshuurta uu qabtay muddo 14 maalmood ah kadib dhamaadka bil kasta, caanshuurtaasi oo laga reebay bisha gudaheeda gaar ahaan si waafaqsan Sharcigani Qaybtiisan .

2) Waqtiga lacag bixin kasta ee ku cad faqradda (1), wakiilka canshuur ka-reebidda waa in uu u gudbiyaa Wasaaradda caddayn ah habka iyo foomka la tilmaamay ee:

[105] Statements and Payments of Tax Withheld or Treated as Withheld.

b) lacagta uu wakiilku bixiyay bishii hore ee ay ku waajibaysay canshuur ka-reebidda;

t) magaca, goobta iyo Lambarka Aqoondiga Canshuurta (LAC) ee qofka canshuurta laga reebay;

j) canshuur laga reebay lacag bixin kasta; iyo

x) macluumaad kasta oo kale oo ay Wasaaraddu farto.

3) Wakiil canshuur ka-reebid kasta oo ku guul darraysta in uu canshuurta u reebo si waafaqsan sharciga qaybtiisani waa in uu bixiyaa canshuurtii ay ahayd inuu reebo isla qaabkii iyo isla wakhtigii canshuurta la reebay.

4) Marka wakiilka canshuur ka-reebidda uu ku guuldareysto inuu canshuurta ka reebo lacagaha la bixiyay sida ay fareyso qaybtani:

b) canshuur lagareebuhu waxa uu si wadajir ah ugala masuul yahay wakiilka canshuur ka-reebidda bixinta iyo in loo gudbiyaa canshuurtaa Wasaaradda; iyo in

t) canshuurta waa inuu ku bixiyo canshuur laga reebuhu muddo 14 maalmood gudahood ah kadib dhammaadka bil kasta oo ay lacag bixintu dhacday.

5) Wakiilka canshuur kareebidda ee canshuurta reeba isagoo adeegsanaya Sharcigan qeybtiisan, marka uu canshuurta siiyo Wasaaradda waxa loola dhaqmayaa sida qof canshuurtii uu reebay siiyey lagareebaha iyadoo laga hortagaayo dacwadda canshuur lagareebaha ee ku sahabsan in lasiiyo lacagtii laga reebey.

6) Wakiilka canshuur ka-reebidda ee ku guul darraysta in uu canshuurta u reebo si waafaqsan Sharcigan qaybtiisan, balse siiya Wasaaradda canshuurtii ay ahayd inuu qabto ama reebo, si waafaqsan faqradda (3) waxa uu xaq ugu yeelanayaa inuu qaddartaasi in la'eg kasoo ceshado (recovery) canshuur laga reebaha.

(7) Xeer nidaamiyayaal Wasiirku soo saaray ayaa dejin kara in qofka bixinaya lacagaha badeecadaha ama adeegyada ee dhaafa xadkii loo gooyay laga rabo inuu usoo gudbiyo Wasaaradda caddeymo muddada loo cayimay gudaheeda una soo gudbiyo hab iyo qaab tilmaamaya:

b) nooca iyo waddarta lacag ee la bixiyay;

t) magaca, goobta iyo Lambarka Aqoonsiga Canshuurta lacagta la siiyey; iyo

j) macluumaad kasta oo kale oo ay Wasaaraddu farto.

Qodobka 94-aad
Shahaadooyinka Canshuur Ka-Reebidda[106]

1) Wakiilka canshuur ka-reebidda waa inuu u diyaariyaa guddoonsiiyaana canshuur laga reebaha shahaadada canshuur ka-reebidda:

b) oo gooni loogu diyaariyo waqti walba sida ay dhigayaan faqraddaha (3) iyo (4);

t) loo diyaarinayo waqtiga ay faqradahaasi dhigayaan;

j) looguna diyaariyaa qaabka ay dhigayaan.

2) Shahaadada canshuur ka-reebidda waa inay caddaysaa qaddarta lacagta la siiyay canshuur laga reebaha iyo canshuurta uu ka reebay wakiilka canshuur ka-reebidda si waafaqsan Qaybtan.

3) Sida waafaqsan faqradda (4), shahaadada canshuur ka-reebiddu waa in ay koobtaa hal bil taariikheed canshuur-reebkeed waana in lagu gudoonsiiyaa canshuur lagareebaha muddo 30 maalmood gudahood ah kadib dhammaadka bisha.

4) Markay dhacdo in canshuur lagu reebo Qodobka 90-aad (dakhli shaqo), shahaadada canshuur ka-reebiddu:

b) waa in ay dabooshaa waqti-sanadadeedka qofka shaqaalaha ahi shaqaale ahaa;

t) waa in la gudoonsiiyaa ugu dambeyn 30 Janaayo kadib dhammaadka sanadka ama, qofkii shaqaalaha ahaa haddii ay shaqadiisii uu la shaqeynayey wakiilka canshuur ka-reebidda ka joogsatay sanadka gudihiisa, waa in la gudoonsiiyaa 30 maalmood gudahood oo ka bilaabata taariikhdii ay shaqaalenimadiisu joogsatay.

Qodobka 95-aad
Canshuur Ka-Reebidda Ugu Dambaysa[107]

1) Marka la raaco ujeeddooyinka sharcigan, kuwa soo socda ayaa ah lacag ka-reebidda kama dambaysta ah:

b) faa'idada saamiga ee ay shirkad dalka degan siiso shakhsi dalka degan;

t) faa'idada dayn sheegashada ee ay Dawladda Federaalka ee Soomaaliya ay bixiso, ee khuseeya daymaha Dawladda:

---

[106] Withholding Certificates.

[107] Final Withholding Payments.

i) ee ay siiso shakhsi dalka deggan; balse

ii) waxaa laga baxsan faa'idada dayn sheegashooyinka ee uu helo shakhsi ka shaqaynaya ganacsi aan ahayn midka lagu dabaqayo habka canshuuraha la fududeeyey (eeg faqradda 2 ee Jadwalka Labaad);

j) faa'idada dayn sheegashada ay bixiso haya'd maaliyadeed oo dalka deegaan ku ah ama Xarunta ganacsi gudaha siisanahayad maaliyadeed oo dalka deegaan ku aheyn taas oo qeyb ka ah ganacsi bangi (eeg Qodobka 65aad) si:

i) ay u siiso shakhsi dalka deegaan ku ah oo uu kayd u yaalo hay'adda; balse

ii) waxaa ka baxsan faa'idada sheegashada daynta ee uu helo shakhsi samaynayaganacsi aan ahayn mid ku dhisan habka canshuuraha la fududeeyey (eeg faqradda 2 ee Jadwalka Labaad);

x) lacagaha la siiyo dadka dalka degganyn:

i) kuwaas oo laga rabo canshuur ka-reebid sida ay Qaybtani dhigayso ama laga rabi lahaa canshuur ka-reebid haddii Qodobada 91(3)(t) and 92(3)(t) (lacagaha aan ganacsiga ahayn ee ay shakhsiyaadku bixiyaan) la iska dhaafi lahaa; balse

ii) waxaa ka reeban lacag bixinta la helay ee soo martay xarun ganacsi gudaha; iyo

kh) wixii kale ee lacag bixin ah ee ay tilmaameen xeer nidaamiyayaal.

2) Siyaabaha soo socda aya lagu gudi karaa waajibaadka canshuureed ee canshuur laga reebaha sida uu dhigayo Qodobka 9(1)(t):

b) canshuurta lagu qabto canshuur ka-reebidda kama dambaysta ah si waafaqsan qaybtan;

t) canshuurtii lagu bixiyay iyada oo loo eegayo canshuurtaka-reebidda kama dambaysta ah si waafaqsana Qodobka 93(3) ama (4) (ku guuldarraysiga canshuur ka-reebidda).

3) Haddii canshuur ka-reebid kama dambays ahi aysan waajibeyn, sababo la xiriirta Qodobka 91(3)(t) ama Qodobka 92(3)(t) (lacag bixin aan ganacsi ahayn oo uu shakhsi bixiyo) ama in canshuur bixiyahaasi uu yahay mid aan dalka degganayn:

b) waajibka canshuureed ee qaataha lacagtaasi ee waafaqsan Qodobka 9 (1)(t) ee ku lug leh lacag bixntaa, waa in uu canshuurtaa ku bixinayaa si qeyb-qeyb ah iyo qiimayn ah; sidoo kale

t) iyada oo la dhaqangalinayo Qaybaha III (Qayb qayb ku bixinta) iyo IV (qiimayn ku bixinta), qaanta waxa loola dhaqmayaa sida qaanta ku xusan Qodobka 9(1)(b).

Qodobka 96-aad
Ttixgelinta canshuur Ka-reebidda kama dambeys oo si khaldan loo reebey[108]

1) Qofka canshuur laga reebaha si khaldan canshuur-reebid kama dambeys ah looga reebey waxaa loola dhaqmayaa in uu bixiyay canshuur ah mid:

b) laga jaray lacag bixinta sida ku cad Qaybtan ; ama

t) uu bixiyey si waafaqsan qodobka 93(3) ama (4) (ku guul darraysgia canshuur ka-reebidda).

2) Laga reebaha canshuurtu waxa uu xaq u leeyahay tixgelin canshuur bix oo qiimeheedu la mid ah canshuurta lagaga qaaday sida ku cad faqradda (1) sanadka canshuureedka lacagt bixinta la helay.

QAYBTA III
CANSHUURTA LOO BIXIYO QAYB QAYBTA[109]

Qodobka 97-aad
Canshuur Ku Bixinta Rubuc Sanadeed[110]

1) Shakhsiga ("Qayb-ku-bixiyaha") waa inuu ku bixiyaa canshuurta qayb-qeyb si rubuc sanadeed ah (saddex biloodle) haddii uu shakhsigu helayo ama filayo inuu ka helo dakhli qiimeyngal ah sanad canshuureedka gudihiisa:

b) ganacsi ama maalgashi, ama

t) shaqo taas oo aan loo shaqeeyaha laga rabin inuu canshuur ka reebo sida uu qabo Qodobka 90-aad.

2) Qayb-qeyb u bixintu waxa ay ku eg tahay dhammaadka saddex bilood kasta inta lagu jiro sanad canshuureedka, iyada oo qaybta ugu dambeysana ay ku egtahay maalinta ugu dambeysa ee sanadka.

3) Iyadoo la raacayo faqradaha (4) iyo (5), qadarta qayb (instalment) kasta ee sanad canshuureed waxaa loo xisaabiyaa si waafaqsan qaacidada soo socota:

---

[108] Credit for Non-final Withholding Tax.

[109] Tax Payable by Instalment.

[110] Payment of Tax by Quarterly Instalment.

(A – B)/C – D

halka:

A = ay u taagan tahay canshuurta la qiyaasay ee hadda laga rabo inuu bixiyo qofka sida ku cad Qodobka 98aad ama 99aad ee sanadka;

B = ay u taagan tahay wadarta mid kasta oo kamid ah kuwaan :

b) lacag bixinta (instalments) uu horey qofku u sameeyay sanadka laakiin ka hor taariikhda kama dambaysta ah ee bixin qeybtaasi; iyo

t) canshuurta marka qofka loola dhaqmayo sida inuu ku bixiyay Qodobka 96aad (canshuurta ka-reebidda aan dhamaystirneyn) ee khuseysa lacagaha la helay sanadka gudihiisa balse kahor dhamaadka mudada saddexda biloodka ah ee ka horaysa;

C = ay u taagan tahay tirada inta jeer ee lacag bixinta ka hartay sanadka oo ay ku jirto bixin-qaybeedka hadda taagan;

D = ay u taagan tahay canshuur kasta oo loola dhaqmay in lagu bixiyay si waafaqsan Qodobka 96aad (canshuur ka-reebid dhammeystirneyn) marka loo eego lacagaha la helay muddadan saddexda bilood gudaheeda ah.

4) Xeer nidaamiyayaal ayaa dejin kara in dabaqad gaar ah oo shakhsiyaad laga rabo inay canshuurta ku bixiyaan si qayb-qayb ah, dabaqadaas oo isla qeyb ka ah ama ka aheyn kuwa ku cad Qodobkan.

5) Qayb-qayb u-bixiyaha canshuurtu waxa uu xaq u leeyahay u tixgelin canshuur sannad canshuureed taasoo la mid ah canshuurta uu ku bixiyay qayb-qayb ahaan sannadkaasi.

Qodobka 98-aad
Bayaanka Qiyaasta Canshuurta La Bixinayo[111]

1) Qof kasta oo qayb-qayb (an instalment payer) u bixiya canshuurta sannad canshuureedka sida waafaqsan Qodobka 97-aad waa in uu u gudbiyaa Wasaaradda qiyaasta canshuurta la bixinayo sanadka. Qiyaasta waa in lasoo gudbiyaa taariikhda bixinta qeyb-qaybta ugu horreysa ee canshuurta. Qodobka 99aad waxa uu dhigayaa waxyaabaha ka reeban xeerkan.

2) Qiyaastu marka la raaco faqradda (1) waa in:

b) lagu soo gudbiyaa habka iyo foomka la tilmaamay ee qiyaasaya:

[111] Statement of Estimated Tax Payable.

i) dakhliga shakhsiga ee la qiimeynayo ee sanad canshuureed laga helay shaqo, ganacsi iyo maalgashi iyo isha dakhligaas; iyo

ii) dakhliga shakhsiga ee canshuurgalka ah sanadka iyo canshuurta uu ka bixinayo dakhligaas si waafaqsan Qodobka 9(1)(b);

t) ayna ku jiraan kuna lifaaqan yihiin wixii macluumaad kale ah oo ay Wasaaraddu tilmaamto.

3) Iyadoo la raacayo faqradaha (6) iyo (7), canshuurta lagu sheegay faqradda (2)(b)(ii) waa canshuurta la qiyaasay ee uu qofku bixinayo sanad canshuureedka.

4) Marka la qiyaaso canshuurta la bixinayo sanad canshuureedka ee ku cad faqradda (2)(b)(ii), qofku waxa uu soo codsan karaa u tixgelin canshuur dibadda isagoo raacaya Qodobka 86aad. Si kastaba ha ahaatee, qofku marka uu sidaasi samaynayo waxa uu xisaabin karaa oo keliya canshuurta dakhliga dibadda haddii qofku uu bixiyay canshuurta ama qofku si macquul ah u saadaalinayo in canshuurta uu bixin doono sanadka dhexdiisa.

5) Qiyaasta qayb-bixiyuhu (an instalment payer) sida ku cad faqradda (1), dhaqangal ayey ahaanaysaa sanad canshuureedka oo dhan ilaa uu qofku qiyaas dib-u-eegis lagu sameeyay (revised estimate) usoo gudbiyo Wasaaradda.

6) Qiyaasta dib-u-eegista lagu sameeyay ee uu shakhsigu gudbiyo sida ku cad farqadda (5) waa qiyaasta canshuurta qofka uu bixinayo sanad canshuureedka, balse kaliya ku dhisan ujeeddooyinka xisaabinta canshuuraha qayb-qaybta lagu bixiyo ee uu dhigayo Qodobka 97-aad, kadib taariikhda qiyaasta dib-u-eegista lagu sameeyay loo gudbiyo Wasaaradda.

7) Marka la gudbiyo, qiyaas ama qiyaasta dib-u-eegista lagu sameeyay waa is-qiimayn waafaqsan ujeeddooyinka Sharciga Maamulka Dakhliga (Sharci No. 13 ee 27 October 2019) waxaana dib wax uga badali kara Wasaaradda sida uu tilmaamay Qodobka 50-aad ee Sharciga Maamulka Dakhliga, 2019. Wasaaraddu waxa ay ku saleyn karaa wax ka beddelka canshuurta eey tahey in la bixiyo "sare u qaadid" lagu sameeyo canshuurtii shakhsiga laga rabay sanad canshuureed hore. Shakhsigu dib u eegis kuma samayn karo qiyaas canshuureed sida waafaqsan faqradda (5) haddii ay Wasaaraddu wax ka beddel ku sameeysay qiyaasta.
.

Qodobka 99-aad

Dadka aan Laga rabin Bayaanka Qiyaasta ee Canshuurta La Bixinayo[112]

1) Qayb-bixiye ama dabaqad qayb-bixiyayaal ah loogama baahna inay soo gudbiyaan qiyaasta lagu xusay Qodobka 98-aad haddii ka dhaafidda arrinkaasi ay:

[112] Statement of Estimated Tax Payable Not Required.

b) tilmaamaan xeernidaamiyayaal; ama

t) ay Wasaaraddu wareegto rasmi ah ku caddeeyso, iyadoo raacaysa Qodobka 9-aad ee Sharciga Maamulka Dakhliga (Sharci Lr. 13 ee 27 Oktoobar 2019) ama wargalin qoraal ah oo ku aaddan qayb- bixiye gaar ah;

2) Hadii bixiye qayb-qayb aan laga rabin inuu soo gudbiyo qiyaas sababta ku cad faqradda (1) awggeed, Wasaaraddu:

b) waa inay qiyaasta canshuurta qofka uu bixinayo sanad canshuureedka, taas oo laga yaabo in lagu saleeyo canshuurtii laga rabay sanad canshuureedkii hore oo kor loo qaaday; iyo

t) inay qayb-qayb ku bixiyaha ku wargaliso qoraal sheegaya qiyaasta Wasaaradda iyo sida loo xisaabiyay.

3) Haddii Wasaaraddu bixiso ogaysiis sida ku cad faqradda (2), markaas iyadoo la raacayo Qodobka 97-aad qiyaasta canshuurta ee uu bixinayo qofka sanad canshuureedka waa inta ay qiyaastay Wasaaraddu.

Qodob 100-aad
Hal Mar ku Bixinta Canshuurta Waqtiga Wareejinta Ama Lacag Helidda[113]

1) Sodon (30) maalmood gudahooda ee heshiis lagu wareejinayo lahaanshaha hanti ma guurto ah oo taalla Soomaaliya, wareejiyuhu waa in uu u gudbiyaa Wasaaradda bayaanka qiyaasta canshuureed ee lagu darayo xisaabinta dakhliga canshuurgalka ah ee hantida laga kaaftoomey. Qiyaastu waa inay ahaataa habka iyo foomka la tilmaamay. Haddii aysan Wasaaraddu ku qancin qiyaasta, dib ayay wax uga badali kartaa iyadoo cuskanaysa Qodobka 50-aad ee Sharciga Maamulka Dakhliga (Sharci No. 13 ee 27 October 2019).

2) Marka la gudbinayo qiyaasta sida ku cad faqradda (1), wareejiyuhu waa in uu ku bixiyaa canshuurta hal mar oo keliya (single instalment) oo la mid ah:

b) xaalada qof Dalka degaan ku ah, boqolkiiba 5 qiyaasta ku darsoontey (estimated inclusion) dakhliga canshuurgalka ah; ama

t) xaalada qof Dalka degaan ku aheyn, boqolkiiba 10 ee faa'iidada la qiyaasay.

3) La-wareegaha hantida maguurtada ah waxa uu hal mar bixin karaa canshuurta isaga oo ka wakiil ah wareejiyaha, taasoo ah qadarta ay Wasaaraddu go’aamiso. Qaddartu waa in

[113] Single Instalment at Time of Transfer or Receipt.

aysan dhaafin boqolleyda faqradda (2) oo lagu dhuftay boqolkiiba 70 lacagta wareejinta. Arintani daraadeed, la wareeguhu wuxuu canshuurta ka reebi karaa qadarta wareejinta. Qodobka 93(5) iyo (6) (kasoo kabashada wareejiyaha) wuxuu khuseeyaa qayb-ku-bixin kasta oo uu sameeyo la wareeguhu.

4) Wasaaraddu waa inay siisaa wareejiyaha iyo la wareegahaba shahaado qoraal ah oo qireysa u hoggaansanaanta faqraddaa (2) ama (3). La-wareegaha xaq uma laha inuu isticmaalo hantida ma guurtada ah, lahaanshaha hantidana lama aqoonsan karo ama lama diiwaan gelin karo iyada oo aan la soo saarin shahaadada. Canshuurta lagu bixinayo sida ku cad farqadda (2) waxay ku deyn hantida ma guurtada ah oo is-hortaageysa adeegsigeeda iyadoo loo eegayo Qodobbada 64-aad, 65-aad iyo 66-aad ee Sharciga Maamulka Dakhliga (Sharci Lr. 13 ee 27 Oktoobar 2019).

5) Haddii:

b) hantida ma guurtada ah ee la wareejinayo ay hoostagto faqrad-hoosaadka (t)(ii) ee qeexida "hanti ma guurto ah" ee ku xusan qodobka 2(1); iyo

t) xili kasta oo ka mid ah labadii sano ee ka horeysay wareejinta, wareejiyaha (oo ay weheliyaan dadka u dhow) leh 25 boqolkiiba ama in ka badan lahaanshaha asaasiga ah ee hay'ad heysata heshiis kiro macdan qodis, heshiiska wadaagga soo saarista shidaalka ama hanti ma guurta ah ee taalla Soomaaliya;

hay'adda waxa ay si wadajir oo dhamman ah masuul uga tahay oo ay kula jiraan wareejiyaha iyo la-wareegaha bixinta canshuurta iyo u hoggaansanaanta shuruudaha looga baahan yahay ee faqraddaha (1), (2) iyo (3) ee Qodobkan.

6) Haddii:

b) shakhsi Dalka degaan ku aheyn ay lacag ka soo gasho ganacsi gaadiid dhul, bad iyo cir iyo kiro gaadiid;

t) aan qayb ganacsigaasi ka mid ahna laga fulinin xarun ganacsi gudaha; sidoo kalena

j) lacag-bixintana la helay marka gaadiidku wax qaado ama la kireeyo sida ku xusan Qodobka 79(2)(s),

Wasaaraddu waxa ku waajibin kartaa qofku inuu canshuurta dakhliga ku bixiyo hal mar oo u dhiganta shan (5) boqolkiiba lacagaha uu qabtay ee guud (gross payments).

7) Baabuurka, markabka ama diyaaradda loo isticmaalo qaadista ama kiraynta ee ku xusan faqradda (6) lama ogola in laga saaro furdada ilaa ay tusaan shahaado canshuur bixineed oo ay Wasaaraddu u daabacay oo sheegaysa in dhammaan canshuurtii la bixiyay ama wax canshuur bixin ah aan laga rabin .

8) Wareejiyaha ama gaadiid ama kireeye Dalka degaan ku aheyn oo ka shaqeeya dhul, bad ama cir ay ku waajibtay in uu halmar ku bixiyo canshuurta sida uu dhigayo Qodobkan waxa uu xaq u yeelanayaa u tixgelin canshuur la mid ah qaddarta uu qeyb-qeybta u bixiyay sanad canshuureedka ee waajibka canshuureed ka dhashay.

QAYBTA IV
CANSHUURTA LAGU BIXINAYO QIIMAYNTA[114]

Qodobka 101-aad
Soo Gudbinta Warbixinta Canshuur Kasoo-warbixinta[115]

1) Canshuurbixiye kasta waa in uu u soo gudbiyaa Wasaaradda, warbixinta canshuur kasoo warbixinta (a return of income) ee sanad canshuureedka. Sida guud; soo gudbintu waa in la sameeyaa 31-ka Maarso ka dib dhamaadka sanadkasta. Haddii sanad canshuureedka canshuurbixiyuhu uu ku beegmi waayo dhamaadka sanad xiliyeedka (Janaayo - Diseembar), waa in lasoo gudbiyaa maalinta 30aad kadib dhamaadka sanad canshuureedka. Qodobka 102aad waxa uu dhigayaa wixii ka reebban faqraddan.

2) Soo gudbinta dakhliga waa in:

b) ay noqotaa qaabka iyo foomka loogu tala-galay, kuna caddahay:

i) dakhliga qiimeyngalka ah (la qiimeynayo) ee qofka sanad canshuureed ka soo gala shaqo, gacansi iyo maalgashi kasta iyo isha dakhliga;

ii) qof kasta dakhlikiisa canshuurgalka ah iyo canshuurta ku waajibtay sanadka, sida ku cad Qodobka 9(1)(b);

iii) canshuur kasta oo uu shakhsigu sanadkii ku bixiyo nidaamyada canshuur ka-reebidda, qeyb-qeyb u bixinta ama qiimayn taasoo u tixgelin canshuur loogu heli karo Qodobada 96aad, 97aad ama 100aad ee Sharcigan ama Qodobka 49 ee Sharciga Maamulka Dakhliga (Sharci Lr.13 ee 27 Oktoobar 2019);

iv) qadarta canshuur ee aan weli la bixin sanadka oo loo xisaabinayo wadarta canshuurta lagu sheegay farqad-hoosaadka (ii) oo laga jaray canshuurtii hore loo bixiyay ee loo tixraacayo faqrad-hoosaadka (iii); iyo

v) macluumaad kasta oo kale oo ay Wasaaraddu farto; iyo

---

[114] Tax Payable on Assessment.

[115] Return of Income.

t) iyada oo ay ku lifaaqan tahay:

i) shahaado kasta oo canshuur ka reebid ee la siiyey qofka sida ku cad Qodobka 94-aad ee la xiriirta lacagaha oo u qofku helay sanadkaas;

ii) bayaan kasta ee qofka la siiyo sida ku cad Qodobka 40(3) ee Sharciga Maamulka Dakhliga (Sharci Lr.13 ee 27 Oktoobar 2019); iyo

iii) Macluumaad kasta oo kale ee ay Wasaaraddu farto;

Qodobka 102-aad
Dadka aan Laga Rabin Soo Gudbinta Dakhliga[116]

1) Ilaa ay Wasaaraddu si kale u cadeeyso, iyadoo adeegsanaysa ogaysiis qoraal ah ama uu qofka doorto inuu soo gudbiyo warbixinta canshuur kasoo warbixinta (a return of income), soo gudbinta warbixinta canshuur kasoo warbixinta (a return of income) ee sanad canshuureed lagama rabo:

b) qof Dalka degaan ku ah:

i) oo aan lahayn ama helin dakhli canshuurgal ah sanadkaas sida ku cad Qodobka 9(1)(b) ama

ii) uu dakhlikiisa canshuurgalka ee sanadka uu yahay dakhli ka soo gala keliya shaqo islamarkaasna laga reebayo canshuurta si waafaqsan Qodobka 90-aad; ama

t) qof Dalka degaan ku aheyn oo aan lahayn ama helin dakhli canshuurgal ah sanadka sida ku cad Qodobka 9(1)(a).

Qodobka 103-aad
Qiimaynta iyo Canshuur Bixinta[117]

1) Marka la soo gudbiyo iyada oo la dabaqayo Qodobka 101-aad, warbixinta canshuur kasoo warbixinta (a return of income), waa is-qiimayn sida uu dhigayo Sharciga Maamulka Dakhliga (Sharci Lr. 13 ee 27 Oktoobar 2019) waxaana wax ka beddeli kara Wasaaradda sida ku cad Qodobka 50-aad ee Sharciga Maamulka Dakhliga, 2019.

---

[116] Return of Income Not Required.

[117] Assessment and Payment of Tax.

2) Canshuurta is-qiimeynta ee taagan ee lagu sheegay faqradda (1) waxa la bixinayaa taariikhda ay tahay in la soo xisaab-gudbiyo dakhliga (eeg Qodobada 89(2)(c) iyo 101).

CUTUBKA X
BURINTA, KALA GUURKA IYO DHAQAN GALKA SHARCIGAN

Qodobka 104-aad
Iswaafaqjinta Wax Ka- Bedelka[118]

1) Sharciyada ku xusan Jadwalka Lixaad waa la buriyay, la ansixiyey, la bedelay (replaced) ama wax ka beddel (amendment) lagu sameeyey si loo xaqiijiyo sameynta dejinta Sharcigan.

2) Xeernidaamiyeyaasha dhaqangalka ee lagu soo saaray sharciyada lagu sheegay faqradda (1) dhaqangal ayey sii ahaanayaan ay wax ka bedelaan ay buriyaan xeernidaamiyeyaal hoos taga Sharcigan. Si kastaba ha ahaatee, xeer nidaamiyeyaashu ma ahaanayaan dhaqangal haddii ay waafaqi waayaan Sharcigan. Xeer nidaamiyeyaal waxaa ku jira xeerar, xukunno, amarro iyo ogeysiis.

Qodobka 105-aad
Kalaguurka

1) Iyadda oo la raacayo Qodobkan, qodobada ku xusan Jadwalka Lixaad (La jaanqaadidda wax kabedelka) waxay u sii shaqayn doonan sidooda si loogu dabaqo waqtiga iyo xaaladaha ka horeeya taariikhda uu sharcigani dhaqan galayo.

2) Foomamka iyo dukumeentiyada kale ee loo isticmaali jiray sharcigii hore waxa lagu sii isticmaali doona Sharcigan. Tixraaca foomamka iyo dukumentiyada khuseeya qodobbada sharcigii hore waxaa loo isticmaalayaa qodobbada ku aaddan ee sharcigan.

3) Sharcigii hore ayaa lagu dabiqi doonaa:

> b) waajibaadka canshuureed ee la xiriira sanad canshuureedka dhamaanaya ka hor taariikhda dhaqan galka sharcigan, waxaana ku jirta soo gudbinta xisaabaadka canshuurta (return filing), iyo xisaabinta canshuurta waajibtay; iyo
>
> t) howlaha socday ka hor taariikhda dhaqan galka Sharcigan.

4) Canshuurta waajibtay sanad canshuureed kasta oo dhamaanaya ka hor taariikhda dhaqan galka sharcigan, waxaa lagu soo celin karaa xeerarka sharcigan hoos imaanaya. Tani waa

[118] Conforming Amendments.

iyada oo aan waxba loo dhimaynin tallaabo kasta oo horay loogu qaaday soo celinta canshuurta.

5) Haddii loo baahdo, tixraacyada "sharcigan" ama "qodobada sharcigan" waxaa ku jira tixraaca sharcigii hore ama qodobada sharcigii hore eek u aaddan, hadba sida ay u kala horreeyaan.

6) Haddii kororka laga helo ka kaaftoomidka hanti jirta taariikhda dhaqan galka sharcigani, aan la canshuuri laheyn haddii ka kaaftoomidku dhici lahaa muddada sharcigii hore laakiin lagu canshuuri lahaa sharcigan, hantida waxaa loo aqoonsanayaa kharash udhigma qiimaha suuqa ee hantida ee taariikhda dhaqan galka sharcigani.

7) Xeernidaamiye ayaa fari kara tallaabooyin kalaguur oo dheeri ah oo la xiriira hirgelinta sharcigan. Kuwaas waxaa ka mid noqon kara dib-u-dhaca ama wax ka beddelka hawl galinta qodobbo sharciga ka mid ah muddo aan ka badneyn shan sanadood.

Qodobka 106-aad
Dhaqan Galka

Sharcigani waxa uu dhaqan galayaa taariikhda uu iclaamiyo Wasiirka Maaliyadda ee lagusoo saaro Faafinta Rasmiga ah. Wasiirku wuxuu magacaabi karaa waqtiyo kala duwan oo la dhaqan galinayo Qodobadda kala duwan ee Sharcigan kamid ah.

JADWALKA KOWAAD: BOQOLLEYDA CANSHUURTA (TAX RATES) (Qodobka 9)

1. Boqolleeyda Canshuurta Dakhliga ee Shakhsiyaadka (Rates of Income Tax for Individuals)

1) Dakhliga canshuur-galka ah ee laga helay shaqo ee qofka Dalka degaan ku ah sanad canshuureedka waxa lagu canshuuraya boqolleyda soo socota:

DAKHLIGA CANSHUUR-GALKA AH (SANADLE)	CANSHUURTA LA BIXINAYO
Aan ka badneyn 1,200USD	Waxba
1,201 USD ilaa 6,000USD	6%
6,001 USD ilaa 18,000 USD	12%. [$288 + 12% lagu dhuftay inta ka badan 6000 USD]
Ka badan 18,000 USD	18%. [$1788 + 18% lagu dhuftay inta ka badan 18000 USD]

2) Dakhliga canshuur-galka ah ee sanad canshuureed shakhsi Dalka degaan ku ah ee ay da'diisu ka-yar tahay 18 sanno dhamaadka sanadka waxa lagu canshuurayaa 20% oo ah boqolleey siman, marka laga reebo in Wasaaraddu:

b) ku qanacsan ahay in xisaabinta qaddarta la hubiyey (mid si toos ah ama si dadban) loo raacay sida uu qabo mabda'a (arm's length) (eeg Qodobka 37-aad);

t) ay qoraal ahaan ku xaqiijisay farqadda hoosaadka (b).

3) Marka dakhliga canshuur-galka ah ee qof Dalka degaan ku ah sand canshuureed uu ku jiro dakhli uu qofku ka helay ka kaaftoomidda maalgashi canshuur-gal ah:

b) dakhliga canshuur-galka ah ee aan ka badneyn 18,000USD waxaa lagu canshuurayaa boqoleyda faqradda (1); iyo

b) dakhliga canshuur-galka ah ee ka badan 18,000 USD waxaa la canshuurayaa 15%.

4) Dakhliga canshuur-galka ah ee shakhsi Dalka degaan ku aheyn sanad canshuureed waxaa la canshuurayaa 18%.

2. Boqolleeyda Canshuurta Dakhliga Amaanadda (2.Rate of Income Tax for Trusts)

Dakhliga canshuur-galka ah ee aaminadda sanad canshuureed waxa lagu canshuuraya boqolleey dhan 26%.

3. Boqolleeyda Canshuurta Dakhliga Shirkadaha (Rate of Income Tax for Corporations)

Dakhliga la canshuuri karo ee shirkaddaha sanad canshuureedka waxa lagu canshuuraa xadi dhan 15%.

4. Boqolleeyda Canshuurta Dakhliga Xarun Ganacsi gudaha (Rates of Income Tax for Somali Permanent Establishments)

1) Dakhliga canshuur-galka ah ee sanad canshuureed xarun ganacsi gudaha waxaa lagu canshuuraya boqolleeyda canshuurta dakhliga shirkaddaha ee ku cad faqradda 3-aad.

2) Dakhliga kasoo xarooda dibadda sanad canshuureed ee xarun ganacsi gudaha waxaa lagu canshuuraya sida ku cad faqradda 5(t)(i).

5. Boqolleeyda Canshuurta Ka-reebidda (Rates of Withholding Tax)

1) Boqolleyda canshuur ka-reebidda lacag bixinnada ee ku xusan Qeybta II ee Cutubka IX waa:

b) lacagaha lagu bixiyey Qodobka 90 (dakhliga shaqada):

i) haddii uu yahay shaqaale Dalka degaan ku ah, waxaa lagu canshuurayaa boqolleyda canshuurta dakhliga shaqaalaha ee Jadwalka 1aad, faqradiisa 1(1) iyo;

ii) haddii uu yahay shaqaale Dalka degaan ku aheyn 15%;

t) lacag bixinta lagu dabaqaayo Qodobka 91-aad (investment returns):

i) faa’idada saamiga (dividend) - 5%;

ii) faa’idada deynta - 10%;

iii) kirada uu shakhsi Dalka degaan ku ah ka helo hantida maguurtada ee gudaha Soomaaliya taala- 5%; iyo

i) kiro nooc kale – 10%;

ii) khidmada kheyraadka dabiiciga ah (natural resource payments) iyo milkiyada (royalty) 15%; iyo

j) lacag bixinta lagu dabaqaayo Qodobka 92 (service fees):

i) khidmadaha adeegga ee lagu sheegay Qodobka 92(1) (b) - 10%;

ii) khidmadaha adeegga ee lagu sheegay Qodobka 92(1) (t) - 10%; iyo

iii) premium-ka caymiska ee lagu sheegay Qodobka 92(1)(t) – 5%.

JADWALKA LABAAD: CANSHUURAHA LA-FUDUDEEYEY (SIMPLIFIED TAXATION)

(Qodobka 9(4))

1. Mabaadi'da Canshuuraha La-fududayeyay

1) Jadwalkan waxa uu wax ka beddelayaa canshuuraha shakhsi Dalka degaan ku ah oo u qalma isagoo:

b) kusoo rogaya canshuurta la-khafiifiyay ee shakhsiyaadka leh dakhli canshuur galka ah oo uu ku jiro dakhli ka yimid noocyada ganacsiga qaarkood (farqadda 2); iyo

t) u ogolaanaya in ay isticmaalaan hab xisaabeedka kaashka ee isku dhafan (modified cash basis) marka la xisaabinayo dakhliga ka soo gala ganacsiyadda qaarkood (farqadda 3).

2) Ilaa inta uusan Jadwalkani wax ka bedelin, xeerarka caadiga ah (standard rules) ee Sharcigan ayey raacayaan shakhsiyaadka ama shuraakooyinka.

2. Canshuurta la-khafiifiyay (Presumptive Tax)

1) Canshuurta la-khafiifiyay waxa ay khuseysaa qof Dalka degaan ku ah, sanad canshuureedka:

b) dakhliga canshuur-galka ah ee shakhsiga uu sanadkaasi uga yimid il ganacsi oo gudaha Soomaaliya keliya ah;

t) shakhsigu uusan ahayn wadaage ka tirsan shuraako; iyo

j) iibka ganacsigiisu uusan sanadkii ka badneyn 50,000 USD (oo ku salaysan celceliska saddexdii sano ee lasoo dhaafay).

2) Shakhsiga waxa laga saarayaa canshuurta la-khafiifiyay, xataa haddii uu buuxiyo shuruudaha faqradda hoosaadka (1), haddii uu qofku:

b) leeyahay xirfado aqooneed oo la cadeeyay ama uu qabto hawlo kale oo xeer nidaamiye tilmaamay; ama

t) marka ay Wasaaraddu ku qanacdo in diiwaan ku filan la hayo, doorto inuusan u hogaansamin canshuurta la-khafiifiyay, markaasoo canshuurta la khafiifiyay aan laga aqbaleyn sanad canshuureedkaas iyo labada sano ee xigta.

3) Shakhsiga laga saaray canshuurta la-khafiifiyay waxa uu u qalmi karaa inuu ku dhaqmo qaab xisaabeedka kaashka ee isku dhafan (modified cash basis) sida ku cad faqradda 3-aad.

4) Haddii canshuurta la-khafiifiyay uu bixinayo shakhsiga sanad canshuureedkiisa:

b) hantida maguurtada ah ee ganacsiga waxaa loola dhaqmayaa in ay tahay hanti maalgashi canshuur-gal ah ee uu shakhsigu maalgashaday;

t) canshuurta waajibtay sanadka ee ku cad Qodobka 9(1)(b) ee khuseysa dakhliga ganacsiga ee shakhsiga:

i) waxaa loo bixinayaa qaab saddex-biloodle ah iyadoo la raacayo Qodobka 97-aad;

ii) saddex-bilood kastana waxaa laga rabaa inuu bixiyo midkii badan 37.5 USD iyo 1.5% iibka ganacsiga ee saddexdaasi bilood.

j) marka lagasoo tago canshuurta lagu sheegay farqad-hoosaadka (t), canshuurta ku waajibta dakhliga canshuur-galka ah ee sanadka uu shakhsigu ka helay meel aan ahayn ganacsiga waxa loo xisaabinayaa si waafaqsan qodobka 9(3).

5) Faqradan gudaheeda, "iibka ganacsiga" ee sanad canshuureedka ama sadexdii bilood waa:

b) isku geynta dhammaan qadarta xisaabeed ee dakhliga ganacsiga sanadka ama sadexda bilood ee ku cad Qodobka 13(3)(b), (t) iyo (r) oo kaliya iyadoo laga saarayo qadarta lagu cadeeyay Qodobka 13(4);

t) laguna go’aamiyay habka lacagta cadaanka ah (cash basis) (eeg Qodobka 27aad).

3. Canshuurta ku salaysan qaab xisaabeedka kaashka ee isku dhafan (modified cash basis)

1) Qaab xisaabeedka kaashka ee isku dhafan (modified cash basis) waxaa lagu dabaqayaa sanad canshuureedka shakhsi Dalka degaan ku ah marka dakhliga qofka ka soo gala ganacsiga sannadkii:

b) uu ka helay keliya gudaha Soomaaliya;

t) iibkiisa ganacsi uusan ka badneyn 200,000 USD sannadkii (oo ku salaysan celceliska saddexdii sano ee hore); iyo

j) nidaam canshuureedka la-khafiifiyay ee ku xusan faqradda 2 uusan khuseynin, oo ay ku jirto inuu shakhsigu doortay inuusan nidaamkaasi qaadanin.

2) Qaab xisaabeedka kaashka ee isku dhafan (modified cash basis) ayaa lagu dabaqayaa sanad canshuureedka shuraako Dalka degaan ku ah haddii:

b) shuraakadu ay ku kooban tahey keliya wadaagayaal dalka deegaan ku ah;

t) dakhliga shuraakada ee sanadka uu ka yimid keliya gudaha Soomaaliya; iyo

j) iibka ganacsi ee shuraakadana uusan ka badneyn 200,000 USD sannadkii (oo ku salaysan celceliska saddexdii sano ee hore); iyo

3) Shakhsi ama shuraako waa ay dooran karaan inay sanad canshuureedkooda ku saleynin qaab xisaabeedka kaashka ee isku dhafan (modified cash basis), markaasoo qaab xisaabeedka kaashka ee isku dhafan (modified cash basis) aysan raaceynin sanadkaas iyo labada sano ee ka dambeysa.

4) Haddii qaab xisaabeedka kaashka ee isku dhafan (modified cash basis) la raacayo, dakhliga ganacsi ee shakhsiga ama shuraakada:

b) waxaa loo xisaabinayaa si waafaqsan xeerarka caadiga ah (standard rules) ee xisaabinta dakhliga ganacsiga, laakiin waxaa la raacayaa wax ka bedelka farqad-hoosaadka (5);

t) loona canshuurayaa:

i) haddii uu yahay shakhsi, boqolleyda caadiga ah ee lagu sheegay Jadwalka Koowaad; iyo

ii) haddii ay tahay shuraako, isla boqolleydaasi, marka wadaagayaasha loo kala qoondeeyo dakhliga sida ku cad Qodobka 56-aad.

5) Waxka bedelka:

b) in loola dhaqmo qaybta 4aad ee hantida qiimo-dhacda (eeg farqadda 1(1) ee Jadwalka Afraad) in ay yihiin hanti raasumaal ee ganacsiga;

t) in dheefta faa'idado ee ka soo baxda hantida qiimo-dhacda lagu daro xisaabinta dakhliga;

j) kharashyadda waxaa la goyn karaa oo kaliya haddii lagu xaqiijiyo tignoolajiyadda xaqiijinta ee la cadeeyay;

x) iyada oo la raacayo farqad-hoosaadka (j), waxa la goynayaa kharashaadka gala qiimaha (cost) badeecad ganacsiga ama hantida qiima-dhacda ee sanadka gudihiisa

haddii ay buuxiyaan shuruudaha Qodobka 17(1) ee (Xeerka Jarida Haraaga ee Ganacsiga), iyada oo aan la dabaqayn qodobka 17(2);

kh) looma ogola in la gooyo faa'idada deynta ama kharashaadka kale ee lagu galay aaldaha maaliyadeed ama loo galay haynta ama ka kaaftoomidda aaladaha maaliyadeed;

d) lama raacayo Qodobbada 19aad (badeeco ganacsi), 20 (qiima dhaca hantida), 22 (aaladaha maaliyadeed), 36 (Finance Leases, Instalment Sales and Sanadle) iyo 44 (daymaha); iyo

r) iyadoo aan loo eegeyn Qodobka 26-aad, in la isticmaalo qaabka xisaabaadka kaashka marka la xisaabinayo dakhliga.

6) faqraddan, "iibka ganacsiga (turnover)" ee sanad canshuureed waxa uu leeyahay macnaha lagu lagu siiyay faqradda 2 ee Jadwalka.

JADWALKA SADDEXAAD: CANSHUURTA LA-DHAAFAY (EXEMPT AMOUNTS)
(Qodobka 15)

1) Dakhliga Dowladda Federaalka, Dowlad Goboleedyada iyo Dowladaha Hoose waa la dhaafayaa, laakiin lama dhaafayo dakhliga ka yimaada howlaha keliya si dadban ugu xiran howlaha Dowladda.

2) Hadii uu ka dhaafitaanku waajibiyo heshiis caalami ah oo ay Soomaaliya fulineyso:

b) dakhliga hey'adaha caalamiga ah;

t) mushaharka iyo gunooyinka kale ee wakiilada dublamaasiyadda iyo qunsuliyadda dawladaha shisheeye ku helaan hawlaha la xiriirta shaqooyinkooda; iyo

j) mushaharka iyo gunooyinka saraakiisha iyo shaqaalaha Qaramada Midoobay iyo hay'addeeda gaarka ah iyo hay'adaha shisheeye iyo kuwa caalamiga ah ka helaan hawlaha la xiriirta shaqooyinkooda.

JADWALKA AFARAAD: QIIMA DHACA LA-OGOL YAHAY (DEPRECIATION ALLOWANCES)
(Qodobka 20)

1. Kala- Soocidda iyo isu-darka Hantida Qiima Dhacda

1) Hantidda qiima dhacda waxa loo kala saaraa sidan soo socota:

NOOCA	HANTIDDA QIIMO DHACDA
1	Kharashaadka Kombiyuutarada, cilmi baarista iyo horumarinta (eeg farqadda (4) iyo (5) ee hoose), qalabka maaraynta xogaha (data handling equipment), iyo mashiinadda deegaanka ee la ogol yahay (approved environmental machinery).
2	b) Baabuurta, basaska iyo basaska yaryar, gawaarida alaabaha qaadda; t) Qalabka dhismaha iyo makiinadaha carro-qodista (earth-moving equipment), gawaarida culus ee xamuul gaar ah ama xamuul guud, tareelayaasha (trailers) iyo tareelayaasha qaada konteenarada (trailer-mounted containers); j) Qalabka iyo mashiinada wax soo saarka loo adeegsado.
3	b) Gawaarida tareenka, matoorla tareenka (locomotive), iyo qalabkooda; t) Maraakiibta, sactarka, barges, iyo gaadiidka biyaha ee la midka ah; j) Diyaaradaha; x) Warshadaha, mashiinada iyo qalabka danta guud (public utility plants); kh) Agabka xafiiska, qalabka rakibaadda (wax rakibidda loo adeegsado), iyo qalab-xafiisyeedyada kale; d) Hanti kasta oo la taaban karo oo aan lagu darin qaybaha kale.
4	Dhismayaasha, qaab-dhismeedyada (structures), iyo shaqooyinka la midka ah ee joogtada ah;
5	Hantida aan la taaban karin oo aan lagu darin qaybaha kale.

2) Hanti kasta oo qiimo-dhacda oo uu leeyahay isticmaalana shakhsi muddada sanad canshuureedka oo laga soo saaro dakhliga qofka ka soo gala ganacsi gaar ah, marka ugu horeysa ee hantida la hantiyo ee loo isticmaalo habkaas, waxa lagu darayaa hantida isku nooca ah:

b) marka ay tahay darajada1, 2 ama 3 ama hanti qiima dhacda (marka laga reebo mida lagu sheegay farqad-hoosaadka (j)), iyo dhamaan hanti kasta oo kale oo ku jirta isla darajadda uu leeyahay oo uu isticmaalo qofka ganacsigaas;

t) marka ay tahay darajada 4 ama 5 ama hantida qiimo dhacda, waxaa loola dhaqmaa inay ka duwan tahay hantida kale ee isla darajadaas ama nooc kasta oo kale; iyo

j) marka ay tahay hanti guurta ah oo uu u isticmaalo shakhsi ka hawl gala Ganacsiga dhulka, badda ama hawada ama kiraystaha si uu u qaado rakaab, boostadda, xoolo ama hanti kale oo la taaban karo oo u kala gooshta wadamo kala duwan, waa laga soocayaa hantiyaha kale ee qayb kasta.

3) Marka hanti qiimo dhacaysa oo uu shakhsi leeyahay, uu qeyb ka mid hantidaasi u isticmaalo inuu kasoo saaro dakhli ganacsi, keliya qaybtaas ayaa lagu darayaa hantida qiima dhacda ee la nooca / qeybta ah.

4) Kharashaadka cilmi baadhista iyo horumarinta ee uu qofku galo waxa loola dhaqmaa in lagu galay sidii loo heli lahaa hanti qiima dhacda oo uu qofku u isticmaalayo inuu dakhli kasoo saaro.

5) Faqraddan, "kharashaadka cilmi-baarista iyo horumarinta" :

b) waxa loola jeedaa kharashaadka ilaa loo galay:

i) in dakhli laga soo saaro ganacsi;

ii) sameynta daraasad cilmiyeysan ee sayniska iyo tiknaloojiyadda; iyo

iii) in natiijada daraasadda loo adeegsanayo soo-saaridda ama sare-u-qaadista wax-soo-saar ee walxo (materials), aalado/qalab devise), badeeco (products/produce) ama habraac wax-soo-saarid;

t) waxaa laga saarayaa kharashaadka:

i) loo galay:

B) ilaalinta tayadda wax-soo-saarka ama tijaabinta joogtada ah ee alaabta, aaladaha / qalabka, ama waxyaalaha lasoo saaro;

T) cilmi-baaris ku saabsan culuumta bulshada (social science) ama aadanaha (humanities);

J) xog uruurin joogta ah;

X) Ra'yi uruurin hawlwanaag (efficiency survey) ama daraasad maamul; ama

KH) Cilmi-baaris suuq-geyn, xayeysiinta iyo kobcinta iibka; ama

ii) laga jari karo ama lagu dari karo qiimaha (cost) hantida.

2. Dhimista hantida ee la ogol yahay (Depreciation Allowances)

1) Iyadoo la raacayo faqradan, dhimis qiimadhac ayaa shakhsiga sanad canshuureedkiisa loogu ogolaanayaa nooc kasta oo ka mid ah hantida qiima dhaceysa:

b) oo u dhiganta qiimo dhaca sanadkaas ee nooc kasta ee hanti;

t) waxaana loo xisaabinayaa si waafaqsan faqrad-hoosaadka (3) iyo (6).

2) Qiima dhaca sanadka canshuureedka nooc kasta oo ka mid ah hantida qiima dhacaysa waxa loo xisaabinayaa:

b) noocyada 1, 2 iyo 3, si waafaqsan habka hoos-u-dhaca qiimaha hantida (diminishing value method); iyo

t) noocyada 4 iyo 5, si waafaqsan habka tooska ah (straight-line method).

3) Qiima dhaca waxaa lagu xisaabinayaa qaacidada soo socota:

A x B

halka:

A = ay tahay saldhigga dhimista (depreciation basis) ee ee hantida la isku-darey dhamaadka sanadka; iyo

B = ay tahay boqolleyda qiima-dhaca ee nooca hantidu la isku-darey ka tirsan tahay.

4) Tacriifadda qiimo dhaca (depreciation rates) ee loo isticmaalayo kolba inta nooca hantidu la isku-darey ee lagu cadeeyey farqad hoosaadka (3) waa:

NOOCA	BOQOLLEYDA

1	40%
2	30%
3	20%
4	20%
5	50%

5) Hantida aan la taaban karin waxaa loola dhaqmayaa in ay leedahay cimri dhan 15 sanadood haddii aysan lahayn cimri waxtareed oo la ogaan karo.

6) Haddii saldhigga dhimista (depreciation basis) ee noocyada 1, 2 ama 3 ee hantida qiima dhacda ee dhamaadka sanad canshuureedka (lagu yareeyey qiimo-dhaca lagu xisaabiyay farqadda (2)) ay soo saarto qadar ka yar qiimaha ugu yar ee la cayimay, dhimista dheeraad ah ee hantida waxaa loo xisaabinayaa in ay le'egtahay lacagtaas.

7) Dhimista shakhsi loo ogol yahay sanad canshuureedka ee ku cad farqad-hoosaadka (1) ee noocyada 4 ama 5 ee hanti qiimo-dhacda kama badan karto faraqa u dhexeeya:

b) saldhigga dhimista hantida ee dhamaadka sanad canshuureedka; oo laga gooyay

t) dhammaan dhimistii shakhsiga loo ogolaaday sanadihii hore ee isla hantida.

3. Saldhigga dhimista ee hanti qiima-dhacda (Depreciation Basis of a Pool of Depreciable Assets)

1) Saldhigga dhimista hantida ee noocyada 1, 2 ama 3 ee shakhsiga dhamaadka sanad canshuureedka waa:

b) wadarta guud ee:

i) saldhigga dhimista hantida ee dhammaadka sannad canshuureedkii hore, haddiiba ay jirto, ka dib marka laga gooyo dhimista hantida ee sandkaasi hore ee loo xisaabiyay sida ku cad faqrad-hoosaadla 2; iyo

ii) qadarta lagu daray saldhigga dhimista hantida ee sanad canshuureedka taasoo lagu daray qiimaha (cost) hantida ama dhimisteeda; oo

t) laga dhimay, balse aan ka hooseynin eber, dheefta faa’iido ee hantida ee sanadka canshuureedka.

2) Saldhigga dhimista hantida ee noocyada 4 ama 5 ee shakhsiga dhamaadka sanadka canshuureedku waa:

b) wadarta guud ee:

i) saldhigga dhimista ee hantida dhammaadka sannad canshuureedkii hore; iyo

ii) qadarta lagu daray saldhigga dhimista hantida ee sanad canshuureedka taasoo lagu daray qiimaha (cost) hantida ama dhimisteeda.

t) laga dhimay, balse aan ka hooseynin eber, dheefta faa'iido ee hantida ee sanadka canshuureedka.

3) Hadii, farqadda 1(3) awgeed, keliya qayb ka mid ah hantida ay qiima-dhaceyso, qiimaha (cost) iyo dheefta faa'iido ee hantida waxaa loo kala xirayaa si waafaqsan sicirka suuqa ee qaybtaas qiima-dhaceysa iyo qaybta kale ee aan qiima dhaceyn.

4) Iyada oo la raacayo Jadwalkan oo keliya, qiimaha (cost) gaari (marka laga reebo gaari ganacsi) lama aqoonsanayo hadii ay ka badan tahay qiimaha la cayimay.

5) Iyada oo la raacayo farqad hoosaadka (4), "gaari ganacsi" waxaa loola jeedaa:

b) gaari wado oo loogu talagalay in uu qaado rar ka badan nus tan ama in ka badan 13 rakaab; ama

t) gaari loo isticmaalo gaadiid ahaan ama ganacsiga kiraynta baabuurta.

4. Ka Kaaftoomidda Hantidda Qiima-Dhacda (Disposal of Depreciable Assets)

1) Wixii ka dheeri ah marka la is-barbar dhigo labadan lacagood ee soo socda waxa lagu daraa xisaabinta dakhliga shakhsiga sanad canshuureedkii uu ka helay ganacsiga isagoo isticmaalay ama isticmaalaya hanti qiima-dhacaysa:

b) dheefta faa'iido ee uu shakhsi sanadka gudihiisa ka helo nooc kasta oo hanti qiima-dhaceysa sanadkaasi gudihiisa; ee ka badan;

t) inta ay tilmaameyso farqad-hoosaadka (i) ama (ii), kolba sida ku habboon:

i) marka ay tahay noocyada 1,2 ama 3, asalka dhimista ee dhamaadka sanadka, laakiin la iska dhaafayo dheefta faa'iido ee lagu sheegay farqad hoosaadka (b) ee sare ; ama

ii) marka ay tahay noocyada 4 ama 5, qiimaha qoran ee hantida ee dhammaadka sanadka laguna xisaabiyay farqad-hoosaadka (3), laakiin la iska dhaafayo dheefta faa'iido ee lagu sheegay faqrad-hoosaadka (b) ee sare.

2) Marka dhammaan nooc ka mid ah hantida qiima-dhaceysa ee shakhsi laga kaaftoomo dhamaadka sanad canshuureedka, noocaasi hantida waa la baabi'inayaa (dissolved),

islamarkaasina:

b) qadar lacageed waxaa lagu darayaa xisaabinta dakhliga shakhsiga ee sanadka iyadoo loo xisaabinayo si waafaqsan qaacidada soo socota:

A – B

ama

t) dhimis ayaa loo ogolaanayaa shakhsiga sanadkaasi iyadoo loo xisaabinayo si waafaqsan qaacidada soo socota:

B – A

Halka:

A = ay tahay dheefta faa'iido ee uu hakhsigu ka helay hantida sanad canshuureedka; islamarkaasina

B = ay u tahay isku darka:

i) qiimaha qoran ee hantida dhammaadka sannad canshuureedkii hore; iyo

ii) qaddarta lagu daray saldhigga dhimista ee hantida sanadka canshuureedka.

3) Faqradan, "qiimaha qoran" ee isu-darka hanti qiimo-dhacda ee dhamaadka sanadka canshuureedka waxa loola jeeda:

b) marka ay tahay noocyada 1, 2 ama 3 ee isu-darka hanti, saldhigga dhimista hantida ee dhamaadka sanadka, hadii ay jirto, marka laga gooyo qiima-dhaca hantida ee sanadka sida lagu xisaabiyay farqadda 2; ama

t) marka ay tahay noocyada 4 ama 5 ee isu-darka hanti, saldhigga dhimista hantida ee dhammaadka sannadka oo laga gooyay dhammaan dhimistii loo ogolaa shakhsiga sida ku xusan faqradda 2 ee hantida ee sanadka iyo sannad canshuureed kasta ee ka horeeyay.

4) Iyada oo la eegayo faqraddan, qofku waxa uu ka kaaftoomayaa hantida qiimo-dhacaysa ee lagu sheegay farqadda 1(4) kaliya haddii uu shakhsigu ganacssiga ka iibiyo shakhsi kale oo aan aheyn qof-u-dhow (ay isleeyihiin).

JADWALKA SHANAAD: QIYAASIDDA DHEEFTA (QUANTIFICATION OF BENEFITS)
(Qodobka 32)

1. Dheefta Gaariga/Baabuurka (Motor Vehicle Benefits)

1) Lacagta lagu bixiyo isticmaalka gaari ama diyaarinta gaari si loo isticmaalo bil gudaheed waxaa loo qiyaasayaa sida jaantuska hoose hadii lacagta ama gaariga:

b) loo bixiyay ku bedelashada adeeg (haddii ay tahay shaqo ama si kale); ama

t) ay hay'ad siisay xubin ka tirsan ama maareeyaha hay'ada:

CABIRKA MATOORKA GAARIGA	**LACAGTA LA-BIXINAAYO**	
	Gaari aan ka weynayn 5 sanno	**Gaari ka weyn 5 sanno**
Aan ka badnayn awooda 50 HP	[$75]	[$37.5]
In ka badan 50 laakiin aan ka badnayn awooda 100 HP	[$150]	[$75]
In ka badan 100 laakiin aan ka badnayn awooda 150 HP	[$300]	[$150]
In ka badan awooda 150 HP	[$600]	[$300]

2. Dheefta Amaahda (Loan Benefits)

1) Lacag bixinta ay ku jirto dheef amaah oo bil gudaheeda loo bixiyay ku bedelasho adeeg (haddii ay tahay shaqo ama si kale) ama ay hay'ad siisay xubin ka tirsan ama maareeyaha hay'ada waxa loo qiyaasayaa sidan:

b) qadarta lacageed ee la bixiyay waxaa loola dhaqmayaa iney tahay eber marka:

i) amaahda uu loo shaqeeyahu siiyo shaqaale;

ii) mudada amaahdu ay ka yar tahay laba iyo toban bilood; iyo

iii) wadarta guud ee amaahda iyo amaahda taagan ee laba iyo tobankii bilood ee lasoo dhaafay aysan ka badneyn wadarta mushaharka asaasiga ah ee sadex bilood; iyo

t) xaalad kasta oo kale, waa qadarta:

i) faa'idada amaahda ee uu bixin lahaa amaah qaataha sanad canshuureedka

gudihiisa hadii amaahda lagu bixin lahaa boqolleyda faa'ido ee caadiga ah, ay ka badan tahay;

ii) faa'idada amaahda ee uu amaah qaatuhu bixiyay sanad canshuureedka, hadiiba ay jirto.

2) "Boqolleyda loo asteeyay (prescribed rate)" waa boqolleyda lagu qeexay xeer-nidaamiye loo sameeyay ujeedooyinka Jadwalkan. Hadii uusan xeer-nidaamiye jirinna waa [6%].

3. Dheefta Hoyga (Accommodation Benefits)

1) Lacag bixin ay ku jirto diyaarinta dhismo (ay dhex yaallaan alaab guri iyo agabk kale) ee uu loo shaqeeye deegaan ahaan u siiyay shaqaale bil gudaheed waxaa lagu qiyaasayaa qiimaha kirada dhismahaasi oo laga gooyay kirada uu shaqaaluhu bixiyo bishii.

2) Qiimaha kirada dhismaha waxaa uu noqonayaa sidan:

b) hadii uu yahay shaqaale u qalma - kan yar **A ama B**; iyo

t) hadii uu yahay shaqaale u qalmin - **A,**

halka:

A = ay tahay qiimaha kirada suuqa ee qaybta uu dhismaha ka daganaa shaqaalaha ee mudadii bisha ama qeyb ka mid ah bisha; iyo

B = ay tahay kan weyn:

i) boqoleyda ku haboon ee lagu kordhinayo dakhliga ka soo galey shaqaalaha shaqada bishaa, oo la xisaabiyey iyadda oo aan lagu darin dheefta hoyga iyo, sidoo kale haddii hoyga la deganaa qayb ka mid ah bisha keliya qeyb ahaan uun loo xisaabinaayo; iyo

ii) kharash dhimista uu loo shaqeeyuhu kusoo gudbiyo xisaabinta dakhliga canshuur-galka ah ee la xiriirta bixinta / diyaarinta dhismaha intii uu deganaa shaqaalaha sanadkaa sanadka gudihiisa.

3) Faqraddan dhexdeeda:

b) "boqollayda habbooni" waa:

i) haddii uu yahay hoy goglan - 15%;

ii) haddii uu yahay hoy aan goglaneyn - 10%;

iii) haddii ay tahay gogol keliya - 5%; iyo

iv) haddii uu yahay hoy la wadaago - 5%; iyo

b) "shaqaale u qalma" waxa loola jeedaa shaqaale dakhliga uu ka helo shaqadda sanad canshuureedka uusan ka badneyn [12,000 USD], oo la xisaabiyay iyadoo aan lagu darin bixinta dhismaha.

JADWALKA LIXAAD: LA-JAANQAADIDA WAX- KA BEDELKA (QODOBKA 104)

Qaybta I
Sharciga Canshuurta Toosan (Sharci Lr. 5 ee 5-ta Noofambar 1966)

Dhamaantiis ayaa la nasakhay.

Qaybta II
Waxka bedelka Sharciga Maamulka Dakhliga (Sharci Lr. 13 ee 27-ka Oktoobar 2019)

Qodobka 3-aad waxaa lagu bedelayaa sidan soo socota:

1) Sharciyada dakhliga waxaa loo maamulayaa si waafaqsan Sharcigan.

2) "Sharci dakhli" waxa loola jeeda:

    b) sharciyada soo socda:

        i) Sharcigan;

        ii) Sharci Canshuuraha Furdooyinka (Sharci Lr. 21 ee 5-ta Febraayo 2020);

        iii) Sharci Canshuurta Wadomarista (Sharci Lr. 4 ee 28 December 1965);

        iv) Sharci Moorka (Sharci Lr. 6 ee 6 Disembar 1966);

        v) Sharci Canshuurta Gadidda (Sharci Lr. 2 ee 7 Janaayo 1984);

        vi) Sharci Canshuurta Excise-ka (Sharci Lr. 3 ee 23 Maajo 1985);

        vii) Sharciga Canshuuraha Kheyraadka Dhulka Laga Qodo (Sharci Lr. 10 ee Maarso 2023); iyo

        viii) Sharci kasta oo kale oo lagu daro liiska, iyadoo loo maraayo xeer-nidaamiye;

    b) Hishiis kasta oo caalami ah oo lagu qeeay Qodobka 5-aad ee Sharciga Maamulka Dakhliga; iyo

c) Xeer-nidaamiye kasta oo loo soo saaray si waafaqsan Qodobka 6-aad ee Sharciga Maamulka Dakhliga ama mid kamid ah shuruucda ku xusan xaraf (a) ee faqradaan.

Jadwalka Labaad farqadda 1(b) ku badel kuwan soo socda:

b) wixii la xiriirta canshuurta dakhligacanshuurta dakhliga:

i) Warbixin canshuureedka waxa lagu soo xareeynayaa sida ku cad Qodobka 93aad ee Xerka canshuuraha dakhliga (Xeer Lr. !! of !! 2022);
ii) Qiyaasta dakhliga canshuur galka ah ama faa'iidada waxa lagu soo xareeynayaa sida ku cad Qodobada 98 ama 100 ee Xeerka Canshuuraha Dakhliga (Xeer Lr. !! of !! 2022), sida ay u kala horreeyaan; iyo
iii) Soo Xisaab celinta dakhliga waxa lagu soo xareeynayaa sida ku cad Qodobka 101 ee Xeerka Canshuuraha Dakhliga (Xeer Lr. !! of !! 2022);"

Qaybta III: Wax-ka-beddelka Sharciga Canshuuraha Kheyraadka Dhulka Laga Qodo (Sharci Lr. 10 ee Maarso 2023)

Qodobbada 5 (1), 15 (1) iyo 30 (1), "Sharciga Canshuurta Tooasan (Sharci Lr. 5 ee 5tii Noofambar 1966, No. 5)" waxaa lagu bedelay "Sharciga Canshuurta Dakhliga (Sharciga Lr. !! of ! 2024)"
Qodobka 10(g) waxa lagu beddelay sidan:
"Kharashka gaarka ah ama kharashka la saaray waxa ay yeelanayaan macnaha lagu sheegay Sharciga Canshuurta Dakhliga (Xeer Lr. !! of !! 2024)"
Qodobka 20(g) waxa lagu beddelay sidan:
" Kharashka gaarka ah ama kharashka la saaray waxa ay yeelanayaan macnaha lagu sheegay Sharciga Canshuurta Dakhliga (Xeer Lr. !! of !! 2024)"

Qodobka 30-aad

1) Faqradda (2)(a), "farqadda 8 ee Jadwalka Saddexaad ee Sharcigan" kuna beddel " waxa lagu beddelay Qodobka 97aad ee Sharciga Canshuurta Dakhliga (Xeer Lr. !! of !! 2024)"
2) Farqadda (2) (b), "Qodobbada 25aad iyo 26aad ee Sharciga Canshuurt Toosan (Xeer 5 Noofambar 1966, No. 5)" waxa lagu beddelay "Qodobka 101aad ee Sharciga Canshuurta Dakhliga (Xeer Lr. !! of !! 2024)"

3) Farqadda (3) (d), "faqradda 8 ee Jadwalka Saddexaad ee sharcigan ama qodobka 28aad ee Sharciga Canshuurta Toosan (Xeer 5 Noofambar 1966, No. 5), sida uu xaaladda ugu baahan tahay" waxa lagu beddelay "qodobka 98aad ee Sharciga Canshuurta Dakhliga (Xeer Lr. !! of !! 2024)"

Qodobka 31-aad:

1) Faqradda (1) waxaa lagu bedelayaa:

   "Qofka sameynaya ama sameeyay hawlaha qodista waa inuu canshuurta ka reebaa uu bixinaayo sida uu dhigayo Sharciga Canshuurta Dakhliga (Xeer Lr. !! of !! 2024). Haddii ay tahay hay'ad Dalka degaan ku ah, arinkan waxaa ku jira (laakiin aan ku koobneyn) canshuur ka-reebidda faa'idada saamiga sida uu waajibinayo Qodobka 91aad ee Sharcigaas balse lagu laga qaadayo boqolleyda lagu sheegay faqradda 3(2) ee Jadwalka kowaad iyo 3(2) ee Jadwalka Labaad ee sharcigan".

2) Faqrada (2), "faqrada 10 ee Jadwalka Saddexaad" waxa lagu beddelay "Qodobka 9(1)(c) ee Sharciga Sharciga Canshuurta Dakhliga (Xeer Lr. !! of !! 2024), boqolleyda lagu qeexay faqradda 3(3) ee Jadwalka Koowaad iyo faqradda 3(3) ee Jadwalka Labaad ee Sharcigan"

Qodobka 35-aad:

b) Faqradda (1):

   i) Qeexitaanka "dad isleh", "faraqada 1 ee Jadwalka Saddexaad" waxaa lagu bedelay "Sharciga Canshuurta Dakhliga (Xeer Lr. !! of !! 2024)"

   ii) Qeexitaanka "kharashka (cost)", "faraqada 4 ee Jadwalka Saddexaad" waxaa lagu bedelay "Sharciga Canshuurta Dakhliga (Xeer Lr. !! of !! 2024)"

   iii) Qeexitaanka "Ka kaaftoomid", "faqrada 6 ee Jadwalka Saddexaad" waxaa lagu bedelay "Sharciga Canshuurta Dakhliga (Xeer Lr. !! of !! 2024)"

   iv) Qeexitaanka "borosiidka (proceed)", "faqrada 5 ee Jadwalka Saddexaad" waxaa lagu bedelay "Sharciga Canshuurta Dakhliga (Xeer Lr. !! of !! 2024)"

   v) Qeexitaanka "Dalka degaan ku", "faqradda 11 ee Jadwalka Saddexaad" waxaa lagu bedelay "Sharciga Canshuurta Dakhliga (Xeer Lr. !! of !! 2024)"

   vi) Qeexitaanka "Xeerarka beeca eexda", "faqrada 3 ee Jadwalka saddexaad" waxaa lagu bedelay "qodobka 37 ee "Sharciga Canshuurta Dakhliga (Xeer Lr. !! of !! 2024)"

vii) Qeexitaanka "sanadka canshuureedka", "qodobka 6aad ee Sharciga Canshuurta Toosan (Sharci Lr.5 ee 5 Noofambar 1966)" waxaa lagu bedelay "Qodobka 25aad ee "Sharciga Canshuurta Dakhliga (Xeer Lr. !! of !! 2024)"

b) Farqadda (3), "Sharciga Maamulka Dakhliga (Sharci Lr. 13 ee 27 Oktoobar 2019)" gadaashiis waxaa lagu daray "iyo Sharciga Canshuurta Dakhliga (Xeer Lr. !! of !! 2024)"

Jadwalka Kowaad, Farqadda 3 waxa lagu bedelay sidan soo socota:

1) Boqolleyda Canshuurta Dakhliga ee howlaha batroolka waa 30%.

2) Boqolleyda canshuurta laga reebayo faa'idada saamiga laguna sheegay qodobka 31(1) waa 10%.

3) Boqolleyda canshuurta faa'idada faraca ee lagu qeexay Qodobka 31(2) waa 10%."

Jadwalka Labaad , Farqadda 3 waxa lagu bedelay sidan soo socota:

1) Boqolleyda Canshuurta Dakhliga ee howlaha macdanta waa 30%.

2) Boqolleyda canshuurta laga reebayo faa'idada saamiga laguna sheegay qodobka 31(1) waa 10%.

3) Boqolleyda canshuurta faa'idada faraca ee lagu qeexay Qodobka 31(2) waa 10%."

Waxaa la baabi'yay Jadwalka Seddexaad.

Qaybta IV: Sharciyada Kale

Qodobada ku jira sharci kasta oo kale oo ka hor imaanaya qodobada Sharcigani waa la baabi'yay.